# CILMIGA BULSHADA

## BUUGGA ARDAYGA

Fasalka 5aad

ISBN 978-99944-2-114-5

JAMHURIYADA DIMOQRAADIGA FADARAALKA ITOOBIYA
WASAARADDA WAXBARASHADA

Birr 68.00

CILMIGA BULSHADA BUUGGA ARDAYGA Fasalka 5aad


MOE



CILMIGA BULSHADA

BUUGGA ARDAYGA

Fasalka 5aad



JAMHURIYADA DIMOQRAADIGA FADARAALKA ITOOBIYA
WASAARADDA WAXBARASHADA



# CILMIGA BULSHADA

## BUUGGA ARDAYGA

### Fasalka 5aad



JUMHURIYADA DIMOQRAADIGA FADARAALKA EE ITOOBIYA

WASAARADDA WAXBARASHADA

# Buugan Ilaali oo daryeel.




**Buugani waa hantida Dugsigiina**

**Daryeel si aynan waxyeelo u gaadhin. Hoos waxa kuxusan 10 firadood oo ah talooyin kaa caawinaysa sida ad buuga u ilaa linaysid una daryeelaysid.**

1. Buuga ku jaldiyee jaldi ku haboon dhawrista sida Bilaastiga waraaqad adag sida Jaraaiidka la akhristay.
2. Markasta meesha ad buuga dhigaysaa waa in ay ahaataa meel nadiif ah oo engagan.
3. Buuga marka aad isticmaalaysid waa in ay gacmahaagu nadiif ahaadaan.
4. Waxna ha ku qorin buuga jalddi giisa ama boggaga dhaxdiisa.
5. Isticmaal waraaqad yar ama kaardi yar markaad bog calaamadaysanaysid.
6. Fadlan ha ka jeexin ama haka jarin sawir ama bog.
7. Boggaga jeexma ku kab, Xamag ama bilaastar.
8. Buuga markaad dugsiga uqaadanaysid boorsada ama shayga aad ku qaadanaaysid qumaati u dhaxdhig si uunan u jacdadin ama u jajabin.
9. Buuga marka aad qofkale u dhibaysid si taxadar ah ugu dhiib.
10. Buuga cusub marka ugu horaysa ee aad isticmaalkiisa bilaabaysid dhinicisa ay boggagiisa u dan beeya ay ku yaaliin u jiifi kadibna markiiba dhawr bogg fur ama banne. Marka aad bogg rogaysid, Cidhifka uu ka taxan yahay gacanta kale ku yar xaji. sidaasina daryeelka jaldiga buuga ayay u wanaagsantahay.

# CILMIGA BULSHADA

## BUUGGA ARDAYGA

### FASALKA 5AAD


**Qorayaasha, Tafatirayaasha:**

Cabdlcasiis Maxamed Aadan (Baaruud)
Cali Muxumed Bakaal

**Qiimeeyayaasha:**

Maxamed Cabdi Roble
Maxamed Bade Maxamuud
Deeq Axmed Badal



JAMHUURIYADA DIMUQRAADIGA FEDARAALKA
ITOOBIYA, WASAARADA WAXBARASHADA


STAR

Wasaarada waxbarashada ee jamhuuriyada Dimoqraadiga Fedaraalka Itoobiya mashruuca hoos yimaad ee uqaybsan kor u qaadista iyo horumarinta tayada waxbarashada Guud oo taageero ka helay hayada IDA Credit No. 4535 ET oo ah the Fast Track Initiative catalytic fund iyo dawladaha Finland, Italy, Netherland iyo United Kingdom.

© 2011 wasaarad waxbarashada ee jamhuuriyada Dimoqraadiga Federaalka Itoobiya. Xuquuqda buuggani way u dhawsan tahay wasarada waxbarade ee JDFI. Buugga ama qayb ka mid ah buugga lama guurin karo lama daabici karo lamana baahin karo, iyada oo la adeegsanayo qalabyada eletirooniksa iyadoo ogolaansho qoraal ah aan laga haysanin wasaaradda waxbarashada ama liisan ka saamaxaya xeerka qodobka No. 4/0/2004 ee xuquuqda daabaca oo ah maqaal ay jumhuriyada Dimoqraaidiga Fedaraalka Itoobiya.

Wasaaradda waxbarashadu waxay u mahad naqaysaa shakhsiyaadka iyo kooxaha si toos ah iyo si dadban uga qayb qaatay daabicista iyo soo saaridda buuggan.

Kuwa haysta ogolaashaha qoraalka laakiin lagu eedeeyo inay gaf ka galeen xuquuqda buugga. Waa in ay la xidhiidhaan xafiis waynaha wasaaradda Waxbarashada ee ku taala Arata kiilo, Adiss Ababa, Itoobiya.

***Waxaa Soo saray oo daabacday***

STAR EDUCATIONAL BOOKS DISTRIBUTORS Pvt. Ltd.

24/4800, Bharat Ram Road, Daryaganj,

New Delhi – 110002, INDIA

**iyo**

ASTER NEGA PUBLISHING ENTERPRISE

P.O. Box 21073

ADDIS ABABA, ETHIOPIA

*Under GEQIP Contract No. ET-MoE/GEQIP/IDA/ICB/G-07/09-B.*

ISBN 978-99944-2-114-5

# Tusmada Buuga


## Cutubka 1aad

### Dadka, Meelaha Ay Dhacaan Iyo Daaganka Itoobiya Iyo Geeska Afrika 1

**1.1** HALKA AY DHACAAN DALALKA GEESKA AFRIKA 2

**1.2** TAARIIKHDA DADKA IYO DAGAANKA ITOOBIYA IYO GEESKA AFRIKA 6

**1.3** QARAMADII UGU HOREEYAY EE ITOOBIYA IYO GEESKA AFRIKA 14

**1.4** XAALADAHA SALDHIGA U AH KALA DUWANAANSHAHA DAGAAMEYNTA IYO HAB-NOLALEEDKA 38

## Cutubka 2aad

### Dhulka Iyo Waxa Ku Xeeran 47

**2.1** MEESHA AAN KU NAALLO (DHACNO) 48

**2.2** QAABKA DHULKA, DHAQAAQA IYO SAAMEYNTIISA 57

**2.3** SAAMEYNTA AY XILLIYADU KU LEEYIHIIN BEER QODASHADA IYO XOOLA DHAQASHADA 69

## CUTUBKA 3AAD


DEEGAANKEENA 73

3.1 NOOCYADA WAA WEYN IYO KUWA WAXTARKA LEH EE DHIRTA DABIICIGA AH IYO XAYAWAANADA DUUR JOOGTA AH 74

3.2 WAXTARKA DHIRTA DABIICIGA AH IYO XAYAWAANADA DUUR JOOGTA AH 83

3.3 SAAMEYNTA AY DHAKHSA U KORADHKA TIRADA DADKU KU LEEDAHAY DHIRTA DABIICIGA AH IYO XAYAWAANADA DUUR-JOOGTA AH 86

3.4 DHAWRIDDA DHIRTA DABIICIGA AH IYO XAYAWAANADA DUUR JOOGTA AH 87


## CUTUBKA 4AAD


ARIMAHA DADWEYNAHA 91

4.1 ARRIMAHA BULSHADA 92

4.2 SAAMEYNTA DHAKHSA U KORADHKA TIRADA DADKA 102

4.3 MAAMULKA SUUBAN, XUQUUQDA CARUURTA, SHILALKA IYO BADBAADADOODA 107

# Cutubka 1

## Dadka, Meelaha Ay Dhacaan Iyo Dagaanka Itoobiya Iyo Geeska Afrika



## Ujeedooyinka Guud ee Cutubka

***Marka uu cutubkan dhamaado kadib, ardadu waxay awoodi doonaan in ay:***

- Tilmaamaan halka uu Geeska Afrika dhaco.
- Magacaabaan wadamada Geeska Afrika iyo caasimada hooda.
- Muuqaal ku muujiyaan halka ay Itoobiya daris ahaan dhacdo (kutaalo).
- Caddeeyaan goobaha arkiyoolajiga ee Itoobiya iyo Geeska Afrika.
- Fahmaan iyo inay awoodi karaan inay sharaxaan jiritaanka diimaha waa weyn ay qarniyada ka wada jireen iyo isu dulqaadashadooda Itoobiya iyo Geeska Afrika.
- Aqoonsadaan jiritaanka qaramadii ugu horeeyey ee Itoobiya iyo geeska Afrika.
- Fahmaan taariikh ahaan iyo siyaaso ahaan guulihii waa weynaa ee ay horay uga gaadheen qaramadii Itoobiya iyo geeska Afrika.
- U bogaan ama ay u qiraan awooda iyo adkaanta qaramadii hore ee Itoobiya.
- Fahmaan himilooyinka ugu muhiimsan ilbaxnimada cusub.
- Falanqeeyaan kaladuwanaanshaha dagaamada, dhaqanka iyo hab-nolaleedka dadka dhulka jooga sare iyo dhulka jooga hoose ee Itoobiya iyo waliba dadka miyiga iyo kuwa magaalada.


## Tusmooyinka Muhiimka ah


**1.1** HALKA AY DHACAAN DALALKA GEESKA AFRIKA.
**1.2** TAARIIKHDA DADKA IYO DAGAANKA ITOOBIYA IYO GEESKA AFRIKA.
**1.3** QARAMADII UGU HOREEYAY EE ITOOBIYA IYO GEESKA AFRIKA.
**1.4** XAALADAHA SALDHIGA U AH KALA DUWANAANSHAHA DAGAAMEYNTA IYO HAB-NOLALEEDKA.

- *Soo kobidda cutubka*
- *Su'aalo ka kooban cutubka dhamaantii*

# HORDHAC

Geeska Afrika waa fiiqa dhuuban ee ugu cidhifeeya dhanka Bari ee qaaradda Afrika, kaasoo ku yaala inta u dhaxaysa Badda Cas iyo Bad weynta Hindiya. Wuxuuna ka koobanyahay afarta waddan ee kala ah Jabuuti, Eratariya, Itoobiya iyo Soomaaliya. Bedka dhulka Geeska Afrika waa 22 milyan oo km$^2$. Waxaana ku nool in kabadan 90 milyan oo qof. Wuxuuna hoy u yahay oo ku wada nool dad ay jinsigooda, Luuqadooda iyo diintooduba kala duwanyihiin (dad jinsiyado, Luuqado iyo diimo kaladuwan Leh). Gobalka geeska Afrika wuxuu caan ku yahay khilaafaadka iyo dagaalada aan dhamaadka Laheyn.




Khariirada 1aad

*Khariiraddan muuqaal dhuleedka Geeska Afrika waxay ina tusaysaa sababta qaybtan qaaradda Afrika loogu magac daray (loogu bixiyay) Geeska Afrika.*

**Jaantuska 1.1: Khariirada muuqaalka dhulka Geeska Afrika**


## 1.1 HALKA AY DHACAAN DALALKA GEESKA AFRIKA

***Marka uu dhamaado cashirkan kadib, ardaydu waxay a woodi doonaan in ay:***

- Sharaxaan halka uu daris ahaan dhaco geeska Afrika guud ahaan iyo gaar ahaan Itoobiya.
- Magacaabaan wadamada ka tirsan geeska Afrika.
- Tilmaamaan caasimadaha wadamada Geeska Afrika
- Cabiraan ama sheegaan fogaanshaha u dhaxeeya caasimadaha wadamada Geeska Afrika.
- Sheegaan wadamada Geeska Afrika katirsan ee sida tooska ah marin badeedka u leh.

***Ma tilmaami kartaa Geeska Afrika muuqaal ahaan sida qaabkiisu uu u egyahay? Manoo sheegi kartaa sababta qeybtan qaaradda ka midka ah loogu magac daray Geeska Afrika?***

Fiiri Khariirad siyaasadeeda Afrika ee hoos ku sawiran, kadibna u soo bandhig oo ha kula wadaagaan fikirkaaga iyo waxaad ka fahantay khariirada ardayda fasalkiina.




**Jaantuska 1.2: Khariirada siyaasadeed ee Geeska Afrika**

Qeybta midabka ama khadda cagaarka ah leh ee Jaantuska sare ee qaaradda ayaa loo yaqaanaa Geeska Afrika.

Geeska Afrika waa fiiqa ku yaala dhanka Bari ee qaaradda kaasoo xadlawadaaga:

- *Badda Cas dhanka Waqooyi Bari*
- *Gacanka Cadmeed iyo Badda Carbeed dhanka Bari*
- *Badweynta Hindiya dhanka Koonfur Bari*
- *Suudaan dhanka Waqooyi iyo waliba dhanka Galbeed*
- *Kiinya dhanka Koonfurta*

## Waddamada Geeska Afrika

Jabuuti, Eritariya, Itoobiya iyo Soomaaliya ayaa ah wadamada Geeska Afrika. Hadii aynu is barbadhigno wadamadan, Itoobiya ayaa doorka ugu muhiimsan ka

ciyaarta, taasoo ay ugu wacantahay baaxada tirada dadka, halka ay dhacdo iyo xadka ay La wadaagto dhamaan wadamada Geeska Afrika.

***Jabuuti:*** waa wadanka ugu yar Geeska Afrika. Magaala madax deeduna waa Jabuuti. Jabuuti waa wadanka ugu tirada dadka yar wadamada Geeska Afrika waxay leedahay dakad taas oo Itoobiya ay wax ka soo dajisato kana dhoofiso wax soo saarkeeda.

***Ertariya:*** waa wadanka ugu dambeeyey ee madax banaani qaata Geeska Afrika waxayna heleen dawladnimadooda 1993dii. Bedka dhulkeeduna waa 118,000 $km^2$ caasimadeeduna waa Casmara.

***Itoobiya:*** waa wadan aanan waligii la gumaysanin, waana wadanka koobaad ee ugu wayn Geeska Afrika, dadkeeduna uu yahay in kabadan 74 milyan. Magaala madaxdeeduna waa Addis Ababa taas oo waliba xarun u ah Afrika. Itoobiya waxay xuduud la leedahay Jabuuti, Eratariya, Kiinya, soomaaliya iyo suudaan. Itoobiya intii ka dambaysay 1993 ma lahayn marin badeed. Marka maadama ayna Itoobiya laheyn marin badeed waxay isticmaashaa qaar ka mid ah dakadaha dawladaha dariska ah. Hada waxay badanaa isticmaashaa dakada Jabuuti.

***Soomaaliya:*** waxay xornimada qadatay 1960kii. Magaala madaxdeeduna waa Muqdisho. Tan iyo 1991dii Soomaaliya wadan nabad ah ma aha, oo waxaa ka jira colaado sokeeye oo ba'an. Soomaaliya waxay ka mid tahay wadamada xeebta leh ee Geeska Afrika; waxayna xad la leedahay Badweynta Hindiya iyo Badda Cas.

**Tusaha 1.1: wadamada Geeska Afrika iyo caasimadahooda 2005**

| Tiro | Waddamada | Tirida dadka (milyan) | Caasimadaha | Bedka dhulka ($km^2$) |
|---|---|---|---|---|
| 1 | Jabuuti | 0.8 | Jabuuti | 23,200 |
| 2 | Eritariya | 4.5 | Casmara | 118000 |
| 3 | Itoobiya | 74.4 | Adis-Ababa | 1,104,300 |
| 4 | Soomaaliya | 10 | Muqdisho | 637,661 |

Sida Jabuuti iyo Eratariya ayey Soomaaliyana leedahay marin biyood (Badweynta Hindiya iyo Badda Cas) ay si toos ah ugu tiirsantahay.

Wadamada Geeska Afrika waxay mudo dheer ahaayeen meel soojiidata quwadaha shisheeyaha ah. Waxaana sababay barta ay dhacdo oo ah wadada ugu gaaban ee u dhaxaysa Yurub iyo Bariga Fog. Furitaankii Kanaalka Suways ee sannadkii 1869 kii wuxuu sii siyaadiyey muhiimada Geeska Afrika




Marinka Kanaalka suways:

- Marin-biyood la siman heerka bada oo dad-samee ah kuna yaala Masar
- Waxaa la dhisay Bishii Abriil 1859
- Wuxuu isticmaalkiisu bilowday 1869
- Wuxuu sahlay in biyaha dushooda la maro (socdo) iskuna xidho Yurub iyo Aasiya

**Jaantuska 1.3: Kanaalka Suways**

Geeska Afrika wuxuu caan ku yahay khilaafaadka aan dhamaanin ee dhanka xuduudaha iyo isku dhaca qowmiyadaha iyo diimaha. Waxaan tusaale u soo qaadan karnaa muranka dhanka xuduudaha ee ka dhaxeeya Itoobiya iyo Ertariya, isku dhaca Jabuuti iyo Ertariya iyo dagaalka sokeeye ee dalka Soomaaliya. Waxaa intaa u dheer masiibooyin dabiici ah oo ku soo noqnoqda sababana dhimasho dad iyo duunyaba leh. Waxaa saameeya suunka saaxil. Eratariya oo ah waddan ka mid ah wadamada Geeska Afrika ayuu waliba aad u saameeyaa suunkan.



Waddamada la isku yidhaahdo saaxil:

- Waxa ay dhereran yihiin 3862 km laga bilaabo Badwaynta Atlaantiga oo dhinaca galbeed ah ilaa Badda Cas oo dhinaca Bari ah.
- Ballaciisuna wuxuu gaadhaa ilaa iyo 1000 km.
- Bedkii suna wuxuu yahay 3,053,200 $km^2$.
- Waa fogaanta go'an ee u dhaxaysa laga bilaabo Badwaynta Atlaantiga ilaa Badda Cas ee Afrika

**Jaantuska 1.4: Khariirada dalalka la isku yidhaahdo saaxil**

## Fiiro gaar ah

- *Geeska Afrika wuxuu ka kooban yahay 4 waddan: Itoobiya, Eretreeya, Jabuuti iyo Soomaaliya*
- *Geeska Afrika wuxuu leeyahay ahmiyad balaadhan oo ay ugu wacan tahay halka uu dhaco (ku yaalo).*
- *Furitaankii Kanaalkii Suweys ee 1869 waxay sii kordhisay ahmiyada Geeska Afrika.*

# 1.2 TAARIIKHDA DADKA IYO DAGAANKA ITOOBIYA IYO GEESKA AFRIKA

***Marka uu dhamaado cashirkan kadib, ardaydu waxay a woodi doonaan in ay:***

- U soocnaato Itoobiya in ay tahay bilowga banii aadamka.
- Aqoonsadaan goobaha arkiyoolajiga Itoobiya iyo geeska Afrika.
- Xafidaan xaqiiqooyinkii arkiyoolojikaalka ee horay loo daahfurey.
- U habeeyaan xaqiiqooyinkaa si habaysan oo isku xidhan
- Sharxaan sida iyo goorta ay diinta Masiixiga iyo Islaamku soo galeen Itoobiya iyo Geeska Afrika.
- Ogaadaan Itoobiya in ay tahay wadan diimo kala duwan Leh
- A qoonsadaan jiritaanka isu dulqaadashada dhanka diimaha.
- Garwaaqsadaan jiritaanka dawladihii horee Itoobiya iyo Geeska Afrika.
- Sharxaan in Itoobiya ay ahaan jirtay dawlad xoog badan.
- Sare u qaadaan garaadkooda ku aadan wadaniyadooda.

***Abuuritaankii hore ee banii'aadamka:*** Aragtiyo iyo goobaha arkiyoolojiga ee Itoobiya, Kiinya iyo Tansaaniya.

***Waligaa ma maqashay Luusi (Lucy), Salaam (Selam) iyo Ardi (Ardi)?***

Waa xaqiiqooyin arkiyooloji oo lagu daah furay Itoobiya, taasoo cadaynaysa Itoobiya in ay tahay halka uu abuuritaanka banii'aadamka uu ka bilowday.


Waxaa jira laba aragti oo aasaasi ah dhanka abuuritaankii hore ee banii'aadamka. Waxayna kala yihiin

- *Aragtida Abuurista Alle*
- *Aragtida Saynis yahanada.*

***Aragtida Abuurista Alle:*** Aragtida hore, waxay aaminsantahay in dadka (aadamaha) uu illaahay abuuray. Diintu waxay qabtaa in banii'aadamka Illaahay abuuray, oo uu ugu hor abuuray Aadan iyo Xaawo, oo aynu dhamaanteen xaqiiqiyan ka soo jeedno.

***Aragtida Saynis yahanadu:*** Dhanka kale, Aragtida sayniska waxay qabtaa in bani'aadamku uu si tartiib-tartiib ah u abuurmay, oo uu ka bilaabmay noole ilma aragtay ah kaasoo noqday noole hal unugle ah oo qaarkood si fudud isku bedeleen kaluun. Markaa ka dib yimid dhulka, oo intuu sii kobcay noqday daanyeero (apes); Kuwaas oo ugu dambayntii isku badalay qof bani'aadan ah oo kaamil ah (dhamays tiran).

Aragtidani waxay ogolaanaysaa inuu aadmigu yahay natiijo ka dhalatay isbedel marxaladeedyo sitartiib tartiib ah u soo maray nidaam, kaasoo uu ugu dambayntii homo habilis horumaray isku bedelay Aadmiga casriga ah.




Daraasadihii taariikhdii hore, arkiyoolojistayahanadu waxay daneynayeen in ay ogaadaan hooyga asalka u ah banii'aadamka ee ay ka soo jeedaan. Arintaasi waxay keentay helitaanka xaqiiqooyin fara badan oo dhanka arkiyoolojiga ah. Tan iyo badhtamihii qarnigii 20[aad] waxaa la daah furay xaqiiqooyin dhanka arkiyoolojiga ah, kuwaas oo cadeynaya abuurka aadamuhu in uu ka bilaabmay Geeska Afrika, gaar ahaan Itoobiya.

## Fiiro gaar ah

- *Geeska Afrika gaar ahaan Itoobiya ayaa waxaa loo aqoonsanyahay in ay tahay halka aadamaha asalka u ah*
- *Taana waxaa xaqiijiyey daahfuritaanada arkiyoolojiyadeed ee kala duwan.*

- *Dhamaatkii 1950yadii Hoomo Habilis ayaa la daah furay oo lagu daah furay goobta la yidhaahdo Oldufaay Gorji (olduvai Gorge) ee Tansania iyo Kiinya.*
- *1970yadii Hoomoo-iraktas (Homo Eractus)(Aadmi talaabsanaya) oo laga helay dooxada webiga omo malka kunure, konso Gardule.*
- *1981(1973 T.I) Awstralo-biktas Afaranses (Austrolo-picthes) " Dhinqinesh" oolaga helay gobolka canfarta.*
- *Bishii sabteembar 2006, Awstralo-bitkas Raamidas (Austrolo-pithecus Ramidus) "Selam" ayaa laga helay Itoobiya.*
- *Kowdii octoobar 2009, Ardi ayaa sidoo kale laga helay Itoobiya.*




Jaantuska 1.5: Qaar kamid ah goobaha Aataarta ee Itoobiya




Luusi (Lucy):

- *Amxaari ahaan waxaa lagu magacaabaa "Dhinqinishi"*
- *Waxaa laga helay goobta la yiraahdo Hadar, Canfarta 24tii Noofembar 1974kii*
- *Waxay noolayd 3.2 milyan oo sanno ka hor.*
- *Waxaana daah furay Johaanson iyo kooxdiisa la socotay.*



Salaam:

- *Waxaa daah furay Dr. Sara Sinaay Alemsegid*
- *Waxayna ahayd gabadh yar oo saddex (3) sano jir ah, noolaydana 3.3 milyan oo sano ka hor*
- *Waxay noolayd 3.3 milyan oo sano ka hor.*
- *Waxay ahayd gabadh yar oo saddex sanno jir ah.*



Ardi:

- *Amxaari ahaan waxaa lagu magacaabaa "Ardi" waa soo gaabinta Ardibiteekas raamid.*
- *Waxay noolayd 4.4 milyan oo sanno ka hor.*
- *Waa qalfoofka ugu da'da weyn ee aadamaha.*
- *Waxaana Nofembar 5teedii 1994tii daah furay yohaanis xayla silaase.*

## 1.2.1 Luuqadaha Lagaga Hadlo Itoobiya iyo Geeska Afrika

Waxaa Itoobiya lagaga hadlaa luuqado aad u tira badan. Luuqadaha ugu waa weyn ee laqaga hadlo waxaa ka mid ah afarta bah-luuqadeed ee kala ah.

1. Kushitik
2. Sematik
3. Omotik iyo
4. Naylo-Saxara

## Bah-Wadaag-luuqadeedka iyo Baha luuqadeedka lagaga hadlo Itoobiya

### Bah-wadaagta Afroo-Ayshiyeetiga

**Bahda Kushitiga**

Canfar, Agaw, Alaba, Arbore, Burji, Busa, Darashe, Iroob, Amuuru, Bayso, Kunfal, Gawwada, Gidoole, Gobayse, Hadya, Konso, Oromo, Sidaama, Soomaali, Simay, Biraale, Giraara

**Bahda Semitiga**

Amaxaaro, Argobo, Guraage, Hereri, Tigree, Gi'iis, Say

**Bahda Oomotiga**

Baana, Baasketo, Binjo, Dime, Dise, Gaamo, Gidhijo, Gimira, Gofa, Xamar, Kajama, Karo, Hooso, Sesi, Koonta, Koyra, Kullo, Male, Anfillo, Naaw, Oyda, Shii, Shekajo, Walayta

### Bah-wadaagta Nayloo-saxa araha

**Bahda Jaari-Naylootiga**

Anwaak, Berta, Kunaama, Kiweegu, Mayn, Masengo, Murle, Mursi, Nuweer, Surma, Tirma, Silmaamu, Andillo, Gobato, Kiwaama, Obuuwo, Shaabo, Gaamo koonfurtamaaw

**Bahda Koomaan**

Gumus, Kooma, Laanga, Keere, Seese, Say, Keere waqooyigamaaw, Anfillo koonfurta maaw



## Hawl-galka 1.1

1 Waxaad xog ama macluumaad dheeraad ah ka soo aruurisaa xubnaha dawladda ee qaabilsan waaxda dalxiiska goobaha arkiyoolojiga ee kajira Itoobiya.

2 Gooba gali hadhaayadan (qolfoofyadan) arkiyoolajiyeed (B, T, J, X) ee soo socda midka sida saxda ah ee ay u kala da'da weyn yihiin u kala hor qoran yihiin?

| | | | |
|---|---|---|---|
| B | ARDI | SALAAM | LUUSI |
| T | LUUSI | SELAAM | ARDI |
| J | SELAAM | LUUSI | ARDI |
| X | LUUSI | ARDI | SELAAM |

## 1.2.2 Dagaamada Itoobiya iyo Geeska Afrika


Qaab dagaanka dadka Geeska Afrika ayaa wuxuu yahay mid kala duwan oo aan si iskumid ah loogu baahsanayn (firidhsanay). Guud ahaan, deegaamada Geeska Afrika ee ku yaala dhulka jooga sare leh ayay dadka iyo dagaamadu ku badan yihiin marka loo eego deegamada ku yaala dhulka jooga hoose leh ee Geeska Afrika. Waxaa baahsanaanta dadka iyo dagaanka saameya xaalada juquraafiyeed iyo mida taariikheed ee uu deegaan leeyahay. Waxaa taariikh ahaan Itoobiya horay uga soo jiray dhaq dhaqaaqyo iyo fiditaano ay dadkeedu sameyn jireen. Waxaana arimahaas sababi jiray xaalado dabiici iyo dad sameeba leh. Xaaladaha dabiiciga ah ee dhaq dhaqaaqyadii iyo fiditaanadii dadkii hore ee Itoobiya sababi jiray waxaa ka mid ahaa abaaraha iyo gaajada (cuno la'aanta). Xaaladaha aan dabiiciga ahayn ee dad sameega ah ee iyana sababi jiray in ay dadku deegaan ama meel ka guuraan oo ay deegaan kale u guuraan waxaa ka mid ahaa dhul-balaadhsigii xilliyadii kala duwanaa ay boqoradii Itoobiya sameyn jireen.

Inkastoy dadka Itoobiya yihiin kuwo leh diimo iyo jinsiyado kala duwan, hadana waxaa ka jiray is dhexgal dhanka guurka iyo dhaqankaba ah. Waxaa kale oo ay dadka Itoobiya ku midoobi jireen iska caabinta cadawga shisheeye. Hadaba waxaa halkaas inooga cad in ay dadku midoobi karaan iyagoo leh luuqado, jinsiyado iyo diimo kala duwan.

## 1.2.3 Soo gaadhiddii diinta Kiristaanka iyo Islaamka Itoobiya

Waxaa dhici karta in ay fasalka wada dhigtaan arday Muslimiin ah iyo kuwo Kiristaan ah. Maxay yihiin wax yaabaha aad wadaagtaan (aad ka midaysantihiin)? Fadlan islafalanqeeya oo wadaaga afkaartiina.

Diinta Islaamka iyo Masiixiga (Kiristaanka) waa Labada diimood ee ugu weyn Itoobiya. Dadka haysta diinta Kiristaanka waxaa Lagu magacaabaa Masiixiyiin, kitaabkooduna waa Baybalka. Dadka haysta diinta Islaamka waxaa lagu magacaabaa Muslimiin, kitaabkooduna waa Qur'aanka. Labada diimood waxay ka soo galeen Itoobiya xagga Bariga dhow.




**Jaantuska 1.6: Baahsanida diinta Islaamka ee Afrika wakhti xaadirkan**

| Kiristaanka (masiixiyada) | Islaamka |
|---|---|
| ◊ Waa diin ku dhisan mabaadiida Ciise-masiixi.<br>◊ Waxay aaminsanyihiin in Ciise uu yahay inankii Illahay, loona soo diray inuu dadka badbaadiyo<br>◊ Kiniisadda Ortoodhokiska ayaa waxay ku andacootaa (sheegataa) in diinta kiristanka ay soo gashey Itoobiya qarnigii koobaad ciise dabadii (C.D), balse taariikh yahanadu waxay sheegaan in ay soo gashay qarnigii Afraad ciise dabadii (C.D).<br>◊ Itoobiya waxaa soo galiyey Masiixiyadda nin La oran jiray Deramaantas kaasoo Loo yaqaano Abaa Salaama.<br>◊ Dadka ugu hor qaatay diintan waxay a haayeen boqorada iyo saraakiishooda. Kadib, dhulbalaadhsiyadii boqoradii hore ee Itoobiya aya wada gaadhsiiyey dhamaan dhulka Itoobia.<br>◊ Barashada diinta Kiristaanku waxay ku faaftay qaybo badan oo ka mid ah Itoobiya waxaana gaadh siiyey wadaado fidinayay diinta masiixiga iyo dhul balaadhsigii boqoradii hore ee Itoobiya. | ◊ Diinta Islaamku waa diin uu Eebe u doortay Nabi Muxamad (S.C.W) in uu gaadhsiiyo adoomihiisa.<br>◊ Erayga Islaam waa eray carabi ah oo uu macnihiisu yahay u hogaansan Eebe.<br>◊ Dadka haysta diinta Islaamka waxaa la yidhaahdaa Muslimiin. Waxayna aaminsan yihiin in uu jiro hal Illaah oo kaliya, Muxamadna (S.C.W) uu yahay fariin qaade (rasuul) uu Eebe u soo diray adoomihiisa.<br>◊ Waxay diinta Islaamku soo gaadhay Itoobiya qarnigii 7aad C.D.<br>◊ Waxaa xilligii boqortooyadii Aksuum soo galay Itoobiya Muslimiin magangalyo doon ah oo asxaabtii Nabi Muxamad (S.C.W) ahayd, kuwaas oo ka soo haajiray Maka. Waxay asxaabtaas soo dhaweyn wacan iyo magangalyaba ka heleen boqortooyadii Aksuum ee uu madaxda ka ahaa boqor Axmad Najaash. Waxayna arintan dhalisay in uu xidhiidh wanaagsan dhexmaro boqortooyada Itoobiya iyo Muuslimiinta.<br>◊ Xidhiidhkan wanaagsan ee Muslimiinta iyo Itoobiya dhexdooda ka dhashay ayaa sababay in ay diinta Islaamku si tartiib tartiib ah ugu fiddo iyo inay Itoobiya ka dhismaan Saldanado Islaami ah. |




*Masjidka Najaash (Tigraay)*



*Kaniisada Aksuum Siyon*



*Kiniisada Katoliga (Addis Ababa)*



*Masjidka Anwar (Addis Ababa)*

## Hawl-galka 1.2



1. Isku soo ururi sawirada kala duwan ee shucuubta quruumaha iyo qoomiyadaha kala duwan ee dalkeenan Itoobiya iyo Geeska Afrikaba.
2. Isla falanqeeya faaiidada (Waxtarka) kala duwanaanshaha.
3. Hoosta ka xariiq waxtarka ugu muhiimsan ama ugu weyn ee ay midnimadu leedahay.
4. Waxaad soo guurisaa khariirada Itoobiya, kadibna tilmaam sida ay ugu kala baahsanyihiin luuqadaha kala duwan.
5. Ka dooda labada aragtiyood ee asalka aadamaha ee kala ah aragtida sayniska iyo mida abuuridda Alle.

# 1.3 QARAMADII UGU HOREEYEY EE ITOOBIYA IYO GEESKA AFRIKA

***Marka uu dhamaado cashirkan kadib, ardaydu waxay a woodi doonaan in ay:***

- Garwaaqsadaan jiritaanka dawladihii hore ee Itoobiya iyo Geeska Afrika.
- Aqoonsadaan Itoobiya in ay ahaan jirtay dawlad xoog badan.
- Sara uqaadaan garaadkooda ku aadan wadaniyadooda.

***Maxaad ka garanaysaa taariikhdii hore ee Itoobiya? Wax ma ka sheegi kartaa? Mataqaanaa qaramadii kala duwanaa ee Itoobiya iyo Geeska Afrika?***


Hadii aynu dib ugu laabano taariikhda Itoobiya oo ahayd mid soo Jireen ah ilaa iyo Miliiniyamkii Saddexaad Ciise Hortii (2800 C.H). Badmareeno Faraacidii Masaarida ah oo maraysay badda cas ayaa ugu yeedhay (ubixiyay) deegaanka Geeska Afrika dhulkii uduga, sida ku xusan diiwaanka qoraalkooda heerogiraafiga. Boqoradii Masaarida ee la odhan jiray Hatshebsat (1504 - 1428 C.H) ayaa Socdaalo ganacsiya oo marayay badda iyo bariiga u dirtay dhulkii uduga. Waxaa booqosho ku tagay dhulka uduga nin la odhan jiray Nehaashi oo ahaa kabtan markab oo u dhashay dalka Masar, kaasoo dhulka uduga ka soo qoray qoraalo diiwaan gashan. Waxaana qoraaladan lagu tilmaamaa in ay yihiin kuwii ugu horeeyay ee diiwaanka taariikhda Itoobiya inta la ogsoon yahay.

## B *Dhulkii Uduga iyo Boqortooyadii Dhaamoot*

Dhulkan uduga wuxuu jiray muddo ku dhow miliiniyamkii 3aad ee C.H; dadka ku noolaana waxaa la odhanjiray “Xabashaa”. Waxaana taariikh ahaan la aaminsanyahay in asalka magaca Xabashaa marka la tixraaco Aksuumtii hore iyo Itoobiyada maanta in ay qeyb ka mid ah dhulkii uduga ahaayeen. Waxayna deegaan ahaan ku dhararnayd Badda Cas iyo Marinka Baabal mandab ee kuyaala xeebta Soomaaliya. Dhulkan uduga wuxuu muhiim ku ahaa ganacsiga xawaashka, hargaha iwm. Dhamaan waxyaabahan ayaa ahaa kuwo laga helo Itoobiya, Sidaa daraadeed Itoobiya waxay ka mid ahayd dhulkii uduga.

Dhulkii uduga iyo dadkii ku noolaa ee “xabasha” kadib, taariikhda ugu horaysay ee la ogyahay ee dhulka iyo dadka waqooyiga - Bari ee Afrika waxay ahayd taariikhdii dadkii iyo dawladii (qarankii) Dhaamoot ee mudaddii shanta qarni ee ugu dambaysay ciise kahor. Dawladdani waxay ku taalay koonfurta Ertariya iyo Waqooyiga Tigraay. Taariikh yahanadu waxay sheegaan in dhalashadii dawlada

Dhaamoot ay sababtay imaanshihii qabiilada koonfurta carbeed ee kasoo gudbayey marinka Bab-el-mendah Dakada ugu muhimka ah ee Dhaamoot waxay ahayd Adulis. Dadka dawladii Dhaamoot waxay caabudi jireen asnaamta laga caabudo Koonfurta Carbeed. Daamat waxay lahaayeen qoraal iyo luuqad u gaar ah.




Jaantuska 1.7: Boqortooyadii uduga (punt) iyo Dhaamoot

## T Boqortooyadii Aksuum


Quwada boqortooyadii Aksuum waxay ka soo ifbaxday agagaarka badda cas, kadib markuu hoos u dhacu ku yimd boqortooyadii Dhaamoot qarnigii labaad ciise Hortii (C.H). Boqortooyada Aksuum waxay ahayd dawlad awood badan oo ka jirtay gobalka Geeska Afrika ilaa iyo qarnigii $9^{aad}$ ee Ciise dabadii. Waxay lahayd afar dakadood oo saldhig u ahaa baayac mushtarkeeda caalamiga ah. Waxay dakadahaas kala ahaa yeen Adulis Deyre (Raas Siyuum), Afaalit (saylac) iyo Barbara.

***Bedkii dhulka Boqortooyadii Aksum:*** Bilowgii hore wuxuu dhulka boqortooyada Aksum ku ekaa buuraleyda Waqooyiga Itoobiya. Kadibna waxay Samaysay dhulbalaadhsi baaxad balaadhan oo ay ugu siifidday ilaa iyo:

- *Waqooyiga Shawa oo ka xigtay dhanka Koonfurta*
- *Xeebta Badda Cas oo ka xigtay dhanka Bari*
- *Eratariya oo ka xigtay dhanka Waqooyi*
- *Wabiga Niil oo ka xigay dhanka Galbeed*

***Hoos U Dhicii Aksum:*** Hoos u dhaca awooda Aksum waxay bilaabatay qarnigii 7aad C.D. Waxayna dhamaatay dawladnimadeedu qarnigii 9aad CD. Arimaha ugu muhiimsan ee sababey dhicitaankii boqortooyadii Aksum waxay ahaayeen

- *Is badalkii ku yimid awoodii maamulka baayac mushatar ka Badda Cas ee gacanta u galay Carabta.*
- *Weerarkii dadka Beeja ee kaga yimid Waqooyiga*
- *Gadoodkii ama kacdoonkii dadka (Beesha) Aggaw ee dhinaca koonfurta.*




**Jaantuska 1.8: Dhulkii Boqortooyadii Aksuum**

***Guulihiiay gaadheen:*** Boqortooyadii Aksum waxay si aad ah ugu horumareen xirfadaha samaynta nashqadaha iyo dhismaha oo ay ku muujinayeen taalooyinka dhaadheer, tumidda iyo daabacaada lacagaha qadaadiicda ah oo ay kuna sawiri jireen boqorada sida Esaana (Ezana) oo kale. Wax badan lagama garanayo ujeeddooyinkii ay ka lahaayeen taalooyinka. Qaar ka mid ah aqoonyahanada waxay soo jeediyeen inay u adeegsan jireen meelaha lagu aaso (xabaalo) boqorada.

| | | | | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| ፩ | ፪ | ፫ | ፬ | ፭ | ፮ | ፯ | ፰ | ፱ | ፲ |
| 1 | 2 | 3 | 4 | 5 | 6 | 7 | 8 | 9 | 10 |
| ፲ | ፳ | ፴ | ፵ | ፶ | ፷ | ፸ | ፹ | ፺ | ፻ |
| 10 | 20 | 30 | 40 | 50 | 60 | 70 | 80 | 90 | 100 |

**Jaantuska 1.9: Tirada u gaarka ah ee ay xilliyadii hore samays atay Itoobiya**

***Diin:*** Nin u dhashay dalka Suuriya oo la odhan jiray Firimantoos ama Abuna salaama ayaa Kiristaamiyay Boqor Esaana qarnigii 4aad C.D, barayna Kiristaannimada waxaana la socday sagaalkii wadaad ee sida balaadhan u faafiyay Kiristaanka

## J *Boqortooyadii Saagwe (1150 – 1270)*

Waxay soo if baxday qarnigii 10aad markii uu Takla Haymanood qabsadey awoodii siyaasada ee Gobalka Laastaa. Yimrahaana Kiristoos iyo Harbe ayaa ka mid ahaa dhawrka boqor ee caan ka ahaa boqortooyadii Saagwe. Xiligii Boqortooyada Saagwe wuxuu ahaa wakhtiga ugu nabadgalyada badnaa marka Labarbar dhigo boqortooyinkii kale.

***Dhicitaankii boqortooyadii Saagwe:*** Arimihii sababay dhicidii boqortooyadii Saagwe waxay ahaayeen dagaaladii dhexmaray dadkii baddeli lahaa boqorka Laalibeela, ee u baratamayey xukunka iyo hogaamiya yaasha oo ahmiyadda ugu weyn siiyey arimaha diinta, intay dhisan lahaayeen quwad milatari oo xoog leh. Arrimahaa iyo kuwo kale awgood ayaa waxaa baddaley Boqortooyadii Saagwe, boqortooyadii Salamooniyiinta.

## X *Saldanadihii Islaamka*

***Fadlan inta aadan guda galin barashada cashirkan soo aruuri xog ama macluumaad.***

Soo gaadhidii islaamka Geeska Afrika, waxaa ku xigay dhisidii dowladdo dhawr ah oo Islaami ah laga bilaabo qarnigii 9aad CD. Dowladahaa islaamiga ahaa ama Saldanadahan waxaa kamid ahaa Shawa, Ifaat, Adhaal, Fataagaar, Daawaro,

Baali, Hadiya iwm. Saldanadahaas waxaa la dhisay xiliyo kala duwan. Dakadda Seylac waxay aheyd marinka ugu muhiimsan dhanka faafinta diinta Islaamka ee Geeska Afrika. Dhaqaalahoodu wuxuu ku tiirsanaa beeraha iyo faa'iidooyin kii laga helayey baayac mushtarka. Saldanadii Ifaat ayaa ahayd mida ugu waynayd Saldanadihii Islaamka.

Laga soo bilaabo xilligii boqor Amdhe Siyoon (1314 – 1344), waxay boqortooyadii Kiristaanka aheyd ee Waqooyiga daciifinaysay saldanadihii Islaamiga ahaa intoodii badnayd, laakiin intii ka dambaysay soo ifbixii saldanadii Adhaal ee Harar ayay mar labaad Saldanadihii Islaamku awoodaystten.

Boqortooyadii waleytaa, Dhaamoot, Inarya, iyo Kafaa ma ayna aheyn kuwo Islaami ah, waxayna haysteen diima kale, balse markii dambe waxay qaateen diinta Kiristanka.

## Saldanadii Shawa

- *Sida diiwaanka taariikhda ku xusan, dawlada shawa ayaa aheyd mida ugu horeysay ee Islaami ah waxaana la aas aasay sanaddii 896C.D.*
- *Waxay ahayd dawladda islaamiga ah ee ugu da'da weyn*
- *Boqortooyada xukunka haysay ee saldanada Shawa waxaa la oran jiray makhsuumayt.*
- *Saldanadii Shawa xidhiidh fiican Lama ayna Lahayn dariska.*

## Saldanadii Adaal

- *Waxay aheyd saldanad xoog badan oo dhisantay 1420 ilaa 1560.*
- *Waxay ka bilaabatay agagaarka Harar waxayna gaadhsiisanayd ilaa iyo Waqooyiga Galbeed ee Soomaaliyaa, Koonfurta Jabuuti, iyo dhulka Soomaalida, Oromada iyo Canfarta Itoobiya.*
- *Waxaana aasaaskii dhisida saldanada Adaal ka dambeeyey tafiirtii Walaasma oo ahaa qoyskii xukumayey ifaat.*
- *Waxay aheyd Adaal saldanadii ugu xooga badneyd qarniqii Lix iyo tobnaad.*

## Saldanadii Fataagar


- *Waxay ka jirtay halka wakhti xaadirkan ah Bulga agagaarke shenkoraa.*
- *Waxay soo if baxday bartamihii qarnigii saddex iyo tobnaad.*
- *Waxay abaalgud ka heleen Boqortooyadii kiristaanka*

## Saldanadii Baali

- *Waxay ahayd saldanad islaami ah oo ka jirtay dalka Itoobiya*
- *Waxay ka jirtay Koonfurta Itoobiya (halka uu ka soo bilowdo wabiga shabeele).*
- *Waxaa Ku hareeraysnaa saldanado kale oo Islaami ah.*
- *Waxay ku taalay dhulka buuralayda ah ee uu ka soo kaco webiga shabeele, halkaas oo ahayd meel carro-san ah.*

## Saldanadii Ifaat

- *Waxay soo if baxday badhtamihii qarnigii saddex iyo tobnaad, waxaana aasaasay Cumar Wallaasma.*
- *Saldanadii Ifaat waxay xukuntay dhul aad u balaadhan iyo waliba ganacsigii wadada dheer ee saylac.*
- *Waxay aheyd mida oogu xooga badan dhanka iska caabiga boqortooyada kiris tanka ah ee Waqooyiga, balse markii dambe waxaa jabiyey Amdhasiyon sanadii 1332.*
- *Ifaat waxaa soo xukumayay qoys laan dheere Muslim ah oo la odhan jiray Dhaxaltooyadii (B/tooyadii) Walaasma.*




**Jaantuska 1.10: Saldanadihii Islaamke ee qarniyadii dhexe**

## Wolayta

- *Waxaa dhisay boqor Motalaami*
- *Qarnigii saddex iyo tobnaad ayuu qaatay diinta Kiristanka.*
- *Hogaamiyayaasha (boqorada) Wolayta waxay cinwaanka ama horgalaha "KAAWO"*
- *Beeraha ayaa ahaa rukumada Dhaqaalahooda.*
- *Wuxuu aasaasay Boqortooyadii ugu horaysay ee Walaytaha ee loo yaqaanay Boqortooyadii Walayta maala*

## Boqortooyadii Dhaamoot

- *Waxay ka jirtay Koonfurta Galbeed ee Itoobia*
- *Waxay ahayd dhulka Koonfurta ka ah wabiga Niil, Galbeedkana ka ah meesha uu wabiga Awaash ka bilowdo, Barigana ka ah wabiga Dhidassa.*
- *Taariikh-yahaanadu waxay soo jeediyeen inay dhici karto inay tahay maamulkii ugu horeeyay ee ku xigay Aksum.*

## Boqortooyadii Enaarya

- *Waxay ka jirtay dhulka Waqooyiga ka ah wabiga Goojab.*
- *Boqortooyadii Inarya waxay dhiseen Kiniisado dhowr ah.*
- *Taariikhdii dambe ee Inaryaa waxay La xidhiidhaa taariikhda Oromada.*
- *Enaarya waxay ahayd isha ugu muhiimsan ee wax yaabaha laga ganacsado ama agaabta ganacsi.*
- *Intii ay socotay Boqortooyadii Enaarya waxaa loo yaqaanay Liimmu-Enaarya Boqortooyadaas oo soo if-baxaday qarnigii 19aad.*

## Boqortooyadii Kaffa

- *Waxaa la aasaasay qarnigii Afar iyo tobnaad, lagana aasaasay Koonfurta Inarya.*
- *Horgalaha magac ee hogaa miyayaa sha (boqorada) kaffa wuxuu ahaa Taato.*
- *Dhaqaalahoodu wuxuu ku salaysnaa ganacsiga (baayac mushtarka) iyo beeraha.*
- *Dawladnimadii Kaffa waxay dhamaatay 1897dii markuu Minilik ka guulaystay boqorkii ugu dambeeyey Kaffa ee Taato Gaaki Serekho.*
- *Waxaa caawin jiray Gole latalineed oo loo yaqaanay Mekercho*





**Jaantuska 1.11: dawladihii aan Islaamiga ahayn ee Itoobiya ee qarniyadii**

## 1.3.1 Guulahii Taariikheed iyo Kuwa Siyaasadeed ee Lagaadhay

Dalka Itoobiya wuxuu leeyahay guulo taariikh ahaaneed oo soo jiita dal xiisayaasha. Guulahan taariikheed waxay ahaayeen kuwo ay sameeyeen maamuladii ama Boqortooyooyinkii kala duwanaa ee jiray wakhtiyadii hore iyo wakhtiyadii dhexe. Weligaa ma maqashay wax ku saabsan: Taalooyinkii Aksum, Laalibeela iyo Gidaarka Juggol ee Harar? Fadlan kawada hadla ka hor inta aydaan bilaabin casharkiina.

## 1 *Boqortooyadii Aksum*

- *Waxay lahaayeen dawlad dhexe oo xoog badan taas oo horumarisay magalo qaramooyinkeedii.*
- *Waxay sameeyeen ganacsi xoog leh oo xidhiidh la lahaa waddamada dibada.*
- *Waxay horumariyeen qoraal ka luuqada iyaga oo u adeegsan jiray Saabiyaanka, Giriiga iyo Gi'iiska.*
- *Waxay caan ku ahaayeen taalooyinkoodii birta ka samaysnaa ee arimahooda ganacsi ay u isticmaali jireen.*
- *Waxay qaateen diinta Kiristaanka oo ay waliba faafiyeen qarnigii afraad Ciise Dabadii.*



**Jaantuska 1.12: Taallada Aksum**

## 2 *Saagweyaashii (Zagwes)*

- *Waxay awood badan lahaayeen laga bilaabo 1150 ilaa 1270 C.D.*
- *Waxay adkeeyeen caadooyin dhaqameedkii Aksum sida; Diintii iyo Qoraalkii.*
- *Waxay caan ku ahaayeen dhisidii ay dhiseen kow iyo Toban Kaniisadood ee dhagaxa ka samaysnaa, kuwaas oo loo aqoonsaday mid kamid ah dhaxalka taariikhiga ee dunida iyo kan uu Laallibeela sameeyay oo ah midgoobaha dalxiiska Itoobiya ka mid ah.*



**Jaantuska 1.13: Kaniisada Beete Giyoorgis oo ka mid ahayd kaniisadihii Laalibeela**

## 3 *Gondhariyiintii*

Reer Goondhar waxay ku guulaysteen Inay iska Reebaan dhaxal galka taariikh iyo siyaasadeed ee soo socda:

- *Samaynta (aasaasida) Magaalo madax nidaamsan oo si fiican looga baaraan degay taasoo lahayd dawlad dhexe oo xoog badan.*
- *Dhisitaanka Toban qasri oo ay ugu caansanaayeen: Qasrigii Faasiladaas, Bakaaffa, Mintiwab iyo kuwo kale.*



***Jaantuska 1.14: Qasrigii Faasildaas (Goondhar)***

## 4 Reer Koonso

- *Reer Koonso waxay ku, nool yihiin waqooyiga gobolka Oomo.*
- *Waxay lagu yaqaanay habka naxareenta carrada ee saf-safka u habaysan oo ahayd guusha horumar ee ay ka gaadheen dhanka beeraha.*

### Habka Naxareenta ee Koonso



Habka Naxareenta ee ay reer koonso gaareen

**Koonso:**

◊ *Waa degmo gaar ah oo ka tirsan Dawlada deegaanka shucuubta koonfureed.*

◊ *Habka naxareenta ee Koonso waxay UNESCO ku dartay dhaxal-taariikheedka dunida bishii Sebtembar ee sanodkii 1997kii.*

◊ *Waxay ku caan baxeen naxareynta janjeerka Buuraha.*

## 5 Gidaarka Jeggol

- *Dadka Harar dagani waxay leeyihiin luuqado iyo dhaqamo kala duwan.*
- *Waxay dadka ku nool Harar yihiin kuwo leh Luuqado iyo jinsiyado dhowr ah oo kala duwan.*
- *Hereridu waa dadyawga ku hadla Bahda Sametiga*
- *Waxay ku noolaan jireen gudaha magaalo gidaar ama deyr ku wareegsan yahay (oo loo yaqaanay jegool) kaas oo Afar mitir dhulka ka sareeyay oo leh shan irridood (albaab).*



Albaabka Jeggol (Harar)

**Gidaarka Jeggol:**


◊ *Qalcad laga dhisay magaalada taariikhiga ah ee Harar.*

◊ *Waxay UNESCO u aqoonsatay goobtan dhaxalka taariikhiga ah ee dunida.*

◊ *Waxaa la dhisay intii u dhaxaysay qarniyadii 13aad iyo 16aad.*

## 6 Oromadii iyo Sidaamadii (nidaamkii Gedha)

- *Oromadu waxay kamid yihiin dadyawga ugu qadiimisan ee asalka ah ee itoobiya.*
- *Waxay lahaayeen nidaam siyaasadeed oo loo yaqaanay xeerka ama nidaamka Gadaha kaas oo ahaa mid ay dadwaynaha Oromadu ugu noolaayeen maamul si dumoqraadiyadeed ah.*
- *Nidaamka Gada waa mid u habaysnaa (ku salaysnaa) hanaan doorasho.*
- *Wuxuu sidoo kale xuquuqaha awoodeed mid u sii kala qayb-qaybinayay, kaas oo ah mid ka mid ah xeerarka ka tirsan dimoqraadiyada.*
- *Waxay ahaayeen mid ka mid ah dadkii ku hoos jiray Saladanadii Baali.*
- *Beeraha ayaa ahaa waxa ugu muhiimsan ee ay nolashoodu ku tiirsanayd.*
- *Sida Oromada oo kale ayey Sidaamadu ku dhaqmi jireen nidaam dimoqraadiyadeed oo ay ku maamulaan arimahooda.*



***Sawir kutusaya dhaqankii Gadaha isla markaana lagu xaalayo Arimaha Bulshada***



## Hawl-galka 1.3

1. Ardaydu ha u kala baxdo todoba kooxood oo kala matelaya: Aksum, Saagwe, Goondhar, Koonso iyo Hereri, Oromada iyo Siidaamada.
2. Ha soo aruuriyaan sawirada iyo warbixino ay ku faah faahinayaan guulihii ay gaareen dadyawga aad kala matalayseen, haddii ay suuro gal tahay isticmaala sawirada iyo wax kale oo sharaxayaba.
3. Kooxdii shaqo fiican qabata waxaa la siin doonaa Abaal Marin.

## 1.3.2 Midnimada iyo ilbaxnimada

### Samankii Amiirada (samana masaafint) 1769 – 1855

Sabankii Amiirada (samana masaafinti) wuxuu ahaa xilli taariikheedkii u dhexeeyey 1769 ilaa iyo 1855tii. Waxaa sanadka 1769kii astaanka bilowga xilli taariikheedkan looga dhigay, wuxuu ahaa sanadkii shirqoolka loo maleegay lana dilay boqorkii la odhan jiray Lo'aas, oo ahaa mid ka mid ah boqoradii taagta ama awooda darraa ee Gondar. Waxaana dilay boqorkaas Raas Mikaa'eel Sehuul, oo ahaa maal-qabeen (taajir) awood adag oo milatari leh, kana taliya gobolka tigreega. Wixii xiligaas ka dambeeyey waxay awoodoodii adkaatay hogaamiya gobaleedyada. Sanadkii 1855 wuxuu ahaa Sanadkii ugu dambeeeyey ee uu dhamaaday xilligii ama waayihii amiirada, waxaana astaan looga dhigay sanadkan xilka ama awooda Imbiraadooriyada qabsashadii uu Kaasaa Hayluu qabsaday lana baxay boqor Tedhurooskii 2aad ee Itoobiya.

Sifooyinkii ugu waa weynaa ee intii u dhexaysay 1769 – 1855 waxaa ka mid ahaa:

- *Waxay boqorada Itoobiya ee xukuuma da imbiraadooriyada ka talinayay ahaayeen kuwo aan awood lahayn oo daciif ah.*
- *Awooda dhabta ah waxay gacanta ugu jirtay hogaamiyeyaasha gobalada Tigreega, Shawa, Begamidir, Gojaam iyo Wallo.*
- *Boqortooyadii Warra Sheeh ama Yeeju ayaa ahayd mid door muhiim ah ka ciyaaraysay wakhtigan. Waxay Lahayd boqortoodan Yeeju xubno is isdabajoog ah awooda baqornimo loogu dooran jiray oo isaga dambeeyey. Xaaska boqor Bakaafaa, oo la odhan jiray Etage Mintiwaab waxay Gondar ku martiqaaday oo ay madax ooga dhigtay raas Mikaa'eel Sehuul si uu u ilaaliyo nabadda iyo xasiloonida. Kadibna si tartiib tartiib ah ayuu ugu guulaystay in uu ugu gacan sareeyo.*
- *Waxaa kale oo kiniisada Ortodhokiska Itoobiya dhexdooda ka jirtay kala qaybsanaan dhanka caqiidada ah oo ku saabsanayd asalkii ciise masiixi. Waxayna kiniisadu u kala qaybsantay ama ay u kala baxaysay firqo ay caqiidadooda ku aadan dhalashada ama asalka ciise kala duwanyihiin kuwaas oo ay ka mid yihiin Hulet Lidhat (labada dhalasho ee ciise) iyo Soosti Lidhat (saddexda dhalasho) caqiidada Qibaat ayaa iyana waxay aad ugu badnayd (can ka ahayd) Gojaam. Kala qaybsanaanta caqiidada waxay ahayd mid ku xidhan oo racday kala qaybsanaantii horay u jirtay ee ay Itoobiya gobol gobolka ugu kala qaybsanayd.*

- *Shawa ayaa si tartiib tartiib ah u noqotay mid madax banaan oo leh boqortooyo u gaar ah oo ay ka taliyaan. Waxaana boqortooyadan ka talin jiray hogaamiyayaal qaarkood ka horayey Sahla Silaase iyo kuwo kale oo isaga ka dambeeyay. Waxyaabaha boqortooyadan Shawa ay ka faa'iidaysteen waxaa ka mid ahaa xidhiidhka ay caalamka la lahaayeen, xukuumada boqortooyo ee xasiloon iyo awood la'aanta iyo kala qaybsanaanta Oromada. Xaaladahan aan soo sheegnay ayaa ka mid ahaa arimaha u Suuragaliyay shawa in ay si joogta ah u samayso dhul-balaadhsi baaxad iyo faa'iido dhaqaalaba leh oo ay ugu sii fidayso dhanka Koonfurta, Bariga iyo Galbeedka.*

Iyada oo xaal halkaas uu marayo ayuu Kaasaa Hayluu oo ka soo jeeda Quwaara Sameeyay iskudayo xoog ah oo uu doonayo inuu ku mideeyo Itoobiya. Sannadii 1855tii ayuu Kaasaa Hayluu noqday boqorka boqorada Itoobiya, lana baxay Teedhurooskii 2aad kadib marku ka guulaystay hogaamiya gobolada dagaal ooge yaasha ahaa.

## Iskudayadii Midaynta Xuduudaha iyo Casriyaynta ee Teedhurooskii 2$^{aad}$ iyo Yuhaaniskii 4$^{aad}$

### Soo if bixii iyo awood qabsigii Kaasaa Haylu (Teedhuroos).

Waxaa gobolada qaar ka mid ah haystay dagaal oogayaal ku loolamayay hanashada awooda siyaasadeed ee ugu Saraysa. Raas cali oo haystay Beegamidhir ayaa aasaasay (dhisay) Saldanad la odhan jiray Warra Sheh. Waxayna dadkeedu asal ahaan ka soo jeedeen Oromo Muslimiin ah oo markii dambe la Amxaareeyay. Waxaa Raas Cali Kadib xilka Saldanada hayay dhaxal Sugayaal ka soo jeeda qoyskiisa. Dhaxal sugihii ugu dambeeyay ee qabta xilka saldanada wuxuu ahaa Raas Caligii 2$^{aad}$.



***Kaasa xaylu oo markii dambe noqday boqor Teedroos II***

Dagaal oogayaashii gobalada kale ee awooda buuxda lahaa waxaa ka mid ahaa Hayle Malakood Sahla Sillaase, oo ahaa Minilik aabihi, Taasaw Gobase – gii walqayt, Waqshuum Gobasegii Laasta. Waxaad xasuusnaataan in horgalaha magac ee "Waqshuum" uu yahay darajada ugu heerka saraysa ee gobalka Wallo. Waxaa kale oo dagaal oogayaashii gobalada ee ka soo horjeeday Teedhurooskii

2aad ka mid ah hogaamiyayaashii wallo Sida Amade Bashiir, Maxamad Cali oo markii dambe noqday Nugus (boqor) Miikaa'eel iyo Taadhle Guwaalugii Gojaam oo ahaa dagaal ooga aad u carqaladeeyey ugana soo horjeeday habkii midaynta xuduudaha ee Teedhuroos.

Teedhuroos wuxuu talaabooyin milatari oo dhowr ah ku qaaday qaar ka mid ah dagaal oogayaashii awooda buuxda lahaa ee gobalada. Tusahan soo socda wuxuu ina tusayaa guulihii milatari ee uu Teeduroos uu ka soo hoyiyay weeraradii uu ku qaaday qaar ka mid ah dagaal oogayaashii ka soo horjeeday ee gobalada.

| Tiro | Goobtii uu ka dhacay dagaalku | Sanadka | Hogaamiyadii dagaal ee gobolada | Faallo |
|---|---|---|---|---|
| 1 | Guraamba | 27 Nofeemar, 1852dii | Dhajaasmaaj Goshu Sawdhe-gii Gojaam | Waxay guushan uu kaasaa Hayluu guulaystay meesha ka saartay mid ka mid ah hogaamiyayaashii awooda badnaa ee daacada u ahaa Raas Cali |
| 2 | Gorgora Bijin | 12 Abriil, 1853 | Qawsaaradii u a deegi jiray raas Cali, Birruu Caligaas iyo kuwo kale ayaa laga guulaystay. | Waxaa ku baa ba'day awoodii iyo quwadii Raas Cali |
| 3 | Ayshaal | 29 juun, 1853dii | Wuxuu Kaasaa haylu ka guulaystay Ciidankii Raas Cali, wuxuuna gacanta ku dhigay Birru Gooshu-gii Gojaam | Hogaamiyihii awooda lahaa ee ugu dambeeyay boqortooyadii Yeeju iyo hogaamiyihii xilka uga dambeeyay Gooshu Sawdhe ee ahaa Birru Gooshu ayaa laga guulaystay. |
| 4 | Dharasga | 8 Feb,1855 | Wuxuu ka guulaystay hogaamiyihii awooda lahaa ee ugu dambeeyay ee loolanka dhanka awooda siyaasada kula jiray oo ahaa Raas Wube-gii Sameen | Raas wube wuxuu horay baadari ku caleemasaaray kiniisad uu isaga laf-ahaantiisa dhistay oo la yidhaahdo Dharasge Maariyaam uga Keensaday Alaksaandariya. Ugu dambayntii isla baadarigii ayaa kiniisadii uu dhistay Raas Wube ugu caleema saaray Teedhuroos boqortinimada. |

Wuxuu kaasaa Haylu u doortay magaca boqortoyo ee Teeduroos saadaal jirtay oo ku xusnayd kitaabka fiqra Iyesuus awgeed.

## Dadaaladii Casriyeeneed ee Teedhurooskii 2aad

Teedhuroos wuxuu dhanka casriyeynta xooga ka saaray (aad ugu dadaalay) dhanka milatariga iyo waaxyaha kala duwan ee maamulka. Wuxuu si gaar ah ugu dadaalay siduu u heli lahaa ciidan qaran oo xirfad leh iyo hub casri ah. Si ay arintan ugu suura gasho ayuu Teedhuroos waraaq u qoray boqoradii Ingiriiska ee la odhan jiray Fiktooriya 1862. Teedhuroos waxaa ku daahday jawaabtii uu waraaqdaas ka sugayay, taasoo markii dambe ku kaliftay in uu xidhxidho diin faafiyayaal reer Yurub ah. Arrintan oo ay weheliso kacdoono dalka gudihiisa ah oo lagaga soo horjeedo iyo dagaaladiisii isdaba jooga ahaa ee uu dhiiga badan ku daadanayay ayaa sabab u ahaa hoos u dhicii iyo dhicitaankiisii.


## Hoose u dhicii iyo dhicitaankii Teedhuroos

Waxaa jiray labo sababood oo waa weyn oo keenay hoos u dhicii iyo dhicitaankii Teedhuroos. Waxayna kala ahaayeen:


1. ***Dalka gudihiisa:*** Waxaa awooda ciidankisa aad wax ugu dhimay dagaaladii ciidan ee aan kala go'a lahayn ee uu qaadi jiray waxaa kale oo ka jiray waddanka gudihiisa kacdoono is dabajoog ah oo taliskiisa lagaga soo horjeedo.
2. ***Dalka dibadiisa:*** Janaraal Roobert Naabiir oo ahaa Biritish ayaa maqdhala kaga guulaystay ciidankii Teedhuroos sanadii 1868dii bishii Abriil, Teedhuroosna isaga ayaa gacantiisa isku dilay.

## Dhaxalkiisii

Inkastuuna Teedhiroos ku guulaysanin midaynta Itoobiya, hadana wuxuu ka tagay aragtidii midnimada Itoobiya. Waxaana aragtidan sii waday oo ka dhaxlay hogaamiyayaashii ka dambeeyay.



Sawirka Qalcaddii Maqdhala iyo Teedhroos oo u weheliyo Sebastabol, ee qorigii waynaa ee uu ku soo saartay farsamadiisa.



## Hababkii Midnimada qaran iyo Iska-caabinta cadawga shisheeye ee Yuhaaniskii 4aad (1872 - 1889)

Yuhaanis Muusan aaminsanayn in midnimada Itoobiya lagu hanan karo dagaal iyo awood milatari sida uu boqor Teedhurooskii 2aad ee isaga ka horeeyay aaminsanaa. Yuhaanis wuxuu adeeg saday habab iyo xeelado midaas ka duwan kana balaadhan si uu u helo midnimada qaran. Waxaa kale oo uu yuhaanis isku dayay in uu mideeyo diimaha si uu ugu gulay sto ama ay ugu sahlanaato midnimada qaran. Waxaa caddayn cadd u ah habkiisan (nidaamkiisan) isticmaalkiisii habka federaaliga ah.

Waxaa habkiisii federaaliga ahaa tusaale ugu soo qaadan karnaa awoodii uu siiyay Adhaal Tasamaagii Gojaam. Kadib markii uu Yuhaanis goobta layidhaahdo Ambaajaara kaga guulaystay Adhaal Tasamaa oo ahaa hogaamiya dagaal oo ka talinayay Gojaam, ay uu siiyay darajada Nugusnimo kana badalay magaciisii hore ee ahaa Adhaal Tasamaa oo uu ku caleemasaaray magaca Takla Haymaanoot 1881gii.

Hadaynu eegno xidhiidhkii u dhexeeyay Miniligii shawa, Boqor Yuhaanis oo hogaaminaya ciidan ay tiradiisu gaadhayso 100,000 ayaa dagaal ugu kaceen dhanka shawa, balse Minilik ayaa si rasmi ah isugu-dhiibay Boqor Yuhaanis oo waliba aqbalay heshiiskii Lijee ee 20 kii Maarso, 1878[dii]. Qodabadii heshiiskan waxaa ka mid ahaa:

1 Minilik wuxuu qiray boqornimada Yuhaanis wuuna aqbalay in uu joojiyo sheegashada uu sheegto in uu yahay boqorkii boqorada oo uu ku ekaado Nugus (boqor) nimada shawa oo kaliya.

2 Yuhaanis wuxuu u ogolaaday Minilik in uu maamulo (xukumo) qeybta koonfureed ee Wallo iyo dhulka uu rasmi ahaan maamuli jiray Hayla Malakoot.

3 Minilik waxaa loo fasaxay in uu dhul-balaadhsi u sameeyo dhanka koonfurta, Galbeedka iyo waliba dhanka koonfur Bari; waxana lagu waajib yeelay minilik in uu canshuur (gibir) sanadeed siiyo Yuhaanis. Waxayna labadooduba ku heshiiyeen in ay isku-duubnaadaan oo ay ka midaysnaadaan cadawyada shisheeye.

4 Waxaa kale oo lagu heshiiyay in uu san Minilik wax heshiis iyo wada hadal toona ah oo gooni (gaar) ah la yeelan Karin xoogaga ajinabiga (shisheeyaha). iyada oo uu xaalku saas yahay, ayuu muddo yar kadib Minilik Jabiyay heshiiskii qodobkan, oo uu si gaar ah heshiisyo ula galay Talyaanigii 1883, 1887 iyo waliba heshiiskii Wujaale ee1889 kii.

## Jawaabihii Iska caabineed ee Cadawgii shisheeye ee Yuhaanis

Yuhaanis wuxuu difaacayay madax banaanida iyo xornimada Itoobiya oo uu ka difaacayay Masaarida, Talyaaniga iyo Mahdigii Suudaan.

## Iska difaacidii Isballaadhintii Masaarida

Khadiif (boqor) Ismaaciil Baashaa oo boqor u ahaa Masaarida ayaa wuxuu doonayey in uu balaadhiyo Imbiraadooriyada Masaarida oo ay maamulaan laga bilaabo badda Meedhitiraaniyaanka ilaa iyo meesha uu ka soo bilowdo wabiga Niil oo ah harooyinka Taana iyo Fiktooriya. Arintaas awgeed ayuu khadiif ugu soo qaaday dagaalada military Itoobiya, oo uu kaga yimid (ka soo galay) saddexda dhinac ee Massawa, Saylac iyo Tajura. Ciidamadii Masaarida ee ka soo galay dhanka Massawa iyo ciidankii Yuhaanis waxuu dagaal ku dhexmaray labada goobood ee Gundhat iyo Gurraa, halka kuwii Saylac la iskaga hor yimid Harar.

Waxaa ka dambeeyay weeraradoodan gardarada ah oo ku taageersanaa dawladii Ingiriiska. Furitaank ii Suwis kanaal ee 1869 kii ayaa aha mid ahmiyad (muhiimad) ballaadhan leh oo isku xidha Yurab, Afrika iyo Aasiya.


## Weeraradii Milatari ee ay Masaaridu ku soo qaadeen Itoobiya iyo Natiijooyinkii ka soo baxay

| Tiro | Dhinacyadii ay ka soo galeen weeraradii military ee masaaridu | Sanadka | Hogaamiya yaashii milatari ee ciidamadii masaarida | Natiijooyinkii dagaala da (furinaha dagaalka) |
|---|---|---|---|---|
| 1 | Waxay ka soo galeen dhinaca saylac iyagoo ku aadan saldanadii Harar. | Bishii Oktoobar 1875 | Maxamad Raa'uuf Baashaa | Ciidamadii masaaridu waxay qabsadeen Harar oo ay haysteen 1875 ilaa iyo 1855 |
| 2 | Waxay ka soo galeen dakadda Taajura ee Jabuuti iyagoo ku sii jeeda (ku wajahan) Shawa | Oktoobar/ Nofeembar 1875 | Waxaa watay ciidamada masaarida Warnar Munsinger oo ahaa calooshii u shaqayste u dhashay Iswisar laan oo uu khadlif Ismaaciil soo dirsaday | Munsinger iyo dhamaan ciidan kiisii oo ahaa 500 waxaa lagu laayay gobolka canfarta |
| 3 | Waxay soo gaadheen cadwa (Adw) iyagoo ka soo galay Masawa. Kadibna waxaa ka dhacay saddex dagaal oo isdabajoog ah. | Maarso 1875 iyo Maarso 7 – 9, 1876 | Waxaa hogaaminayay ciidamadii Masaarida ee labadii dagaal ee ka kala dhacay Gundhat iyo Gurra kornayl u dhashay dalka Deenmarki oo la odhan jiray Arendirab. Wuxuu ahaa calooshii u shaqayste uu ku adeegsanayay khadiif Ismaaciil. | Ciidamadii masaarida waa la jabiyaya, lakiinse hogaamiyayaashii Masaarida ma aysan qirin xornimada Itoobiya. |
| 4 | Waxaa Massawa ka soo galay Talyaanigii isagoo sii maray Dhogaali una sii gudbay dhulka jooga sare ee Eratariya (Talyaanigu waxay Massawa ka qaateen Masaarida Sanadkii 1885 tii bishii sii Feebarwari. | Janawari 1887 | Dhogaali | Waxaa dhameeyay dhamaan 500 ee ciidamadii Talyaaniga ciidankiiu hogaaminayay Aluulaa. |
| 5 | Dagaalkii Mahdiga ee xadka Itoobiya iyo Suudaan | 9 – Magrso 1889 kii | Matama | Waxaa la jabiyay ciidamadii Yuhaanis, guushii dagaalka kadibna waxaa kurka laga jaray Yuhaanis |


Guud ahaan, Yuhaanis wuxuu aad ugu gogol xaadhay in uu ku guulaysto midnimo qaran waxaa kale oo uu isku dayay in uu xaliyo dhibaatada kala qayb sanaanta caqiidada ee kiniisada Ortodhokiska Itoobiya. Hadaynu eegno dhanka difaaca uu ka difaacayay madaxbanaanida Itoobiya cadawga shisheeye, wuxuu dib u celiyay kana difaacay Itoobiya weeraradii Masaarida, Talyaaniga iyo Mahdiga.



*Maxamad Al Axmad*



*Jeneraal Joordan.*



*Miniliik oo ahaa markii hore boqrkii shawa markii dambana boqorkii Itoobia*



*Boqor xayla Silaase 1[aad]*

### Xaqiiqooyin Taariikhdii Miniligii 2[aad] ah

- *1844 – 1855: Sanadadii hore*
- *1855 – 1865: wuxuu ku xidhnaa maqdalla isagoo maxbuus dagaal ah.*
- *1865 – 1889: wuxuu ahaa boqorka shawa.*
- *1889 – 1913: wuxuu ahaa boqorkii boqorada Itoobiya.*

### Guulihiisii ugu waa weynaa

- *Sii wadidii maamulkii boqortooyadii shawa.*
- *Wuxuu habkii casriga ahaa ee dawladii dhul goosiga ku dhamaystiray nidaamkii dhul-balaadhsiga*
- *Wuxuu guul taabagal ah ka soo hoyiyay dagaalkii Adwa ee ay Talyaanigu Weerarka gardarada ah ku soo qaadeen, guushaas oo tusaale wanaagsan noqotay oo ay kaga daydaan wadamadii gobanimo doonka ahaa ee Afrika.*

## 1 Sidee buu Minilik ku hantay awooda?

- *Waxaa ka caawiyay oo uu ka faa'iidaystay boqortooyadii xasiloonayd ee uu dhisay (sameeyay) Sahla Sillaase oo ahaa awowgii Aabo.*
- Guushii ciidamadiisu ay goobta la yidhaahdo Gadilo kaga adkaadeen ciidankii Basaabih ayaa meesha ka Saartay mid ka mid ah hogaamiyayaashii awooda lahaa e u kala baratamayay xilka imbiraadooriyadda.
- Wuxuu xidhiidh wanaagsan (gacan saar) la lahaa Talyaaniga oo ku Caawinayay hub casri ah oo uu markii dambe isaga laftiisa kula dagaalamay.

## 2 Dhulbalaadhsigii iyo sii xoogaysigii awoodiisa

Mudadii uu Minilik xilka boqortooyo haystay (1889 – 1913), waxaa samaysmay dawlad dhexe oo dhul-goosi ah iyo xukuumad boqortooyo oo aad u weyn. Minilik wuxuu dhul-balaadhsi ku fidiyay (balaadhiyay) dhulkii hoos imanayay taasoo adkaysay dhaqaalihiisii iyo awoodiisii ciidan. Wareegii koobaad ee dhul balaadhsigiisa wuxuu ka bilowday 1870 ilaa iyo 1889kii, midkii labaadna 1889 – 1896, halka uu kiisii saddexaad ee ugu dambeeyay uu ahaa 1896 – 1900.

### Wareegyadii Dhul-balaadhsiga iyo Adkaanshihii Awooda Minilik

#### ◆ *Wajigii 1aad (1870 - 1889)*

Waxaa dhul-balaadhsigan sababay xaalado dhaqaale. Wuxuu Minilik gacanta ku dhigay gobolo dhaqaale ahaan aad muhiim u ah sida qaranadii Gibee, Leqaa Qallam iyo Leqaa Neqamte. Wuxuu qabsaday Harar 1887 kadib markuu kaga guulaystay Imiir Cabdulaahi goobta la yidhaahdo jalanqo. Waxaa kale oo ay ciidamadii Minilik oo uu hogaaminayo Gobanaa ka guulaysteen ciidankii Nugus Takla Haymaanoot oo ay kaga guulaysteen goobta la yidhaahdo Imbaabo 1882^dii. Guushan ciidan waxay meesha ka saartay mid ka mid ah hogaamiyayaashii awooda badnaa ee loolanka kula jiray.

#### ◆ *Wareegii 2^aad (1889 - 1896)*

Sababta ugu weyn ee dhul-balaadhsigii wareegan waxay ahayd in lagu xaliyo dhibaatadii Cuna la'aantii ba'nayd ee 1889 – 1892. Waxaa mudadan (xiligan) loo yaqaanaa "Kifu Qan" (maalmihii xumaa). Dad badan oo ka soo jeeda gobolada waqooyi ee ay abaartu Saamaysay ayaa dibu dajin loogu Samaynayay gobalada cusub ee laga qabsaday koonfurta.

### ◆ Wareega 3aad (1896 - 1900)

Waa wareegii ugu dambeeyay ee dhulbalaadhsigii Minilik Kaasoo Ujeeda diisa ugu weyn ee ahayd in lafidiyo xuduuda si loo helo dhulbalaadhan oo la iskaga difaaco guumeystaha reer Galbeedka. Waxaa Laqabsaday wareegan ugu dambeeyay dhamaan goobalada iyo dagmooyinka ku yaala xuduudaha. Waxaana ka mid ahaa dhulka Booranta ee xadka kiinya, Ogaadeenya oo iyana xad lawadaagta Soomaalia, Asoosa iyo Beenishaangul Waxaa kale oo uu 1897 dii qabsaday Minilik Kafa oo ahayd mid goonideeda utaagan oo uu xukumo boqor (Taato) Gaaki Sareekoo.

Minilik wuxuu sameeyey maamul boqortooyo oo dhulgoosi ah kaasoo ka kooban bulsho qowmiyado kala duwan leh. Waxaa dhabawday midnimadii dadyawga kala duwan ee Itoobiya ee ay ku guul daraysteen Teedhurooskii 2aad iyo Yuhaaniskii 4aad.



*Minilik iyo Hogaamiyayaashiisii ciidamada (Raasas)*

## 3 Minilik iyo Iska caabintii gumaystayaashii Reer Yirub

Minilik cadawgiisa koobaad ee ugu darnaa wuxuu ahaa Talyaaniga. Dawladdi Ingiriiska ayaa waxay ku casuuntay oo ay ugu yeedhay Talyaaniga in uu qabsado Eratariya, koonfurta Somaaliya, kadibna uu gumaysto dhamaan dalka Itoobiya. Si uu ugu hirgalo hadafkooda ayuu Talyaanigu heshiis lagu magacaabo heshiiskii Wujaale ula galay Minilik 2 May 1889kii. Qodobada ugu Muhiimsan ee heshiiskan waxaa ka mid ahaa qodobka 4aad, 17aad, iyo 19aad. Tusaale ahaan hadaan soo qaadano qodobka 17aad, wuxuu boqorkii boqorada Itoobiya siixiixay oo uu kula heshiiyay Talyaaniga in dhamaan wixii xidhiidh dibadeed ah uu usiimaro Talyaaniga, oo uu san toos wax xidhiidh ah ula yeelan karin Caalamka kale.

## Dagaalkii Adwa ee 1896dii iyo Guushii laga soo hoyiyey

***Sababtii dhalisay dagaalka:*** Sababta ugu weynayd ee dagaalka waxay ahayd Talyaaniga oo doonayey in uu Itoobiya gumaysto (gacanta uu ku dhigo). Waxaa kale oo ka mid ahaa Sababihii dagaalka ka dambeeyay heshiiskii Khaa'inimo ee Talyaanigu ku khaa'imay boqor Minilik qaar ka mid ah qodobadii heshiiska (gaar ahaan qodobka 17aad).



***Dagaalkii Adwa***



### Hawl-galka 1.4

Qor saddexdii qodob tarjumaadoodii oo buuxda tusaale: Qodobkii 4aad, 17aad, 19aad.



***Taaladii Minilik oo Faras fuushan***

Dagaalkan lagaga soo horjeeday guumaystaha ee uu hogaaminayeen Minilik, boqoradii Taayitu oo ahayd xaaskii boqor Minilik iyo hogaamiyayaashii gobalada ayaa wuxuu lahaa saddex wareeg oo kala ahaa:

1 Diseembar 1895tii waxaa ciidankii Talyaaniga lagu jabiyay goobta La yidhaahdo Amba Alagee

2 Janawary 1896dii waxaa dhacay dagaalkii Maqale, kaasoo Talyaanigii lagu qasbay in uu ka baxo Maqale.

3 1 - 2 Maarso, 1896dii waxaa dhacay dagaalkii ugu xoogga badnaa oo ka dhacay goobta la yidhaahdo Adwa. Dagaalkan ayey geesiyiintii midysnaa ee Itoobiya cagta mariyeen gumaystihii Talyaaniga.


Waxaa dhamaan dagaaladaas aan soo sheegnay ku guulaystay ciidamadii Itoobiya. Waxayna si gaar ah geesinimadoodii iyo waddaninimadoodii ugu mujiyeen dagaalkii taariikhiga ahaa ee Adwa, kaasoo tusaale wanaagsan oo lagu daydo u noqday waddamadii Afrika ee ay guumeystayasha reer Yurub guumaysanayeen. Minilik Imbiraadooriyadiisii cusbayd way sii adkaatay wuxuuna ku guulaystay aqoonsi dibloomaasiyadeed oo uu ka helay quwadihii Reer Yurub. Safaarado ayay Ajanabigii ka furteen Addis-Ababa. Waxaana ugu horeeyay Talyaaniga waxaana ku xigay Faransiiska, Ingiriiska iyo Maraykanka.

Guushii waynayd ee dagaalkii Cadwa waxay dalka Itoobiya u soo hoysay sumcad, midnimo iyo karaamo aan la qiyaasi karin oo taariikhda baal dahab ah ka gashay. Shacbi waynaha Itoobiya ee geesinimada iyo waddaniyada muujiyay oo uu hor kacayay Boqor Minilk guushaas ay soo hooyeen waxay noqotay minaaradii iyo furihii xornimo u dirirka ee Afrikaanku ka shidaal qaateen, dhiiri gelintana Unoqotay Tusaale; Sayid Maxamed Cabdile Xasan oo hogaaminayay halgankii Darawiishta ee bilaabmay dagaalkii Adwa kadib 1896 ilaa 1922kii kana soo hor jeestay gumaystayaashii Reer yurub siiba Ingiriiska iyo Talyaaniga. Haddaba, waxaan odhan karnaa Halgankii Sayid Maxamed Cabdile Xasan wuxuu ahaa midhihii (natiijadii) ugu hor curatay ee Guushii taariikhiga ahayd ee cadwa.

## Casriyeyntii Minilik

- *Wuxuu aas-aasay dawlad leh nidaam wasaaradeed.*
- *Wuxuu soo saaray (daabacay) lacag qadaadiic ah oo uu ujeeddo ganacsi iyo ujeeddooyin kaleba ka lahaa*
- *Wuxuu dhisay wadada Tareenka ee isku xidha Addis-Ababa ilaa Jabuuti.*

- *Wuxuu dhisay (aasaasay) adeegyada boostada iyo isgaarsiinta.*
- Waxaa kale oo la furay Hosbitaal iyo Dugsigii Minilik



**Jaantuska 1.15: Qaar ka mid ah wax qabayadii casriyeeneed ee Boqor Minilik**

# 1.4 XAALADAHA SALDHIGA U AH KALA DUWANAANSHAHA DAGAAMEYNTA IYO HAB-NOLOLEEDKA

***Markuu dhamaado cashirku, ardaydu waxay awoodi doonaan inay.***

- Sheegaan qodobada furaha ah ee sababay kala duwanaanshaha dagaanka ee Itoobiya iyo Geeska Afrika.
- La xidhiidhiyaan qodobada dagaanka dhanka xaaladda nolasha ee Itoobiya iyo geeska Afrika.
- Isbarbar dhigaan xaaladda nolasha iyo dhaqanka ka jira dhulka jooga sare iyo ka jooga hoose iyo dhulka miyiga iyo ka magaalada.

**Bartilmaameed**

- *Dagaanku wuxw leeyahay qaabab kala duwan.*
- *Dagaanku wuxuu noqon karaa Miyi ama Magaalo, Meelaha Jooga sare ama jooga hoose leh.*
- *Kala duwaanaanshaha dagaamada waxaa ugu wacan qodobo dhaqameed iyo qodobo muuqaaleed.*
- *Qodobka Muuqaaleed waa ay go'aamiya waxaad cuntiin, xidhatiin i.w.m*
- *Qodobka dhaqameed waa ka qaabeeya sida aad u dhaqantiin, isu dhexga shaan i.w.m*

## Waa maxay dagaanku? Maxaynu uga jeednaa erayga dhaqan?

- ***Dagaanku:*** *waa hanaanka iyo qaabka dadku ay ugu nool yihiin una daganyihiin goob, sida tuulooyinka, magaalooyinka, caasimadaha, i.w.m.*
- ***Dhaqanku*** *waa qaab nololeed. Dhaqanku wuxuu tilmaamaa caadooyinka iyo caqiidada ay dad gaar ahi wadaagaan xilli iyo goob cayimana ku wadaagaan. Itoobiya waxaa ka jira dhaqamo kala duwan sida dhaqanka dadka Oromada, Soomaaida, Amxaarada iwm.*

## B *Kala duwanaanshaha Dagaanada*

Dagaanada oo dhan ma aha iskumid oo waxaa jira waxyaabo badan oo ay ku kala duwanyihiin. Waxyaabaha ay dagaanadu ku kala duwanyihiin waxaa ka mid ah bedka, wax qabadka iyo halka ay dhacaan. Tusaale ahaan:

- *Dagaanka miyiga iyo magaalada waxay ku kala duwan yihiin dhanka waxqabadka.*
- *Dagaan ku yaala dhul joog sare iyo mid ku yaala dhul joog hoosena waxay ku kala duwan yihiin halka ay dhacaan.*

Waa maxay qodobada sababa kala duwanaanshaha dagaanada? Waxaa loo kala qaadaa qodobada sababa kala duwanaanshaha dagaanada labo qaybood oo waa wayn:

1 ***Xaaladaha dabiiciga ama muuqaal:*** waa xaaladaha dabiiciga ah (ayna aadamuhu wax lug ah ku lahaayn) ee saameeya degaanada sida: qaab-samayska dhulka, cimilada, Biyaha, iyo Carrada san.

2 ***Xaaladaha dad-sameega:*** waa xaaladaha aan dabiiciga ahayn ee ay aadamu keenaan ama ay sababteeda leeyihiin.

- *Iska difaacidda ay koox (Dadyow degan goob) iska difaacaan cadawyadooda ku xeeran ama uu loolan ka dhexeeyo.*
- *Aasaaska adeegyada ay ka mid yihiin: Dukaamada, Dugsiyada, xarumaha Caafimaadka, iwm. waa qodobada sidoo kale dadka salka u dhiga meel cayiman.*

Sidaa darteed, labada qodob ayaa waxay yihiin kuwa keena kala duwanaanshaha dagaanada.

Qodabadan waa qodobo la xidhiidha go'aamada binii'aadanka sida aasaas idda waxyaabaha daruuriga ah Tusaale: dugsiyada, xarumaha caafimaadka, dukaamada iwm ayaa ah waxyaabaha sabab u ah in ay dad dagaan sameyaan.

## T *Kala duwanaanshaha Hab-dhaqan-dhaqaaleedka u dhexeeya Miyiga iyo Magaalada iyo dhulka jooga sare iyo dhulka jooga hoose.*

### *Maxaad ka fahanteen hab-nololeedku waxa uu yahay?*

Waa habka dadka noloshooda hogaamiya. Wuxuuna ku tusaa waxa iyo sida ay u cunayaan, Meesha iyo sida ay ugu nool yihiin iyo sida ay ugu dhaqmayaan, waxa ay aaminsan yihiin iwm. Hab-nololeedka iyo Dhaqanku waxay leeyihiin xidhiidh si aad iyo aad ah isugu dhow. Dhaqamada dadka waxaa go'aamiya hab-nololeedkooda, hab-nololeedkoodana waxaa badala oo saameeya dhaqankooda.

**Farqiga hab-noleleedka iyo dhaqanka ee u dhaxeeya magaalada iyo Miyiga**.

- *Hab nolaleedka iyo dhaqanku waa laba aad isku xidhan.*

**Farqiga hab-nololeedka iyo dhaqanka ee u dhexeeya meelaha Miyiga iyo Magaalada**.

| Dagaanada miyigu waa meelaha ay | Dagaanada magaalooyinka waa meelaha ay |
|---|---|
| ◊ Tuulooyinka ama meelahay guryuhu kala fogyihiin (firidhsan yihiin)<br>◊ Nolasha dadka waxay ku tiirsantahay beerashada midhaha iyo dhaqashada Xoolaha<br>◊ Ma laha deris badan oo isu dhadhaw oo ay is booqdaan maalin walba.<br>◊ Waxay dadka Miyigu u isticmaalaan gaadiid ahaan dameeraha iyo awrta oo ay ku rartaan alaabahooda | ◊ Guryaha iyo dhismuhu u dhisan yihiin si aad isugu dhadhaw<br>◊ Nolasha dadka waxay ku xidhantahay shaqooyinka xafiisyada, warshadaha, dukaamada, iwm.<br>◊ Guryaha in tooda badan waxay kasam aysanyihiin dhagax bulukeeti, iwm.<br>◊ Waxay Leeyihiin daris aad isugu dhadhaw<br>◊ Waxaa laisticmaalaa gaadiidyo kala duwan sida tagaasida, basaska, iwm. |

Farqiga hab-nololeedka iyo dhaqanka ee u dhexeeya meelaha dhulka Jooga sare iyo meelaha dhulka jooga hoose.

| Dadka ku nool dagaanada dhulka jooga sare leh ku yaala waa kuwo | Dadka dagaanada dhulka jooga hoose |
|---|---|
| ◊ beerta heeda, qamandiga iyo daafida.<br>◊ ku nool cimilo ka qabaw cimilada dhulka jooga hoose leh. | ◊ Beerashada Galleyda, Haruurka (Mesegada) i.w.m.<br>◊ Ku nool cimilo ka diiran |
| ◊ Dhirta sida "Tid" "kar aha" i.w.m.<br>◊ Dhaqda idaha.<br>◊ Samaysta canjeero ama Furun laga sameeyay "Daafi"" Qamadi" ama Heed<br>◊ Isticmaala caano lo'aad<br>◊ Waxay xidhaan dhar ka samaysan cudbi (oo loo yaqaano "sheema" ama "Buluukoo" si uu laf ahaantoo da uga difaaco Heerkulka qabow | ◊ Dhirta sida Bardaha, Qudhaca, qaydarka, galoolka, i.w.m.<br>◊ Dhaqashada Riyaha Geela i.w.m<br>◊ Samaysta canjeero ama furun ay ka samaysteen Galley<br>◊ Isticmaala caano geel, caano adhi<br>◊ Waxay xidhaan dhar khafiif ah si uu laf-ahaan tooda uga difaaco cimilada aadka u kulul |

# SOOKOOBIDA CUTUBKA

- Geeska Afrika waxaa loo aqoonsaday ilaa xad inuu yahay halka uu Aadamiga Abuuritaankiisii ugu horeeyay ka bilaabmay.
- Wuxuuna ka kooban yahay Afar waddan oo kala ah:- Itoobiya, Ereteriya, Soomaaliya iyo Jabuuti, waana cidhifka bari ee dhex gala bada carabta eek ala sooca badwaynta hindiya iyo Badacas.
- Dalka Itoobiya waa hoyga diimaha kala duwan Diimaha ugu caansan waa diinta islaamka iyo kiristaanka. Diinta Islaamka waxay soo gaadhay Itoobiya qarnigii 7$^{aad}$ C.D, waxaa na ka qayb qaatay fiditaankeeda ganacsigii masaafada dheeraa ee ka imanayay dhulka carabta.
- Diinta Islaamka waxay Itoobiya ka soo gashay dhanka koonfurta iyo Bariga. Dekeda saylac ayaa ahayd marinka ugu muhiimsan dhanka fiditaanka diinta Islaamka. Waxaana ka samaysmay saldanado Islaami ah oo ka faa'iidaystay ganacsigii masaafada dheeraa.
- Marka laga yimaado saldanadahan, Itoobiya waxay hoy u ahayd dawladihii iyo Boqortooyooyinkii qadiimiga ahaa iyo kuwii waayihii dhexe oo ku soo kordhiyay guulo farsamada iyo guulo taarii khi ahba. Guulahaas oo ah kuwo manta goobaha soo jiidashada leh ee xaga dalxiiska qiimaha wayn leh.

# LAYLIGA GUUD EE CUTUBKA 1aad

## I *Tii run ah "Run" ku qor tii been ahna "Been" ku qor*

1 Waddamada Geeska Afrika weligood abaari kuma habsan.

2 Itoobiya waxay xadka ugu dheer la wadaagtaa soomaaliya.

3 Furitaanka kanaalka suways ee sanadkii 1869kii wuxuu sare u qaaday danayntii ay ajanabigu danaynayeen wadamada Geeska Afrika.

4 Badwaynta Hindiya waxay dalalka Geeska Afrika ay xadka kala wadaagaan dhinaca koonfur bari.

5 Badda Cas waxay kala soocdaa Geeska Afrika iyo Bariga Dhexe.

6 Kiristaanku waxay aamin san yihiin ciise in uu ina Illaahay yahay.

7 Islaamka iyo Kiristaankuba Asalkoodu wuxuu ka soo jeedaa Geeska Afrika.

8 Muslimiintu waxay aaminsan yihiin in uu hal Illaah jiro.

9 Itoobiya waa waddan ay Islaamka iyo Kiristaanku si nabad galyo ah ugu wade nool yihiin.

10 Kiristaanimada waxaa ugu hor qaatay boqor iyo taageerayaashiisii.

11 Itoobiya waa wadan dawlado waayadii hore ka soo jireen.

12 Mid ka mid ah sababihii hoos u dhaca u keenay Aksum waxay ahayd weerarkii dadka Beejaha.

13 Aksum waxay awood lahayd laga bilaabo qarnigii 6aad ilaa qarnigii 8aad C.D.

14 Boqortooyadii Saagwe waxaa si degdeg ah u bara bixiyay dawladii Aksum.

15 Cinwaanka ama horgalaha magac ee hogaamiyayaashii kaffa wuxuu ahaa "Taato".

16 Horgalaha "Kaawo" waxaa adeegsan jiray hogaamiyayaashii walaytaha.


17 Dhaqaalihii kaffa wuxuu ku dhisnaa ganacsiga iyo Beeraha.

18 Boqorkii ugu caansanaa Boqortooyadii Saagwe wuxuu ahaa Boqor kaaleb.

19 Xukuumadii ugu caansanayd waayadii hore ee waqooyiga Itoobiya waxay ahayd Dhaamoot.

20 Maamulkii muslimiintii Adaal waxaa lagu aasaasay Bariga Shawa.

**II** ***Adiga oo ka tixraacaya khariiradan lagu siiyay ka jawaab su aalaha kana dooro xaraf ka saxda ah.***




**Jaantuska 1.16: Khariidada Afrika**

1 Magaalooyinkan soo socda teebaa ugu dhaw Addis Ababa?

B Jabuuti | J Muqdisho
T Khartuun | X Asmara

2 Waa kee dalka Geeska Afrika ee Itoobiya ka tirsanaa ka hor 1993?

B Jabuuti | J Eriteriya
T Soomaaliya | X Suudaan

3 Dalalkan Geeska Afrika kee baa ugu dad badan (tirada dadka ee ugu badan ku nool yihiin)?

B Itoobiya | J Eriteriya
T Soomaaliya | X Jabuuti

4 Dalalkan soo socda kee baan xad la laheyn Geeska Afrika?

B Masar
T Uganda
J Kiinya
X Liibiya

5 Dakadee bay Itoobiya wakhti xaadirkan wax kala soo degtaa?

B Muqdisho
T Boorti Suudaan
J Jabuuti
X Casab

## III *Ka dooro Jawaabta saxda ah*

1 Marinkii ugu Muhiimsanaa dhanka fiditaanka diinta islaamka ee ay ka soo gashay Geeska Afrika waxay aheyd.

B Adulis
T Cassab
J Berbera
X Saylac

2 Sababtii ugu wayneyd ee muranka ka dhex dhalisay maamulkii Islaamiga ahaa ee Ifaat iyo Boqor Amdhe Tsiyoon waxay ahayd?

B Danihii ahaa maamul ka webiga Abbaay.
T Danihii ku aadanaa ganacsigii masaafada dheer ee wadiiqada saylac maamulkiisa.
J Danihii ku aadanaa maamulka Bada cas.
X Midna

3 Saldanadii ugu horeysay ee muslimka aheyd ee qarniyadii dhexe ee itoobiya waxay ahayd?

B Ifaat
T Fatagaar
J Adal
X Shawa

4 Qaramadan hore ee Itoobiya mid kee baan ka mid aheyn saldanadihii Islaamiga ahaa

B Dhaamot
T Adal
J Ifat
X Shewa

5 Boqortooyadii Ifaat waxaa loo yaqaanay?

B Walaasma
T Zagwa
J Makhsumayt
X Tolo

## IV *Dhamaystir weedhaha (Uqaado shaqo guri adiga oo u isticmaalaya Buugga qorista)*

1 Labada diimood ee ugu waa weyn ee ka jira Itoobiya waa ______ iyo ______.

2 Diinta Isaamka waxay soo gaadhay Itoobiya qarniyadii ______ C.D.

3 Macnaha erayga carabiga ah ee Islaam waa ______.

4 Sida ay sheegato kiniisade Ortodhokiska Itoobiys, waxay diinta Kiristaanku soo gaadhay Itoobiya ______.

## V *Isku Aadi*

| B | | | T |
|---|---|---|---|
| 1 Uduga | | B | Qarankii hore ee jirijiray 3000 C.H |
| 2 Dhaamoot | | T | Qarankii horee Itoobiya ee ka jiray waqooyiga wabiga Gojab. |
| 3 Enaarya | | J | Qarankii hore ee Itoobiya ee ka jiray inta u dhaxaysa wabiga Abbaay iyo wabiga dhedhessa. |
| 4 Kaffa | | X | Qarankii horee Itoobiya ee ka jiray koonfurta Enaryaa. |
| | | KH | Qarankii ka jiray koonfurta Aksuum qiyaastii 1000 C.H. |

## VI *Isku Aadi II saldanadaha Muslimka iyo halka ay kaga yaalaan Ittobiya isku aadi*

| Saldanada | | Halka ay kaga taalo Itoobiya |
|---|---|---|
| 1 Ifaat | B | Shenkora |
| 2 Adaal | T | Harar |
| 3 Baali | J | Agagaaraha isha Webiga Shabeelle. |
| 4 Dawaro | X | Waqooyiga Shewa |
| 5 Fatagar | KH | Waqooyiga Baali |

**VII** ***Hoos waxaa taxan qaar kamid ah waddamada Afrika. Kaga jawaaba su aalaha sooraaca Jawaabahooda ku qora buuga aad wax ku dhigataan.***

| | | | |
|---|---|---|---|
| *Itoobiya* | *Jabuuti* | *Sudan* | *Somaaliya* |
| *Kenya* | *Eriteriya* | *Masar* | *Taansaaniya* |
| *Jaadh* | *Yugaandha* | | |

1 U kala qeybi dalalka Geeska Afrika iyo kuwa aan ahayn.

| ***Waddamada Geeska Afrika*** | ***Waddamada aan ahayn*** |
|---|---|
| ______________ | ______________ |
| ______________ | ______________ |

2 U kala qeybi dalalka xeebta leh iyo kuwa aan lahayn.

| ***Wadamada aan xeebta lahayn*** | ***Waddamada xeebta leh*** |
|---|---|
| ______________ | ______________ |
| ______________ | ______________ |

3 Tax ama qor magaalo madaxyada waddamada hooso.

| | | |
|---|---|---|
| Ittobiya | __________ | Keenya |
| Suudaan | __________ | Masar |
| Jabuuti | __________ | Jaadha |
| Eriteriya | __________ | Taansaaniya |
| Soomaaliya | __________ | Yugaandha |

# CUTUBKA 2

# DHULKA IYO WAXA KU XEERAN




## Ujeedooyinka Guud ee Cutubka

***Marka uu dhamaado Cutubkan kadib, ardaydu waxay awoodi doonaan inay:***

- aqoonsadaan qaabka dhulka, dhaqaaqa iyo Saameyntiisa.
- fahmaan saameynta ay xilliyadu ku Leeyihiin beer qodashada iyo xoolo dhaqashada.
- fahmaan isticmaalka khariiradaha, iyo
- sawiraan khariirad gacmeed ay ku muujinayaan dugsigooda.

## Tusmooyinka Muhiimka ah

**2.1** MEESHA AAN KU NAAIIO (DHACNO)

**2.2** QAABKA DHULKA, DHAQAAQA IYO SAAMEYNTIISA

**2.3** SAAMEYNTA AY XILLIYADU KU LEEYIHIIN BEER QODASHADA IYO XOOLA DHAQASHADA

- *Sookobidda cutubka*
- *Su'aalo ka kooban cutubka dhamaantii*

# HORDHAC

Cutubkii hore, wax yaabaha aad ku soo barateen waxaa ka mid ahaa meesha uu dhaco Geeska Afrika iyo wadamada uu ka kooban yahay, asalkii aadamaha, taariikhdii qaramadii hore ee Itoobiya iyo Geeska. Cutubkana waxaad ku baran doontaan dhulka iyo wax yaabaha ku xeeran. Waxyaabaha aad sida gaarka ah ugu baran doontaan waxaa ka mid ah qaabka dhulka, dhaqaaqa iyo Saameyntiisa iyo saameynta ay xilliyadu ku leeyihiin beeralayda iyo xoola dhaqatada.

## 2.1 MEESHA AAN KU NAALLO (DHACNO)

***Marka uu dhamaado cashirkan kadib, ardaydu waxay awoodi doonaan inay:***

- Aqoonsadaan ayna cayimaan xariiqaha loolasha iyo dhigaha.
- Kala saaraan farqiga udhexeeya halka ay meeli dhacdo daris ahaan iyo xariiqahaan.
- Cayimaan halka uu dalkoodu dhaco (ku yaalo) daris ahaan iyo xariiq ahaanba.
- Aqoonsadaan halka ay magaaladoodu dhacdo (ku taallo) daris ahaan.

### Erayada Furaha u ah cashirkan

- Halka ay dhacdo (Location)
- Daris ahaan
- Xariiq ahaan
- Lool
- Dhig



### Hawl-galka 2.1

ka fikir su'aalahan soo socda kadibna saaxiibkaa u bandhig fikradaada.

1 Ma sheegi kartaa halka uu gurigiinu kaga yaalo magaaladaada?

2 Ma tilmaami kartaa halka ay Itoobiya kaga taallo khariirada caalamka?

3 Muxuu yahay macnaha loola jeedo marka aan leenahay halka ay meeli dhacdo (ku taallo)?

4 Maxay tahay faa'iidada ay leedahay u la ogaado meeli halka ay dhacdo ama ku taallo?

Culimada ku xeel dheer cilmiga Juquraafiga daraasaadkooda waxay ku bilaabaan kolka hore inay helaan meeli halka ay dhacdo (ku taallo) daris ahaan ama xariiq ahaan.

## 1 *Meeli halka ay daris ahaan dhacdo:*

Meeli halka ay daris ahaan dhacdo waxay inoo tilmaantaa (caddaysaa) halka ay meeli ku taallo marka loo eego (lala xidhiidhiyo) meelaha kale ee ay dariska yihiin. Meel kasta waxay leedahay meela badan oo daris ahaan halka ay dhacdo loola Xidhiidhin karo. Balse meel kasta waxay leedahay hal meel oo kaliya oo ay xariiq ahaan dhacdo.



**Hawl-galka 2.2**

Usharrax ardeyda fasalkaaga ah halka aad ku nooshahay iyo halka aad wax ka barato?

## *Meeli halka ay xariiq ahaan dhacdo:*

Sided uga jawaabi laheyd haddii lagu waydiiyo goob dhulka ka mid ah halka ay dhacdo (ku taallo) xariiq ahaan. Tusaale ahaan haddii lagu waydiiyo su'aashan soo socota:

***Sheeg halka ay Itoobiya xariiq ahaan dhacdo (ku taallo)?***

Hadaba meeli halka ay xariiq ahaan dhacdo waxaa weeye booska saxda ah ee ay meeli kaga taallo Galoobka ama khariiradda caalamka (aduunka). Waxaa la adeegsadaa (la isticmaalaa) marka la tilmaamayo halka ay meeli xariiq ahaan dhacdo xariiqaha qiyaaseed ee dul roora Galoobka ama khariirad caalamka ee uu dhul-badhuhu ka midka yahay. Dhul-badhuhu wuxuu ku yaalaa loolka 0°; wuxuuna u qeybiyaa dhulka Waqooyi iyo Koonfur.

Dhul-baduhu wuxuu dhulka u qaybiyaa labo Nus-dhuleed (Nus-dhuleedka Waqooyi iyo Nus-dhuleedka koonfureed). Nus-dhuleedka Waqooyi waa dhamaan inta u dhexaysa dhul-badhaha iyo cidhifka Waqooyi ee barri iyo biyaba leh. Nus-dhuleedka Koonfureedna waa inta u dhexaysa dhul badhaha iyo cidhifka Koon fureed.



## Hawl-galka 2.3

Idinka oo ka kooban kooxo tira yar isla falanqeeya su'aalahan

1 Waa maxay Lool iyo dhig?

2 Waa sidee, sida ugu saxsan ee loo tilmaami karo bar ku taala dhulka dushiisa?


3 Waxaad sheegtaa Itoobiya halka ay xariiq ahaan iyo daris ahaan dhacdo?

## Lool iyo Dhig

Su'aashan ah Itoobiya halkay ku taalaa? Waxaan kaga jawaabi karnaa, Itoobiya waxay ku taallaa Geeska Afrika. Waxaa jirta si kaloo ka wanaagsan oo aan su'aashaas uga jawaabi karno. Sidan kale ee aan uga jawaabi karno waa iyadoon sheegno (tilmaano ama caddayno) halka saxda ah ee ay Itoobiya kaga taallo oogada sare ee dhulka.Waxaa sababo badan awgood lagama maarmaan ah in aan ogaano goobta (barta) saxda ah ee ay meeli kaga taallo oogada sare ee dhulka.

Hadaba waxaa jira xariiqo inaga caawiya siday arrintan inoogu suuragali laheyd oo uu dhul-badhahu ka mid yahay. Dhul badhuhu wuxuu dhulka u qeybiyaa labo qeybood oo isla'eg (nus-dhuleedka waqooyi iyo nus-dhuleedka koonfureed). Waxayna labada cidhif (cidhifka waqooyi iyo cidhifka koonfureed) ujiraan dhul badhaha fogaan isla'eg.

Waxaad fiirisaa adiga oo aad ugu dha waanaya Galoobka ama khariiradda caalamaka. Marka ugu horaysa waxaad isku-daydaa in aad heshid dhulbadhaha, ku yaala kala badhka cidhifka waqooyi iyo cidhifka koonfureed. Xasuusnaw xariiqaha kale ee dhanka sare iyo dhanka hoose dhulbadhaha ka ah, waxaa la yidhaahdaa xariiqaha barbaro ee lool.



Xariiqaha aan dhabta aheyn ee garab qaada dhulbadhaha ayaa loo yaqaanaa xariiqaha lool ama barbaro. Loolashu waxay inaga caawiyaan in aan aqoonsano meeli halka ay dhacdo ama digriiga masaafadaha (fogaanta) Waqooyiga iyo Koonfurta dhulba dhaha ah. Dhulbadhuhu wuxuu ku yaalaa loolka 0° (eber digrii). Tirada digriiga ee labada cidhifna waa 90°. Hadaba, hal beega loolku wuxuu u dhexeeyaa 0° oo dhulbadhaha ah iyo 90° oo cidhifyada ah.

*Dhamaan goobaha ku wada yaalla xariiq lool oo iskumid ah, waxay u jiraan dhulbadhaha iyo labada cidhif fogaan (masaafo) iskumid ah. Hal beega masaafo ee dhulbadhaha ka bilawda ma aha kiiloomitir (km) balse waa digrii. Cidhifka waqooyi waa 90° W, cidhifka koonfureedna waa 90° k.*

*Wareega dhulku waa ilaa iyo 40,000 kiiloomitir. Waxaan hadaba halkan ka ogaan karnaa 1° ee lool inta kiilomitir ee oogada dhulka ah ee uu u dhigmo.*

$$360^\circ = 40{,}000 \text{ km}$$
$$1^\circ = ?$$
$$= \frac{40{,}000 \text{ km} \times 1^o}{360^o}$$
$$= 111 \text{ kiilomitir.}$$

*Goobta dhulbadhaha kaga toosan dhanka waqooyi una jirta 1,110 km waxay ku taalaa loolka 10° W.*

Xariiqaha kale ee isku xidha cidhif waqooyi iyo cidhifka koonfureed waxaa loo yaqaanaa dhigo. Dhiguhu ma aha kuwo isbar bar qaada sida loolasha balse way ku kala durugsanyihiin agagaarka dhul-badhaha, waxayna ku kulmaan cidhifka waqooyi iyo cidhifka koonfureed.

Dhigaha waxaa lagu aqoonsadaa halka ay meeli dhacdo ama fogaantay ay u jirto dhig-dhexada. Cabbirka xaglaha dhigaha wuxuu u dhexeeyaa 0° oo dhig-dhexada ah ilaa iyo 180° oo ah xariiqa caalamiga ah ee kala qaybiya maalmaha. Dhig-dhexadu waxay dhulka u qaybisaa nus-dhuleedka Bari iyo nus-dhuleedka Galbeed.

Dhig-dhexadu waa dhigta 0° ee marta Giriinwij oo ku yaala London.

Goobooyinka dhigaha dhulka waxaa loo kala qaybiyaa 24 xidhmood (qaybood) oo xidhma kastaa lee dahay ballac 15° ah (15° × 24 = 360°), 15° oo kastaa waxaa u dhexeeya faraq wakhti oo hal saac ah.



## Hawl-galka 2.4

Sheeg halka ay koonka (Galoobka) xariiq ahaan kaga yaalaan magaalooyinka Tokyo, Baaris, Addiis Ababa iyo Riyodiijaneero?

Jawaabta dhamaystran ee halka ay Addiis Ababa dhacdo waa loolka 9°2´W iyo dhigta 38°B.

Wada shaqaynta ka dhaxeysa dhigaha iyo loolasha waxaa si fudud looga fahmi karaa khariirada korkeeda.

## Khariirad



## Hawl-galka 2.5

1. Waa maxay khariirad?
2. Waa maxay faa'iiddada ay leedahay khariiradi?
3. Maxay yihiin waxtarka (faa'iidada) ay inoo leeyihiin khariiraaduhu?

*Waa maxay Khariirad:*

*khariiradu waa muuqaal sawireedka dhulka oo dhan, ama qayb kamid ah dhulka. Khariiradda muuqaaleed waxay si qoto dheer noo tusisaa muuqaalka dhulka. Waxay na tusisaa halka ay goobi dhacdo, qaabsameyska dhulka iyo waxyaabaha dhaqanka ah ee ay qayb yar oo dhulka ka mid ahi leedahay. Waxyaabha dhulka dushiisa ka muuqda ee ay muujiyaan khariiradaha muuqaaleed waxaa kamid ah buuraha, banaanada, harooyinka iyo wabiyada. Waxyaabaha dhaqankana waxaa ka mid ah wadooyinka, magaalooyinka, iwm.*

Khariiradaha muuqaaled waxay isticmaalaan midabyo iyo calaamado kala duwan. Khariiraduhu waxay isticmaalaan calaamado (sumado) u taagan muuqaalada, sida jidadka (wadooyinka), dhismayaasha, wabiyada iyo dhirta. Calaamadaha ama sumadaha qaarkood waxay u eg yihiin muuqaalka ay u taagan yihiin ama matalayaan. Si aad u fahantid calaamadaha kala duwan waxay u taaganyihiin,

waa in aad eeg tid furaha khariirada. Furaha khariiradda wuxuu sharraxaa ama faah faahin ka bixiyaa waxa ay calaamadaha khariiradu isticmaashay u taagan yihiin.

Khariiradda caalamka (aduunka) waxay inoo leedahay waxtar aad u balaadhan, oo waxay inoo fududaysaa in aan aqoonsano halka ay juquraafi ahaan dhacaan (ku yaallaan) waddamada aduunku. Khariiradahan waxay ina tusiyaan halka ugu saxsan ee ay dhacaan wadamada caalamku, waxayna macluumaadka ugu muhiimsan ee Juqraafi ahaaneed siiyaan ardayda, cilmi baadheyaasha, Juqraafiyahanada iyo dadka daneeya khariiradaha.



### Hawl-galka 2.6

Sheeg qaar ka mid ah midabada iyo calaamadaha sida guud loogu adeegsado khariiradaha iyo waxa-ay u taagan yihiin?

Khariiradaha muuqaaleed waxay jooga dhulka ku muujiyaan xariiqo loo yaqaano xariiqaha Marsinada siman. Xariiqaha marsinada siman waa xariiqaha ku yaala khariirada ee isku xidha dhamaan goobaha joogoodu isku midka yahay. Waa suurtagal in aan cabbirno jooga buuraha iyo hoos u qoto dheerida badda ilaa iyo salkeeda (sagxadeeda). Farqiga jooga u dhexeeya labada marsin ee isku xiga waxaa la dhahaa **tiigta u dhexaysa labada marsiin**.



### Hawl-galka 2.7

1 Maxay yihiin khariiradaha muuqaaleed?
2 Maxay tahay waxtarka uu ino leeyahay qiyaas cabirka khariirada?

## Isticmaalka ama Adeegsiga Khariiradaha Muuqaaleed



### Hawl-galka 2.8

1 Magaranaysaa magaca magaaladaada?
2 Ma natusi kartaa Itoobiya halka ay kaga taallo khariirada Afrika?
3 Ma taqaanaa Afarta Jaho?

Si aynu u aqoonsano isticmaalka iyo akhriska khariiradaha waxaa lagama maarmaan ah in aynu garano (aqoonsano) Jahada, goobta, qiyaas cabbirka, calaamadaha, midabada iyo masaafadaha.

Waxyaabaha ugu muhiimsan ee lagu xuso khariirad-muuqaaleedka waxaa ka mid ah dhirta (oo loo adeegsado midabka cagaarka), biyaha (buluug), iyo goobaha dhismayaashu ku badanyihiin (casaan).

Midabyada xariiqaha ku yaala khariirada dusheeda waxay tilmaamaan isku mid ahaanta xogta ay gudbinayaan. Midabka xariiqaha marsinada siman ee khariiradaha muuqaaleed waa midabka buniga, halka ay harooyinka, dooxooyinka iyo kanaalada waraabka loo jeexdo midabkoodu yahay buluug; wadooyinka muhiimka ah midabka loo adeegsadona waa casaan, wadooyinka kale ee ay ka midka tahay wadada tareenka, xuduudaha iyo muuqaalada dhaqanka ee kale midabka inta badan loo adeegsado waa madaw.

## Xariiqaha Marsinada Siman ee Khariirada

Xariiqaha marsinada siman waa xariiqaha midabka buniga (maariinka) ah leh ee ku yaala khariiradaha muuqaaleed korkooda. Xariiq kastaa wuxuu u taagan yahay joog isla'eg; waligoodna isma dhaafaan (isma gooyaan) ee dhulka. Xariiqaha marsinada siman waxay si guud inoo tusaan qaabka ka dhacaa ka dagta ah. Waxayna inaga caawiyaan in aan aqoonsano jooga kala duwan ee oogada sare ee dhulka. Marka ay xariiqahan marsinada siman yihiin kuwo isu dhadhaw (isku shiilan) waxay tilmaamayaan dagaan-degyo janjeera. Marka ay aad u kala durugsanyihiina waxay tilmaamayaan dhul siman. Faraqa u dhexeeya labada marsin ee isku xiga waxaa la dhahaa tigta labada marsin u dhexaysa.

Shanta xeer ee guud ee in la xusuusnaado ay tahay kuwaasoo inaga caawinaya barashada xariiqaha marsinada siman ee khariiradaha waxay yihiin:

- *Xariiqaha marsinada simman way isu dha dhaw yihin agagaaraha taagaga, saxamada ama gotaamada.*
- *Xariiqaha marsinada simman isma dhaafaan oo midna midka kale ma gudubto, marka laga reebo laagaha.*
- *Xariiqaha marsinada simman ee ka muuqda labada dhinac ee meel, halkaas oo janjeeradu lid ku yihiin Jihada.*

- *Xariiqaha marsinada simman ee qaabkoodu yahay sida xarafka "V" waa meelaha ay kaliyadu (biyo maree nadu) isku dhaafaan.*
- *Dhamaan xariiqaha marsinada siman way isugu soo dhawaadaan ama ku kala fogaadaan fiidaha (daafaha) khariirada.*

Cabbir qiyaaseed ka khariirada waa saamiga cayiman ee u dhexeeya cabbirka halbeega khariirada iyo fogaanta uu u taagan yahay ee oogada sare dhulka. Tusaala ahaan, hadii qiyaas cabbirka khariirad muujinaysa deegaankeena ismaamulka Soomaalida uu yahay 1 sm : 8 km, waxay macnaheedu tahay halkii Seentimitir ee khariirada dusheeda ah wuxuu u taaganyahay 8 kiilomitir oo oogada dhulka ah. Adigoo ka tixraacaya qiyaas cabbirkan khariirada ayaa waxaad cabbiri kartaa fogaanta u dhexaysa labo goobood ama barood oo kasta oo ku yaala khariirada dusheeda.

## Habka loo cabbiro (xisaabiyo) masaafadaha khariirada korkeeda

Xidhiidhka ka dhexeeya fogaanta laba barood ama goobood oo khariidada korkeeda ku yaala waxay la mid tahay xidhiirka ka dhexeeya fogaanta dhabta ah ee dhanka dhulka uga dhexaysa labada goobood (barood). Qiyaas cabbirka khariiradaha oo inoo qeexa halka seentimitir ee khariirada korkeeda ah inta kiilomitir ee dhulka ah ee uu u taaganyahay ayaa ah mid aan ku ogaankarno fogaanta tooska ah iyo mida leex leexsan ee laba goobood (barood) oo kasta oo ku yaala khariirada korkeeda. Waxaan tusaale ahaan u soo qaadanaynaa oo aan hoos ku adeegsan doonaa khariirad uu qiyaas cabirkeedu yahay 1 sm = 5 km.

## Talaabooyinka la raacayo

**Talaabada 1aad:** Ogsoonow maskaxdana ku hay warbixinta qiyaas-cabbirka khariiradaha korkooda. Warbixinta qiyaas-cabbirku waa mid laga helo (ku taala) badanaaba daafaha ama geeska khariirada. Sidaa darteed, waa ay fududahay in la ogaado fogaanta u dhexaysa laba barood oo ku yaala khariirada korkooda, taas oo aad doonaysid in aad ka shaqayso (cabbirtid) fogaanta u dhaxaysa. Tusaale ahaan, labada barood aan ugu yeedhno A iyo B.

**Talaabada 2aad:** Adeegso mastarad si aad ugu cabirtid fogaanada khariidada ee xariiqa-toosan. Meesha mastarada dusheeda ee eberku ku calaamadsan yahay ku beeg barta "A" darafka kale ee mastarada ee ay ku qoran yihiin cabbiradu ku beeg barta "B" xusuusnow fogaanta u dhaxaysa labada barood. Tusaale ahaan: waxaa laga yaabaa inay A iyo B isu jiraan 3 sm.

**Talaabada 3aad:** U bedel fogaanta sm ka ah fogaan km ah adiga oo adeegsanaya warbixinta qiyaas-cabbirka kariidada. Tusaale ahaan: Haddii ay mastaradaadu ku tusayso 3 sm oo ah barta A ilaa barta B qiyaas cabbirka khariidadaaduna yahay Hal sentimir oo la mid ah shan kiiloo mitir (1 sm : 5 km) xariiqda-toosan ee fogaanta khariidadu waxay la mid noqonaysaa saddex jeer oo min shan kiiloo mitir ah (3 × 5 km) ama 15 km.

**Talaabada 4aad:** U adeegso xariga ama dun-adag si aad ugu cabbirtid fogaanta khariidad ee leex-leexadka ama qal-qaloocda. Xadhiga ama dunta dhamaadkeeda dul dhig barta "B" ee khariidada. Laga bilaabo bartaas, adiga oo xariga ama dunta dul dhigaya ama jiifinaya wadiiqada aad ugu talo gashay inaad marto kadibna calaamadee xariga ama dunta meesha ay wadiiqadu ama wadadu ku dhamaato oo ah barta "B". Toosi xarigii ama duntii kuna cabbir mastaradaadii si aad ugu cabbirtid dhererka inta senti mitir ee laga bilaabo barta "A" ilaa barta "B" ee aad xarigii ama duntii ku calaamadaysay.

**Talaabada 5aad:** U bedel fogaanta sm ka ah fogaan km ah sidii hada ka hor. Tusaale ahaan: Haddii xariga ama duntu ay ahayd 3½ sm oo laga bilaabo barta "B" ilaa barta "T" qiyaas cabbirka khariidadaaduna ay ku tusayso in Halkii sentimitir uu la mid yahay shan kiiloo mitir (1 sm : 5 km) fogaanta leex-leexadka ee khariidadu waxa ay la mid noqonaysaa saddex iyo badh jeer oo min shan kiiloo mitir ah (3 ½ × 5 km) ama 17½ ama 17.5 km.

## 2.1.1 Isticmaalka khariiradaha fudud Ee ku tusaya Jahada Iyo Halka ay meeli ku taalo



### Hawl-galka 2.9

Tartan ciyaareed juqraafiyeed

1 Ka Tilmaan khariidada dusheeda meesha aad ku nooshahay?
2 Kumaa khariirada dusheeda ka caddayn kara Harar iyo Jigjiga?
3 Noo tilmaan kadibna midabee webiga shabeele (meesha uu ka bilaabmo iyo meesha uu ku dhamaado)?

### Khariirad gacmeedka

Waa khariiradaha lagu sawiro gacanta ee uusan cabirkoodu sugneyn ee matala muuqaalada muhimka ah ee meeli leedahay. Khariirad gacmeedyadu waa kuwa sida xorta ah loogu sawiro gacanta ina tusa xog ku filan intaan uga baahnayn oo lagu qanco.

### Ujeedada khariirad gacmeedka

Khariirad gacmeedku wuxuu waxtar wayn u leeyahay marka aysan jirin ama aynaan haysanin khariirado dhab ah oo inugu filan. Khariirad gacmeedyadu waa ay ku kala duwan yihiin dhanka qoto dheerida macluumaadka iyo heerka tayada looga baahnaa.

## 2.1.2 Khariirad Gacmeed Fudud



**Hawl-galka 2.10**

1. Waxaad Sawirtaa khariirad gacmeed muujinaysa dugsigiina iyo agagaarkiisa?
2. Sawir khariirad gacmeedda gurigiina iyo darisyada idiin dhaw?
3. Sawir khariirad gacmeed isku xidhaysa wadada udhaxeysa dugsiga iyo gurigiina.

Hadii aad dooneysid in aad khariirad ku muujisid qeyb ama meel dhulka ka mid ah waa in aad khariiradaada ku muujisaa falaadh tilmaameysa jahada waqooyi, qiyaas cabirka, furaha iyo muuqaalada kale ee ka jiri kara meeshaas, sida:

- *Xadhkaha korontada*
- *Magaalooyin*
- *Wadooyinka*
- *Tuulooyin*
- *Wadooyinka Tareenka*
- *Webiyada*

## 2.2 QAABKA DHULKA, DHAQAAQA IYO SAAMEYNTIISA

***Marka uu dhamaado cashirkan kadib, ardeydu waxay awoodi doonaan inay:***

- qeexaan qaab-dhismeedlla dhulka.
- sharraxaan dhaqaaqa dhulka.
- sheegaan saameynta dhaqaaqa dhulku uu Leeyahay.
- qeexaan sida ay xiliyadu saameynta ugu leeyihiin beer qodashada iyo dhaqashada xoolaha.

## Erayada Furaha u ah Cashirka

- Qaabka dhulka
- dhaqaaq dhulka
- Maalin iyo Habeen



### Hawl-galka 2.11

Koox-koox isu qaybiya oo ka wada hadla qodobadan hoos ku qoran

1. Waa maxay qaabku?
2. Ma tixi kartaa inta qaab ee kala duwan ee aad taqaano?
3. Meerahee ayeynu ku dul noolahay?
4. Sharax sida dhulka qaabkiisu u eg yahay?

Dhulku waa meeraha sadexaad marka laga soo bilaabo dhanka qoraxda, iyo dhanka cufnaantaba waana meeraha shanaad ee ugu weyn.

Meeraha dhulka ee aynu ku dul noolnahay ayaa waxaa loogu yeedhaa Aduunka (caalamka) ama meeraha buluuga ah, Dhulka waxaa ku nool ku dhawaad 6.8 bilyan oo dad ah sida ay qorayso tirakoobtii 12 kii Diisembar 2009 kii. Waxaana La saadaaliyey sanadka 2013 in ay tirada dadku ay gaadhi doonto 7 bilyan, 2050 kana 9.2 bilyan. Koradhka tirada dadka wuxuu aad ugu badan yahay dalalka soo koraya. Waxaa lagu qiyaasaa in sideed meelood hal meel oo oogada saree dhulka ah keliya inay nolosha aadama ha ku haboon tahay, taasooy Afar meeloo dkii saddex ay bad weyn tahay oo uu waliba kala badhaw badh dhulka bariga ah yahay lama dagaan (14%), buura dhaadheer (27%) ama meela kale oo aan nolasha ku habooneyn.

## 2.2.1 Qaabka dhulka

Dhulka qaabkiisu wuxuu aad ugu dhaw yahay sidii wax wareeg yuuban, wareeg ama goobo kala baxsan oo la dhereran u dub-dhexaadka cidhif ilaa cidhif taas oo agagaarka dhul-badhuhu u sii qaro wayn yahay. Qaro waynaantaas oo ka dhalatay wareega dhulku uu udub dhexaadkiisa ku wareego, waxayna keentay in uu dhexroorka dhulbadhuhu uu noqdo 43 km mid ka dheer dhexroorka cidhif ilaa iyo cidhifka kale.



## 2.2.2 Dhaqaaqa Dhulka iyo Saameyntiisa



### Hawl-galka 2.12

Kooxo yaryar isula falan qeeya

1 Qoraxda iyo dhulka mid keebaa socda?

2 wakhti intee La'eg ayey ku qaadataa wareega uu dhulku ku wareego udub-dhexaadkiisa?

Dhulku wuxuu sameeyaa dhaqaaq joogto ah. Qiyaastii 365 tii maalmoodba, dhulku wuxuu dhamaystiraa hal **Wareeg sannadle** oo uu ku wareego cadceeda, iyo qiyaastii 24 kii saacadood oo uu dhamaystiro hal **Wareeg maalinle** oo uu ku wareego udub-dhexaadkiisa. Maxaa yeelay, wareega uu dhulku ku samaynayo udub-dhexaadkiisu ma aha mid xagal qumman ku ah sallaxa dhulka meeriskiisa (majarihiisa) – dhulku wuxuu is janjeedhiyaa qiyaastii 23½° – habka ay falaadhaha cadceedu u soo gaaraan dhulka oogadiisa oo kala duwan halka uu ka socdo meeriska (wadada uu meere maro marka uu ku wareegayo qoraxda). Xiliyada ama isbedelada cimilo xilliyeedka, halkaas oo ay ku kala duwan yihiin goobaha dhaca dhulka dushiisa waxaa ugu wacan isku darka janjeersanka dhulka udub dhexaadkiisa iyo meesha uu kaga jiro meeriskiisa.

***Koox-isla falanqayn***

***Maxay tahay saameynta uu lee yahay dhaqaaqa dhulku?***

Saameynta uu leeyahay dhaqaaqa dhulka waxaa ka mid ah Labadan soo socda.

- *Isbadalka maalinka iyo habeenka*
- *isbadalka xiliyada*




## Hawl-galka 2.13

1 Goorma ayay kala soocmaan maalinta iyo habeenku?

2 Waa maxay sababta aynu u hello maalin iyo habeen?

Jaantuskani wuxuu ina tusayaa meertada 24 ka saac ee maalintii ereyada aynu u adeegsanay waa kuwo sharxaya qaybahooda Dhulku wuu socdaa balse qoraxdu ma socoto, oo dhulku wuxuu sameeyaa wareeg uu 24 kii saacba hal mar uu ku wareeqo udub-dhexaadkiisa.




Waxaa 24 saacdood maalintii loo qaybiyaa dharaar (12saac) iyo habeen (12saac). Dharaartu waa laga bilaabo cadceed soo baxa ilaa cadceed dhaca Habeenkuna cadceed dhaca ilaa cad ceed soo baxa. Maalintu waxay sida ugu saxsan bilaabantaa saqda dhexe.

Wakhti kastoo ka mid ah 24 saac, waxaa jira qayb kamid ah oogada sare ee dhulka oo ku jeeda qoraxda, qaybtaasi waxay ku jirta xili maalin (dharaar ah). Qaybaha dhulkee aan ku siijeedin qoraxdana waxay ku jiraan habeen. Maadaama uu dhulku ku jiro wareeg joogto ah, maalinta iyo habeenkuna waxay ahaanayaan kuwo isbad badala.




## Hawl-galka 2.14

Idinka oo kooxo yaryar ah islafalan qeeya

1 Maxaad qabataa wakhtiga maalinta iyo habeenka?
2 Maxay yihiin dabeecadaha ay leeyihiin maalinka iyo habeenku?
3 Wakhti intee Le'eg ayey ku qaadataa dhulka wareegiisa uu ku wareego udub dhexaadka?

Dharaarta (maalinta) iyo habeenka isdaba jooga ah ee aynu hello waxaa ugu wacan wareega uu dhulku ku wareegayo udub dhexaadkiisa, udubdhexaadkaas oo ah xariiq qiyaseed ka gudba cidhifyada waqooyi iyo koonfur. Dhulku wuxuu sameeyaa wareeg joogta ah oo uu si aayar ah u wareegayo balse ma dareeno wax dhaqdhaqaaq ah, maxaa yeelay, wuxuu u leexdaa si siman oo xawaare isku mid ah.






## Hawl-galka 2.15

1 Maxay qoraxdu marna uga muuqataa cirka marna ayna uga muuqan?
2 Maxaa Loo moodaa qoraxdu inay cirka ka gudbayso?

Dhulku wuxuu u dhaqaaqaa dhanka Bari sidaa darteed qoraxdu waxay u muuqataa inay ka soo baxdo dhanka Bari maxaa yeelay, waxaynu ka fiirinaa dhanka fiican ee muuqaalka dhulka. Wakhti kasta kala badhaw badh qeyb dhulka ah ayaa wajaha cadceeda, qeybtaas waa qeybta ku jirta dharaar. Qaybta kale waxay la kulantaa cadceed la'aan. Waa mugdi waana habeen. Qoraxdu waa isha iftiin ee dharaarta.

Qoraxdu ma socoto. Waxay u muuqataa inay ka gudbayso cirka oo ay socoto subaxdiina ay dhanka Bari ka soo bilaabayso iyada oo u ujeeda dhanka bari ku bee gmaysa kala badhka ama duhurka kadibna dhanka galbeed u jeedsanaysa ilaa ay maalintu ama dharaartu ka dhamaanayso.

Haddii uu udub dhexaadka dhulka uu ahaan lahaa mid qumaati u taagan, lool kasta wuxuu heli lahaa 12 saac oo maalin ah iyo 12 saacoo habeena. Balse udub dhexaadku wuxuu sameeya janjeedh xagashiisu tahay 23½ meelaha uu udub dhexaadkoodu qumaatiga yahay waa isku jiho.

*Sameyn noocma ah ayuu janjeedhsiga dhulka iyo xilliyada isdaba jooga ah (isku xiga) ku leeyihiin dherarka ilayska maalinka (dharaarta) hello.*

Dhul badhaha dushiisa maalinka iyo habeenku way isla egyihiin. Itoobiya iyo mee laha kale ee u dhaw dhulbadhahana habeenka iyo maalinku waxay is dheeryihiin daqiiqado yar sanadka intiisa badan. Dhulalka (meelaha) ku yaala Loolalka sare, maalinta ayaabadan xiliga xagaaga, wayna gaabantahay (yartahay) xiliga Jiilaalka.



## Hawl-galka 2.16

Intuu La'egyahay dheerarka maalinimo ee goobahan soo socda

1 dhul-badhaha bisha maaarso 21 geeda.
2 Addiis Ababa bisha Diseembar 21 geeda.
3 Niyuu Yoorki bisha Juun 21 geeda.
4 Jigjiga bisha Juun 21 geeda.

### 1 *Isbedelka xilliyada*



## Hawl-galka 2.17

1 Waa maxay xilli?
2 Waa kee xilliga aad ka heshaa?
3 Miyaad taqaanaa sababta ay xilliyadu isu bedalaan?
4 Maxay kala yihiin xiliyada ugu muhiimsan dalkeenan Itoobiya?

*Qeexida xilli:*

*Sannadka waxaa lookala qaybiyaa Afar xilli, waxaana lagu asteeyaa isbedelada Jawiga (cimilomaalmeedka), Barashada geyiga iyo saacadaha iftiinka (ilayska) maalinta. Markii uu dhulku ku wareegayo udub-dhexaadkiisa, sidoo kale dhulku wuxuu ku jiraa wareega uu ku samaynayo cadceeda isaga oo maraya wadadiisa loo yaqaan meeris (orbit). Wareega sannadlaha ah ee uu ku wareegayo dhulku cadceeda waxaa ka dhasha xilliyada iyo isjanjeedhinta uu dhulku isu janjeedhinayo udubdhexaadkiisa oo ah mid ku xidhan qorshaha wareeg sannadedka. Udub-dhexaadku waa xariiq qiyaaseedka ka gudba cidhif ilaa cidhif ee uu dhulku ku wareego 24 saacba mar (wareeg maalmeed).*

Xariiqani waxa uu sameeyaa xagal (loo yaqaanaa janjeedh) oo 23.45° ugu toosan meeriska (wadada uu maro dhulku) marka uu ku wareegayo cadceeda. Waxayna ku qaadataa 365 maalmood si uu u dhamaystiro wareega uu dhulku ku wareegayo cadceeda. Is-janjeedhinta udub-dhexaadka iyo wareeg sannadeedka dhulka waxay sababaan kala duwanaanshaha xaddiga kul ee meelaha kala duwan ee dhulka dushiisa ah ay helaan, isla markaana ay ka dhashaan isbedelada xilliyada sannadku.

Dhacdada xilliyada waxaa sababa janjeedhka uu dhulku ku sameeyo udub-dhexaadkiisa oo ay ka dhalato dhererka ilayska maalinta ee kala duwan iyo xagasha tamarta cadceeda ee ay meeli helayso oo kala duwan sannadka oo dhan.

Labada jeer ee sanadkiiba ay cadceedu ka fog tahay Dhul-badhaha:

- ***Xilliga Xagaaga:*** *Waa marka ay cadceedu ka fogaato dhul-badhaha ee ay dul joogto kulaalaha Waqooyi (kaansarka). Tani waxay dhacdaa Bisha Juun 21$^{geeda}$ sidaa darteed, Nus-dhuleedka Waqooyi wuxuu ku jiraa xilli xagaa ah saacadaha ugu badan ee ilayska dharaarnimana hela. Nus-dhuleedka Koonfureed saacadaha ilayska dharaarnimo way gaaban yihiin, cidhifka Koonfureedna wuxuu ku jiraa 24 saacadood oo mugdi ah; waana xilli jiilaal ah.*
- ***Xilliga Jiilaalka:*** *Waa marka ay Cadceedu ka fogaato dhul-badhaha ee ay dul-joogto kulaa laha Koonfureed (Kaabrikoonka). Tani waxay dhacdaa Bisha Diisembar 22$^{deeda}$ sidaa darteed cidhifka Koonfureed waxa uu ku jiraa xilli Xagaa ah, isla wakhtigaas cidhifka Waqooyin wuxuu ku jiraa xilli Jiilaal ah. Meelaha dhaca Koonfurta Anta-aartigada (agagaarka 66½$^{o}$ K) waxay helayaan 24 saacadood oo ilayska dharaarnimo ah.*




## Hawl-galka 2.18

1 Imisa xilli ayuu leeyahay gobolkiinu?

2 Faahfaahi dabeecadaha xilliyada kala duwan ee gobolkiina.


Gobolada kul-dhexaadka iyo cidhif-xigeenada (ku dhow cidhifka) guud ahaan Afar tirsi oo ku salay san xiliyada oo la isku waafaqsan yahay ayaa jira. Waxay kala yihiin Guga, Xagaaga, Deyrta iyo Jiilaalka. Hadii uusan dhulku is janjeedhinaynin marka uu qoraxda ku wareegayo ma uusan jireen isbedalka saacadaha ilayska dharaarnimo iyo isbedalka xilliyada.




Jahada dhulka udub-dhexaadkiisu waxay ku xidhan tahay isbedelada cadceeda ee sannadka oo dhan. Markii cidhifka Waqooyi ee dhulka udub-dhexaadkiisu u jeesto xaga qorraxda, dacalka Waqooyi wuxuu ku jiraa Xaggaa halka dacalka Konfureed uu ku jiro Jiilaal. Inta lagu jiro wakhti sannadeedkan, Waqooyi wuxuu helaa iftiinka Cadceeda oo ka badan oo toos ah markii la barabar dhigo Koonfureed. Qorraxdu waxay u muuqataa si ka sareeya oo siman oo ilayskeeda kuna qaadato si toos ah oo ka badan oo ay ku dhexmaraan gibilka ama atmosfeerka. Tani waxay keentaa in meel tamar cadceedeedka ay heshaa teelteel noqdo ama ay xooganaadaan waana qodobka ugu wada muhiimsan ee keena isbedelka xilliyada.

***Miyey kulatahay fogaanta uu dhulku u jiro cadceeda inay jiraan waxyaalo badan oo maatar ah oo wax ka bedela xilliyada iyo Heerkulka? Sidee bay wax uga bedelaan?***

Xagasha ilays ee soo gaadhaysa oogada sare waxay si wayn u saamaysaa cadadka tamar ee ay oogada sare hesho. Waxaa taas lidkeeda ah oo la wada aaminsan yahay, fogaanta dhulka iyo cadceeda oo kaalin aad u yar ka cayaara isbedelka heer kulaad. Dhulka meeriskiisu waa mid ku dhow goobo, wuxuuna ujiraa qorraxda 150 milyan kiiloomitir (93 milyan mayl). Isbedelka fogaanta u dhaxaysa qoraxda iyo dhulku waa mid aad u yar, oo ficil ahaan aan saamayn ku lahayn xaddiga tamar cadceedeed ee soo gaadhaya ama uu dhulku helo.




Xilliyadu ayada oo aan loo tixgelinayn wakhti maalmeedka (tusaale: Wareega uu dhulku ku wareego udub-dhexaadkiisa) cidhifka Waqooyi wuxuu noqonayaa mid madow cidhifka koonfureedna mid iftiinsan markii uu dhulka udub-dhexaadkiisu isjanjeeriyo xagal dhan 23½°.Tani macnaheedu waa dhulka oo had iyo jeer "Bar go'an" hal dhinac u jeesta markii uu ku wareegayo qoraxda sidaa darteed, mar marka qarkood qorraxdu waxay ku aadan tahay jahada barta go'an ee dhulka, hase yeeshee, wakhtiyada kale ma aha. Waxaa janjeedhsanka dhulka udub-dhexaadkiisa marka uu ku wareegayo qoraxda ka dhasha kala duwanaanshaha cadadka ilayska cadceeda ee sanadka iyo isbedelka xilliyada.

Agagaarka Bisha Juun 21geeda xagaaga nus dhuleedka Waqooyi, uu u janjeersamo dhinaca qorraxda isla markaas oo ay si toos ah u duljoogto kulaalaha kaansarka oo ah loolka 23½°W. Nus-dhuleed kan Waqooyi wuxuu helaa tamar-cadceeded toos ah oo badan. Tani waxa laga wadaa falaaraha qorraxda oo yar noqdana kuwa kala firirsan ka hor inta ayna soo gaadhin dhulka maxaa yeelay, fogaanta aan badnayn ee ay ku soo dhexmarayaan gibilka inkasta oo uu dhulku isjanjeerinayo waxaa jira maalmaha sannadka gudihiisa qaarkood ee loolka lagu siiyay, halkaas oo saamiga kulkani uu yahay ka ugu wada sareeya oo aynu ugu yeedhno xagaa.

Bisha Diisembar nus dhuleedka waqooyigu wuu is janjeeriyaa isaga oo ka fogaanaya qorraxda. Sidaa darteed, wuxuu xilligan ku jiraa Jiilaal aad u qabow.

Bisha Diisamber 21$^{geeda}$ meelaha gudaha ah ee wareega Anta-aartikadu waxay heshaa falaaraha qorraxda 24 saacadood. Inkasta oo Nus-dhuleedka Koonfureed, bisha, Diisembar uu u yahay badhtamaha xilliga Xagaaga. Bisha Diisembar 21$^{geeda}$ waa jiilaalka nus-dhuleedka Waqooyi qorraxduna waxay si toos ah u dul taagan tahay kulaalaha kaabrikoorniga oo ah loolka 23.5$^{0}$K. Nus-dhuleedka Koonfureed wuxuu helaa falaaraha cadceeda oo toos ah kala firirsanaanta yar ee cadceeda falaaraheeda iyo xagasha sare ee qorraxda ayaa sameeya maalmaha dhaadheer. Nus-dhuleedka Waqooyi ka fogaanshaha uu qorraxda ka cidhifeeyo ayaa u keenta maalmaha gaagaaban iyo xagasha hoose ee qorraxda. Badhtamaha dayrta iyo badhtamaha guga waxay leeyihiin laba tirsi taariikheed oo kala ah Sebtembar 21$^{geeda}$ iyo Maarso 21$^{geeda}$ Markaas oo maalinta iyo habeenku ay isla'eg yihiin dunida oo dhan. Marka uu dhulku ku wareegayo qorraxda, isla markaasna ay qorraxdu si toos ah u dul taagan tahay dhul-badhaha, waxaa xilligaas lagu magacaabaa caanamaalo Isla'eg ("Equinox") sidaa darteed, caanamaalo isla'ega gugu waa Maarso 21$^{geeda}$ halka caanamaalo is la'ega dayrta ay tahay Sebtembar.

Waxaa jira farqi wayn oo u dhexeeya xagaaga iyo jiilaalka agagaaraha cidhifyada. Meelaha u dhaw dhul-badhuha waxaa ka jira isbedelo aad u yar, maxaayeelay dhererka maalinta iyo habeenka oo aan lahayn isbedel badan. Loolasha lala xiriiriyo dhulbadhuha malaha isbedelka xilliyada heer kulka, mana laha xagaa, Dayr, Jiilaal iyo Gu'toona. Dalkeenan Itoobiya wuxuu aad ugu dhaw yahay dhul-badhaha oo bartiisa ugu Waqooyiyaysa ay 15$^{0}$ u jirto dhulbadhaha. Cadceed soo baxa iyo cadceed dhacuna had iyo jeer waa isku mid.

Haddaba guud ahaan markii aad dhul badhaha ka fogaatid waxaad u gelaysa xagaa iyo jilaal heer kulkoodu ka qabow yihiin. Agagaaraha dhulbadhuhu malaha wax xili ah maxaa yeelay maalin walba qorraxda falaaraheedu waa xagal isku mid ah. Maalin kasta oo ka mid ah maalmaha sannadku waxay heshaa qiyaas 12 saacadood oo ilays ah. Cidhifyadu waa kuwo qabow maxaa yeelay ebidkood isuma janjeeriyaan dhinaca qoraxda. In badan oo ilays ah oo ku kala firirtay gibilka inta aanay soo gaadhin oogada sare ee cidhifyada dhulka ayaa jira. Markii uu cidhif is janjeeriyo wuxuu ka fogaadaa qorraxda, ilays maalmeedka oo dhana ma helo. Qorraxduna uma soo baxdo! Si kasta ha ahaatee, xilliga xagaagii ayuu cidhifka waqooyi ama koonfureed helaa ilays wakhtiga oo dhan ah habeen kuna kama jiro halkaas.



## Hawl-galka 2.19

Sidee bay dhulka isjanjeedhintiisu saameyn ugu yeelatay isbedelka xilliyada, iyo waxa sababa xaglaha xilliyadan kala duwan?

## Xilliyada Itoobiya

- ***Xilligee baad ugu jeceshahay? Sabab?***
- ***Tax ama qor xilliyada ugu muhiimsan Itoobiya iyo baahsanaantooda sannadka?***
- ***Ma saamayn bay ku leedahay xilliyada halka ay dhacdo Itoobiya?***
- ***Ku muuji khariirad qaybta kulul qalalan iyo kuwa qoyan/qabow ee Itoobiya?***

Dhamaan dunida oo dhami waxay dhacaan loolasha ka durugsan. Waxaana ugu waa wayn afarta xilli ee kala ah Xagaa, Dayr, Jiilaal iyo Gu'ga.

Afartaan xilli waxaa lagu sharxaa dhererka maalinta iyo heer kulka kala duwan ee wakhtiyada sannadkii. Xagaagu waa marka uu ugu wada kulul yahay ee ay maalintuna (dharaarnimaduna) ugu dheer tahay. Dayrtuna waa marka ay maalmuhu (dharaaruhu) noqonayaan kuwo ka gaagaaban oo uu heer kulkuna hoos u dhacayo. Jiilaalkuna waa markii ay dharaarnimadu ugu wada gaaban yihiin heer kul kuna ugu wada hooseeyo. Gu'guna waa marka ay dharaarnimad u ay noqonayaan kuwo ka dhaadheer oo heerkulkooduna soo kacayo.

Dalkeenan Itoobiya gaar ahaan dhulka joogga sareleh waxaa ugu muhiim san xilliyada kala ah Kiremti (oo ah xilli qabow/qoyan) iyo Bega (oo ah xilli kulu/qalalan).

Dalkeenan Itoobiya wuxuu dhacaa gobolka kulaalayaasha ee inta u dhaxaysa. Dhul-badhaha iyo Kulaalaha Waqooyi ee Kaansarka. waxaa cimilada Itoobiya iyadoo loo eegayo jooga kala saraynta loo qaybiyaa saddex cimilo goboleed oo kala duwan; waxayna kala yihiin: Qoolaa (gobol ka kulaalaha), Wayna Dhagaa (gobolka kulaale-xigeenka) iyo Dhagaa (gobol qabow).



## Hawl-galka 2.20

1 Ma waxaad ku nooshihiin meel cimiladeedu waafaqsan tahay ama la mid tahay cimilo gobaleedyada Qoollaa, Wayna dhagaa iyo Dhagaa?

2 Waa maxay dabeecadaha ugu muhiimsan (waa wayn) ee ay leeyihiin cimilo gobol eedyadani?

Cimilada Itoobiya waa mid kala duwan markii loo eego kala duwaanaashaha gobolada kala sarayn ahaaneed. Badhtamaha dulaha kacsan ee leh cimilada dhex dhexaadka ah waxay leeyihiin waxoogaa yar oo kala duwanaansho xilliyeed ah. Itoobiya waxay leedahay heer kul la odhan karo “sannadka oo dhan” tusaale Addis Ababa waxay leedahay heer kul celceliskiisu yahay 20°C kala duwanaanshaha heer-kulka meelaha jooga hoose leh waxay aad uga wayn yihiin kulka ka jira meelaha xeebaha badda cas iyo lama degaanka ee aadka u daran, ee leh heerkulka sare ee mar-mar dhici kara 60°C (140°F). In kastoo gobollada buuralayda ah badankoodu ay helaan wax ka yar roobabkoodii inta u dhaxaysa billaha maarso iyo sebtembar, maalmaha badankoodu ilaa hada waa iska cadceed uun. Meelaha Jooga sare ee dhinaca waqooyi iyo bari ee Itoobiya waxay xataa helaan in ka badan qorraxdii lahayd roobabka waa wayn ee da’a oo keliya bilaha luu liyo iyo Agoosto. Roobabka ugu culusi waxay da’aan oo hela waddanka intiisa badan bilaha juun, Luuliyo (Dulaha aadka u sareeya sidoo kale waa kuwa labaad ee ugu roobka badan in kastoo ay yihiin kul dhexaad waxayna rooban yihiin bilaha Diisambar iyo Febraayo. Gobalada ku yaala koonfurta Galbeed ee Itoobiya ayaa hela roob ugu badan.

Cimilada dalka Itoobiya waa mid si aad ah u kala duwan. Gobolka Soomaalida iyo dhulka hoose ee Danaakil ee Gobolka canfarta waxay leeyihiin cimilo kulul oo qalalan oo samaysa xaalado lama degaan xigeen ah; meelaha webiyadu ay maraan ee dalkeena ee ka sii hooseeya ee soobaat waa kulayl, dhul-dhoshoq iyo Duumo badan (kaneecaysan) haakiin qaybta ugu way nee dalkeena. Itoobiya siiba dhulka jooga sare leh ee Oromada cimiladu waa mid aad u sixo fiican (caafimaadsan) oo kuldhexaad ah.

Intaas waxaa u dheer kala duwanaanshaha cimilada ee ku xidhan jooga kala saraynta, sannadka waxaa loo qaybiyaa saddex xilli. Waxaa jira saddex xilli oo uu iska leeyahay dalkeenan Itoobiya laga bilaabo bisha sebteembar ilaa febraayo waa xilli dheer oo qalalan loona yaqaano Bega (Jiilaal). Waxaa soo raaca isla xilligan roobab yaryar oo aan sidaas u badnayn xilliga Dayrta (Belg) oo ah bilaha Maarso, Abriil iyo Meey. Bilaha kulul ee qalalan bisha la saadaalin karo waa xilli roobaadka dheer ee xagaaga (Kiramti) oo ah bilaha Juun, Julaay iyo Agoosto Maxaa Yeelay Itoobiya waxay dhacdaa loolasha kulaa layaasha, gooboheeda jooga hoose ee muta xaaladaha noocyo cimileedka Kulaalaha safaanaha ama lama degaanka. Hase yeeshee, Jooga ayaa ahmiyad wayn ka cayaara kaalin heerkul dhex dhexaad nimo sidaa darteed, dhulka jooga sare leh waxay mutaan Jawiga ee nooca gobolada kul-dhexaadka ah.



### Hawl-galka 2.21

Waa maxay dabeecadaha ugu waa wayn ee xagaaga ama kiramta (maher) Guga (Tsiday) Jilaalka (Bega) iyo Dayrta (Belga)?

## 2.3 SAAMAYNTA AY XILLIYADU KU LEEYIHIIN BEERO FALASHADA IYO XOOLO DHAQASHADA

***Marka uu casharkani dhamaado kadib ardaygu wuxuu awoodi doonaa inay***

- Sharaxaan saamaynta ay xilliyadu ku leeyihiin beero-falashada iyo xoolo dhaqashada.
- Aqoonsadaan faraqa u dhexeeya beeralayda iyo xoolo dhaqatada.

### Erayada Furaha u ah Cashirka

- Xilliyada
- Beeraha
- Beeralay
- Xoolo dhaqato



### Hawl-galka 2.22

1 Ma taqaanaa waxa ay beeralayda iyo xoolo dhaqatadu ku intifaacsadaan nolosha?

2 Waa maxay faraqa u dhexeeya beeralayda iyo xoolo dhaqatada?

Xilliyadu waxay leeyihiin saamayn buuxda oo ay noolasheena ku keenaan. Waxay saameeyaan hawlaha aynu qabanayno, cunada aynu u hilowno (buseelno) Dharka aynu xidhano, iyo ilaa xad farxad iyo naxdin mida aan ku jirno. Xilliyadu si rasmi ah ayay marba marka kale isu bedelaan, Nus-dhuleedka Waqooyi marka uu ku jiro bilowga xagaaga nus-dhuleedka koonfureed waxaa u bilaabmaya jiilaal. Isbeedeladaan xilliyeed waa kuwo raacsan isbedelada hawada, heer kulka, cadaa-diska, dabaylaha iyo isbedelada cadadka qoyaan ee ku jira hawada.

Beera laydu waxay u baahan yihiin roob si ay ugu beertaan dalagyada ugana helaan biyo. Isbedelada cimilo maalmeed (Jawiga) ee sannad ilaa sannad badanaaba waxay keeneen isbedelo waa wayn oo xaga roobka ah. Wadarta xaddiga roob ee

da'a sannad wuu ka duwanaan karaa sannadka kale. Markii dalagyadu xaddigii biyo ee ay u baahnaayeen xilligii uu noqdo mid aad u qalalan waxay u keentaa miro goosasho aad u yar lagana yaabo inay ka dhalato gaajo ba'an. Beeralayda filaysa inuu roob u da'ayo waxay qodan karaan dhul beereedyadooda kuna daadin karaan (shiniyayn karaan) dalagyadooda.



## Hawl-galka 2.23

1 Waa maxay sababta ay waaxda dhaqaale ee itoobiya ahmiyadda wayn ugu noqdeen beerahu?

2 Maxay Itoobiya dibada u dhoofisaa?

Beeraha inay sii ahaadaan ilaa xad waaxda dhaqaale ee Itoobiya ugu ahmiyada wayn waxa ugu wacan sababahan soo socda:

- *Waxay sitoosah u caawiyaan 85% oo ka mid ah tirada dadka oo la odhan karo shaqaalay siin iyo hab-nololeed;*
- *Waxay dalka soo geliyaan 50% oo kamid noqota wax soosaarka guud ee dalka gudihiisn ka soo baxa ee afka qalaad lagu yidhaahdo (Gross Domestic product) ee loo soo gaabiyo (GDP);*
- *Wuxuu dhaliyaa 88% oo ah waxyaabaha dibada loo dhoofiyo ee lacagta adag ina soo geliya;*
- *Waxay soo saaraan 73% oo ka mid ah alaabta cayriin ee ay warshaduhu u baahan yihiin oo ah waxayaabaha kasoo baxa beeraha;*
- *Sidoo kale waa isha ugu muhiimsan ee cunnada dadka, sidaa awgeed waa waaxda keenta ee ugu wayn damaanada cunada.*

Xataa hadii ay cimilo maalmeedu ku xumaato beeralayda, xoolo dhaqatada iyo dadwaynaha degan magaalooyinkuba waxaa soo food saaraya cuno yaraan. Qiyaasta ugu yar beeralaydu waa kuwa ku xiran biyaha roobka oo si aad ugu tiirsan xaalada cimilada.

Mid ka mid ah sababaha ugu waa weyn ee keena waxsoo saarka aadka u hooseeya ee beera falatada iyo xoolo dhaqatada waa abaarta, taasoo badanaaba dhalisa gaajo iyo fatahaado. Beeralayda Itoobiya ee roob-quutayaasha ahi waa kuwa sida wayn ugu tiirsan roobka.

Dalkeena Itoobiya waxaa ku dhaqan 75 milyan oo xoolaha la dhaqda ah, waana dalka Afrika ugu horeeya ee ay ugu badan yihiin xoolaha la dhaqdo. Xoola dhaqatada intooda badan waa kuwo guur guura oo xilliba meesha cawska iyo biyaha ay ka heli karaan u guura.

Hadaba, si uu wax soosaarkoodu u noqdo mid sareeya waxaa lagama maarmaan ah in ay helaan biyo iyo baad ku filan. Biyaha iyo cawskuna (baadkuna) waxay ku xidhan yihiin kolba siday cimiladu tahay. Dhulka daaqsinta iyo biyahuba waxay u baahan yihiin in si qorshaysan loo isticmaalo haddii kale waxay dhamaani iyada oo aan lagaadhin xilli roobeedkii kale ama xigay.

Waxaa kale oo uu dalkeenu dhoofiyaa wax soosaarka beeraha. Marka ay wax soosaarkan saameyso cimilo xumo wuxuu si aad ah hoos u dhac ugu imanayaa wax soosaarkii cuno iyo dakhligii inaga soo galayey waxsoosaarka beeraha ee la dhoofiyo. Tusaale ahaan, saamaha iyo hargaha xoolaha oo ah waxsoosaarka labaad ee ugu muhiimsan ee ay dhoofiso Itoobiya ayaa ah mid ay aad u saameyso cimilaxumadu oo hoos udhac weyn ku keenta.



### Hawl-galka 2.24

Islafalanqeeya saameynta ay xilliyadu ku leeyihiin beera qodatada iyo xoola dhaqatada.

## SOOKOOBID

Cutubkan waxaad kusoobarateen qaabka, dhaqaaqa dhulka iyo saameyntiisa. Waxaad si qoto dheer u barateen:

- qaabka dhulka
- dhaqaaqa dhulke iyo saameyntiise
- maalinka iyo habeenka
- isbadalka xilliyade iyo saameynta ay ku leeyihiin beerashada iyo dhaqashada xoo lahe.

## LAYLISKA GUUD EE CUTUBKA 2

**I** ***Run ama Been uga Jawaab***

1 Habka ugu wada caansan ee lagu heli karo halka ay deris ahaan meeli dhacdo waa adeegsiga xariiqo qiyaaseed lagu calaamadaynayo meesha dhulka oo gadiisa sare ku dultaalla.

2 Xariiqo qiyaaseedka barbarada la ah dhul badhaha waxaa loo yaqaanaa lool ama barbaro.

3 Dhig dhexada marta Griinwij waxay ku taalaa dhigta 0°.

4 Xariiqaha marsinada siman ee ku yaala khariiradaha dushooda waxay isku xidhaan meelaha joogoodu isla'egyahay.

5 Jahada udub-dhexaadka dhulku waxay ku xidhan tahay isbadalalada qoraxda ee sanadka oo dhan.

## II *Buuxi meelaha banaan*

1 Saameynta ugu weyn ee dhaqaaqa dhulka waxaa ka mid ah ________ iyo ________.

2 Itoobiya waxay ku taalaa nus-dhuleedka ________.

3 ________ Waa marka ay qoraxduu fogaato dhinaca waqooyi ee ay ka tagto badhaha Juun 21geeda.

4 ________ waa marka ay qoraxdu u fogaato dhinaca koonfureed ee ay ka tagto badhaha Diisambar 22geeda.

5 Tax ama qor saddexda xilli ee ugu waa wayn Itoobiya?

# CUTUBKA 3
# DEEGAANKEENA



## Ujeedooyinka Guud ee Cutubka

***Mrkuu cutubku dhamaado, ardeydu waxay awoodi doonaan in ay:***

- aqoonsadaan noocyada waa weyn ee dhirta dabiiciga ah ee Itoobiya iyo Geeska Afrika.
- Aqoonsadaa noocyada waaweyn ee xayawaanada duurjoogta ah ee Itoobiya iyo Geeska Afrika.
- kala soocaan xayawaanada caadiga ah iyo xayawaanada duurjooga ah.
- inay cadeeyaan waxtarka dhirta dabiiciga iyo xayawaanada duurjooga ah ee Itoobiya iyo Geeska Afrika
- Inay sharxaan sababta ay muhiimka u noqotay iLaalinta dhirta iyo xayawaanada.
- inay baadhaan saameynta ay ku leeyihiin dhaqso ukorodhka tirada dadku dhirta dabiiciga ah iyo xayawaanada duurjooga ah nolasha dadka.

## Tusmooyinka Muhiimka ah


**3.1** NOOCYADA WAA WEYN IYO KUWA WAXTARKA LEH EE DHIRTA DABIICIGA AH IYO XAYAWAANADA DUUR JOOGTA AH.

**3.2** WAXTARKA DHIRTA DABIICIGA AH IYO XAYAWAANADA DUUR JOOGTA AH.

**3.3** SAAMEYNTA AY DHAKHSA U KORADHKA TIRADA DADKU KU LEEDAHAY DHIRTA DABIICIGA AH IYO XAYAWAANADA DUUR-JOOGTA AH.

**3.4** DHAWRIDDA DHIRTA DABIICIGA AH IYO XAYAWAANADA DUUR JOOGTA AH.

- *Sookobidda cutubka*
- *Su'aalo kakooban cutubka dhamaantii*

# HORDHAC

Waxaad Cutubkii hore ku soo barateen dhulka iyo waxa ku xeeran. Waxyaabahii ugu Muhiimsanaa ee aad ku soo dhigtaan waxaa ka mid ahaa qaabka iyo dhaqaaqa dhulka iyo saameynta uu leeyahay dhaqaaqa dhulku.

Cutubkan waxaad ku baran doontaan deegaankeena, Geeske Afrika. Waxuu cutubku si qaar ah ahmiyada u siinayaa oo aad ku dhigan doontaan noocyada waa weyn ee dhirta dabiiciga iyo xayawaanada duur joogta ah iyo waxtar kooda. Waxaa intaa dheer, Saameynta uu dhakhsa u koradhka tirade dadka ku leeya hay dhirta dabiiciga ah iyo xayawaanada duur joogta ah.

## Erayada Furaha u ah cashirka

- Duur joogta
- Baadka dabiiciga ah ee dagaan gaar ah
- Kaymaha
- xayawaanka duurjoogta ah
- dhul cowseed
- dhirta ka baxda daafaha wabiyada
- dhulka jooga sare leh
- cimilada
- dhirta lamadagaanka
- Geed-abaareed
- Xayawaanada geedo fuul

# 3.1 NOOCYADA WAA WEYN IYO KUWA WAXTARKA LEH EE DHIRTA DABIICIGA A H IYO XAYAWAANADA DUUR JOOGTA AH

***Marka uu dhamaado cashirkan kadib, ardaydu waxay a woodi doonaan in ay:***

- qeexaan macnaha dhirta dabiiciga ah.
- aqoonsadaan soonayaasha (aagaga) noocyada waa weyn ee dhirta dabii ciga ee Geeska Afrika.
- kala soocaan waxyaabaha ugu waa weyn ee ay ku kala duwan yihiin soonaya asha dhirta dabiiciga ah.
- aqoonsadaan xayawaanka duurjoogta ee waaweyn ee gobolka.

## 3.1.1 Qeexid



### Hawl-galka 3.1

Waxaad isla-falanqeysaan Su'aalahan soo socda

1 Waa maxay dhirta dabiiciga ah?
2 Maxay yihiin xaaladaha saameynta ku leh nooca dhir ee ka baxda goob.
3 Waxaad labada su'aalood ee kore islafalanqeysaan saaxiibada, kadibna waxaad warbixin kooban oo ku saabsan su'aalahaas u soo jeedisaa ardayda kale ee fasalkaaga.

***Waa maxay dhirta dabiiciga ah?***

Weedha dhirta dabiiciga ah waxay ka dhigan tahay nooc kasta oo dhir ah oo si dabiici ah uga baxada goob ama meel dhulka ka mid ah. Dhirtan waa mid ku baxda xaaladaha caadiga ah ee deegaan iyadoo aadamuhu uuna wax faragalin ah.

Ku laheyn Xaaladaha Muuqaaleed ama juqruaafiyeed ee ay meeli leedahay sida cimilada iyo qaab sameyska oogada dhulka ayaa saameeya nooca dhirta dabiiciga ah ee ka baxda deegaan. Geeska Afrika wuxuu dabeecad ahaan leeyahay cimilo iyo qaab sameys dhuleed (oogada sare) oo kala duwan. Sidaa daraadeed deegaanku wuxuu leeyahay noocyo kala duwan oo dhir dabiici ah.



### Hawl-galka 3.2

1 Adiga oo adeegsanaya ama ka tixraacaya khariirad muujinaysa cimilada iyo dhirta dabiiciga ah ee Geeska afrika, isku day in aad kala aqoonsato noocyada waa weyn ee dhirta dabiiciga ah ee ka baxda meelaha cimilooyinka kala duwan ee Geeska Afrika.
2 Tax qeyb kamid ah dabeecadaha ugu waa weyn ee dhirta dabiiciga ah ee Geeska Afrika.

## 3.1.2 Noocyada waa weyn ee dhirta dabiiciga ah ee Geeska Afrika

Gobalka Geeska Afrika wuxuu ka kooban yahay Afarta waddan ee kala ah Itoobiya, Eritariya, Jabuuti iyo Soomaaliya. Sida laga yaabo in aad ogsoontihiin, cimilada wadamadan Geeska Afrika waa mid kala duwan oo u dhexayso lamadagaan iyo lamadagaan xigaan ilaa iyo nooca cimilo ee dhulka jooga sare leh Albayn ee loo-yaqaano nooca Albaynka (Alpine type).

Si kastaba ha ahaatee, waxaa saameyn weyn ku leh nooca iyo asalka dhirta dabiiciga xaalada cimilo (heer kulka iyo roob da'a) oo ah mida ugu weyn ee sababta farqiga kala duwanaansho ee dhirta dabiiciga ah.

Kala duwanida qaab sameyska oogada sare ee dhulka iyo cimilada Geeska Afrika ayaa sababtay in uu gobalku lahaado noocyo kala duwan oo dhir dabiici ah. Noocyada waa weyn ee dhirta dabiiciga ah ee Geeska Afrika kuwa ugu muhiisan waxaa ka mid ah:

- Dhirta Lama dagaanka iyo Lama dagaan xigeenka
- Dhul cawseedka kulaalaha
- Keymaha
- Dhirta Albaynta (dhirta kabaxda dhulka jooga sare leh).

## 1 *Dhirta lamadagaanka iyo Lamadagaan xigeenka*

Waxaa cimiladan lama daqaanka iyo lama dagaan xigeenka laga helaa meelaha dhulka jooga hoose leh ee Geeska Afrika. Meelaha lamadaqaanka iyo lama dagaan xigeenka ah ee Geeska Afrika waxay dabeecad ahaan u leeyihiin heer-kul aad u sareeya iyo roob da'a aad u hooseeya. Waxay xaalada cimilo ee noocan ah ka jirtaa dhulka jooga hoose leh ee Eritariya, Itoobiya, Jabuuti iyo Soomaaliya. Xaaladahaas cimilo ee aan soo sheegnay waxay saameyn ku leeyihiin asalka dhirta dabiiciga ah ee gobalka.



### Hawl-galka 3.3

1 Dhir noocee ah ayay kula tahay in ay kabaxdo meelaha lamadagaanka ama lamadagaan xigeenka ah ee Geeska Afrika? Waayo?

2 Waxaad sheegtaa qaar ka mid ah waxyaabaha ama siyaabaha u suuragaliyay dhirta noocan ah in laqabsato cimilada lamadagaanka iyo lamadagaan xigeenka?

Waxaa dhulka jooga hoose ee Geeska Afrika kabaxa dhir iskadifaacda una adkaysi badan abaarta (oomanaha) oo loo yaqaano dhir-abaareed (heerofaytis). Dhir-abaareeda (heerofaytis) waa dhir ku noolaan karta xaaladaha cimilo ee aadka abaarta iyo oomanaha (roob La'aanta) u ah. Dhirta noocan ah waxaa laga helaa meela badan oo joogooda dhulka uu hooseeyo oo ku yaala wadamada Geeska Afrika. Tusaale Itoobiya, dhirta noocan ah waxay ka baxdaa meelaha uu jooga

dhulku ka hooseeyo 500 mitir inta ka saraysa heerka badda. Waxaa gaar ahaan dhirta noocan ah laga helaa deegaanka Canfarta iyo deegaankeena Soomaalida.

Sido kale, meelaha dhulka jooga hoose leh ee Eratariya, Soomaaliya iyo Jabuuti ayaa laga helaa dhirta noocan ah. Noocyada geedaha ee ku badan dhirtan waxaa ka mid ah: tiinka, caws abaareedka, iyo dhirta keymaha yar yar ee jiqda ah, qudhaca, iyo dhirta qodaxleyda ah.




**Jaantuska 3.1: Dhirta geed abaareedka**

Waxaa jira habab kala duwan oo dhirta lama dagaanka (dhir abaareeda) u suuragaliya in ay lahaato difaac iyo adkaysi ay kula qabsato xaalada cimilo ee oomanaha (qalaylka) ah. Waxaana hababkaas ka mid ah kuwan soo socda. Waxay leeyihiin:

- *Caleemo xajista ama keydsan kara biyaha muddo dheer.*
- *Caleemo yar yar oo qodax leh oo ayna cuni Karin xayawaanka caws iyo biyo kunoolka ah.*
- *Xidido dhaadheer si ay u gaadhaan biyaha dhulka ku hoos jira.*
- *Caleemo ilayska cadceeda dib isaga celiya, oo heer kulkooda qabaw in uu ahaado ku dhawra.*
- *Caleemo aan badnayn oo tira yar si ayna biyo badan neefsi ugaga bixin.*

## 2 Dhul cawseedka kulaalaha

Waa meelaha Geeska Afrika ka mid ka ah ee ay xaaladooda cimilo ka wanaagsantahay mida meelaha lama degaanka iyo lama dagaan xigeenka ah. Waxay meelahani leeyihiin dhul aad u balaadhan oo uu cawska kulaalaha kabaxo. Dhul-cawseedyada kulaalaha Afrika waxaa loo yaqaanaa safaanaa. Dhul cawseedyada safaanaha waxaa laga helaa meela badan oo ayna cimiladu suuragalinaynin (ka caawinaynin) in ay keymo ka baxaan. Meelaha caynkan ah waxaa dhirta kaga badan cawska oo ah mid dhaadheer oo isku cufan (aad isugu shiilan ama isugu dhadhaw) waxaa intaas dheer, iyadooy cimilada ku xidhantahay ayaa waxaa laga heli karaa (ka bixi kara) geedaha qaarkood sida Qudhaca oo kale. Waxaa dhul cawseedka kulaalaha ku nool xayawaano kala duwan oo ay ka mid yihiin kuwan hoos ku sawiran.




**Jaantuska 3.2: Qaar ka mid ah duur-joogta ku nool dhul-cawseedka kulaalaha**

## 3 *Keymaha*

Keynta/keymuhu waa dhulka ay geeduhu ku badan yihiin. Geeduhu waxay kabaxaan meelaha roobka badan ee heerkulkuna yahay mid haboon (wanaagsan). Meelaha noocan ah waxaa laga helaa dhulka jooga sare ee Geeska Afrika ee leh cimilada rooboon ee diirran.

Waxaa dhulka jooga sare ee Geeska Afrika kuyaala keymo kala duwan. Waxaan tusaale ugu soo qaadan karnaa dhulka jooga sare leh ee koonfurta Galbeed ee Itoobiya ee ah dhulka ugu roobka badan (rooboon) Itoobiya ayaa waxaa kuyaala keymaha kulaalaha oo aad u cufan (isugu dhadhaw). Waxaa keymahan ku badan geedaha kulaalaha sida wansa, karero, diqur injat (geed madoobaha), koosoo iyo kuwo kale oo lamid ah.




### Hawl-galka 3.4

1 Maxay yihiin noocyada geedaha ku badan agagaarkiina? Sheeg (tax) magacyadooda?

2 Saddex qeybood isu qeybiya kana dooda dabeecadaha waa weyn ee keymaha kulaalaha, kadibna u soo jeediya ardada fasalkiina warbixinta aad koox ahaan u soo diyaariseen.

Itoobiya waxaa kuyaala keymo kala duwan, kuwaas oo ay kuwa ugu waa weyn ka mid yihiin:

B ***Keymalayda rooban ee kulaalaha:*** keymahani waxay ku yaalaan meelaha Xaalada cimilo ee noocaas ah, waxaana laga helaa dhulka uu joogiisu u dhexeeyo 1500 m ilaa iyo 1800 m inta kasareyasa heerka badda. Keymaha noocan ah waxay kuyaalaan Koonfurta Galbeed ee Itoobiya, gaar ahaan gobolada Kafaa, Ellibaabuur iyo Wallaga. Geedaha aadka ugu badan kaymahan waxaa ka mid ah "Kararo", "Wayraa", Tiqur injat (geed-madoobe) iyo waansa.



Jaantuska 3.3: Keynta kulaalaha

Keymaha kuyaala dhulka jooga sare ee kulaalaha dabeecadahooda waxaa ka mid ah kuwan hoos ku qoran:

- *Waa kuwo waligoodba cagaaran, waa ay cagaaran yihiin sannadka oo dhan.*
- *Geeduhu waa kuwo aad iyo aad u dhaa dheer tartanna ugu jira falaaraha qoraxda (ilayska cadceeda)*
- *Waa geedo xidido buur buuran oo gas ama duf badan leh.*
- *Intooda badan waa geedo dhuux ama gun adag oo ay aad u adag tahay in la qaabeeyo, laakiin aad muhiim ah oo laga samaynayo alaabta guryaha iyo xafiisyada sida Kuraasta, miisaska, kabadho, i.w.m.*
- *Waa madow (mugdi) gudahoodu.*

T **Keymaha Boodho-Kaarbaska:** Kaymahan waxay ku yaalaan meelaha heer kulka qabaw ee cimilada kul-dhexaadka ah leh. Meelaha uu jooga dhulku ka sareeyo 1500 m inta ka saraysa heerka badda ee kuyaala dalkeena Itoobiya ayaa cimilada noocan ah leh. Gaar ahaan waxay kaymahan kuyaalaan dhulka buuraleyda ah ee Arsi iyo Baale, Wallaga iyo Harar. Kaymahan waxaa kubadan geedaha loo yaqaano sigbaa (zigba).

J **Kaymaha Juniberka:** Kaymahan waxay si wanaagsan uga baxaan meelaha uu jooga dhulku ka sareeyo 2000 m heerka badda ee leh cimilada kul-dhexaadka. Waxay kaymahan kuyaalaan qayba kamid ah dhulka jooga sare ee koonfurta Bari, taagaga shawa, iyo dhulka buuralayda ah ee Waqooyiga iyo Badhtamaha ee Itoobiya. Geedaha ku badan kaymahan waa geedaha Junibar ("Tidh").



Jaantuska 3.4: geedaha la yidhaahdo "Tidh"

### X *Keymaha dhulka jooga hoose:*

Waa kaymaha kabaxa dhulka jooga hoose ee leh rays ku filan oo kacaawiya bixitaanka keymaha. Waxaa jira labo nooc oo kaymaha kabaxa dhulka jooga hoose ee Itoobiya ah. Waxayna kala yihiin kaymaha ka baxa hareeraha ama jiinka wabiyada ("Gallery or Riverine") iyo kaymaha gaagaaban ee isku cufan. Keymaha kuyaala hareeraha wabiyada waa keymo aalaa garab qaada wabiyada waa weyn. Waxay Wabiyada hareerahooda ka helaan qoyaan ku filan oo ka caawiya bixitaan kooda.

Noocyada geedaha ugu caansan ee ka baxa waxaa ka mid ah geedka loo yaqaano Bardaha ("shola"). Waxaan tusaale wanaagsan ugu soo qaadan karnaa kaymaha ka baxa daafaha wabiyada Awaash, Wabi-shabeele iyo Ganaale. Geedaha ka baxa dhulka deegaanka Soomaalida, Itoobiya ee ay wabiyadu maraan waxaa ka mid ah bardaha, kabxanta, cadeyga iyo kuwo kaleba.

Dhanka kale, kaymaha gaagaaban ee dhulka jooga hoose waa kuwo cufan oo ka kooban geedaha qori cadka ah ee lashito iyo ooda wada qodaxda ah. Waxay ka jiraan kaymaha noocan ah gobalka dooxada Rift dhankiisa Sare, dhulka jooga hoose leh ee dhinaca Galbeed iyo dhulka jooga hoose ee Bariga Itoobiya. Dhulka jooga hoose ee Galbeedka Itoobiya waxaa can ku ah kaymaha loo yaqaano Baamboo, halka ay kaymaha qudhaclayda ("Acacia") ah ay caanka ku yihiin dhulka jooga hoose ee koonfur Bari Itoobiya.



Jaantuska 3.5: Qori-cadka Qudhaca



Jaantuska 3.6: Kaynta Bamboo

Sida dhul cawseedka kulaalaha oo kale, ayay kaymuhuna guri, (hoy) ugu yihiin noocyo badan oo duurjoog ah oo kala duwan. Xayawaanda duur joogta ah ee ku nool kaymaha waxay u badan yihiin kuwo geedafuul ah.

Xayawaanadan geeda fuulka ah waa kuwa ku dul nool geedaha. Waxaana kamid ah xayawaanadan daanyeerka, Qalamida iyo shimbiraha. Waxaan xayawaanada geedo fuulka ah tusaale wanaagsan ugu soo qaadan karnaa nooca daanyeerka loo yaqaano kolubas (Gureesa) ee ku nool kaymaha ku yaala Koonfurta Galbeed ee Itoobiya.



Jaantuska 3.7: Daayeerka kolubas (Guresa) ee geeda fuulka ah

4 ***Dhirta Albaynka (Jooga sare):*** Meelaha sida aadka ah uu joogoodu sareeyo ee Geeska Afrika, heer kulku waa kuwo uu qabaw yahay roob da'una uu aad u yar yahay. Sidoo kale aad bay dabayluhu ugu badan yihiin. Waana ta keentay in baadka ka baxa meelaha kala duwan ee noocan ahi oo ah kuwan laga helo qaybaha gobolada aadka u kulul, aadka u qalalan iyo aadka u qoyanba. Baadka meelahaan sare ka baxaa waa kuwo u adkaysta qabowga badanaaba. Dhirta u adkaysata qabowga waxa loo yaqaanaa Baadka Albaynka. Meelaha sida aad iyo aadka ah u jooga sareeya ee Itoobiya, sida kuwan laga helo Buuraha simayn iyo Baali oo ah gobolo baad kani ku hagoogan yahay.

## Hawl-galka 3.5



1 Dhirta albeynta ma ka baxdaa agagaarka aad ku nooshihiin? Hadii ay haa Jawaabtu tahay taxa inta aad kartaan?

2 Sidee ayey qabawga aadka ah ugu adkeysataa?

Intabadan dhirta kabaxda dhulka jooga sare ee buuraleyda ah waa dhir gaagaaban oo adkaysi u leh dabaylaha. Waana sababata keentay inay laf ahaantoodu la qabsadaan deegaan dabayl badan oo qabow badan.



Jaantuska 3.8: Dhirta Albaynka ee Buurta Raas dhajan

## 3.2 WAXTARKA DHIRTA DABIICIGA AH IYO XAYAWAANADA DUUR JOOGTA AH

***Marka uu dhamaado cashirkan kadib, ardaydu waxay a woodi doonaan in ay:***

- Taxaan waxtarada dhirta dabiiciga ah iyo xayawaanada duurjoogta ah ee Geeska Afrika.



### Hawl-galka 3.6

Intaad sadex sadex isu qeybisaan, isku daya in aad soo uruurisaan xogo ama macluumaad ku saabsan waxtarada dhirta dabiiciga ah iyo xayawaanda duurjoogta ee lagahelo aaga aad ku nooshihiin ay u Leeyihiin dadka iyo deegaankaba; kadib warbixintiina usoojeediya fasalkiina.

## 3.2.1 Waxtarka Dhirta Dabiiciga ah



### Hawl-galka 3.7

1 Waa maxay faa'iidoonyinka ay dhirta dabiiciga ah inoo Leedahay?
2 Waa ku wee noocyada dhirta ee aaga aad ku nooshiniin Laga isticmaalo (waxyaabo kala duwna loo isticmaalo)? Kadooda sida iyo sababta ay dadku u isticmaalaan?

Dhirta dabiiciga waxay inoo leeyihiin waxtaro aad u badan. Waxtarada dhirta dabiiciga ah ee geeska Afrika waxaa ka mid ah kuwan soo socda:

1 **Ilo tamareed:** dadka ku nool geeska Afrika ayaa ah dad ku tiirsan dhirta dabiiciga ah oo u isticmaala tamar ahaan. Geedaha ay dabka ku shitaan ee ay ku karsadaan cunooyinka waxay inta badan ka soo gurtaan kaymaha u dhow. Dad badan oo ku nool Itoobiya ayaa qoryaha iyo geedaha ay ka soo gurtaan keymaha u dhaw u isticmaala dab ahaan oo shita si ay ugu karsadaan cunooyinka ay ubaahan yihiin.

2 **Sabada duurjoogta:** Dhirta dabiiciga ah ee Geeska Afrika waxay hoy (guri) u tahay duurjoog noocyo badan Leh (jaadad badan). Sidaynu horayba ugu soo sheegnay jaadadkaas kaladuwan ee xayawaanada duurjoogta ah ee Geeska Afrika waxay ku nool yihiin kaymaha iyo dhulcawseedyada gobalka.

3 **Ilo cunno iyo dawo:** Dhirta dabiiciga ah ee Geeska Afrika waxaa ka mid ah noocyo badan oo aynu u isticmaalo cuno ahaan ama caafimaad ahaan (dawo). Waxaa jira dawo dhaqameedyo badan oo Laga sameeyo dhirta, sida caleenteeda, xididka, gunta iwm.

4 **Cilmiga sayniska iyo tacliinta:** Dhirta dabiiciga ah waxay waxtar balaadhan u leedahay waxbarashada (tacliinta) iyo cilmi baadhista dhanka sayniska ee deegaanka.

5 Adkeynta ama dhawrida isku dheeli tiranaanta dabiici: Dhirta dabiiciga ah waxay dhawrtaa dheelitirnaanta dabiiciga ah ee cimilada.Hawada, carada, i.w.m.

6 **Dalxiiska:** Dhirta dabiiciga ah waxay qeyb libaax ka qaadataa bilicda deegaanka oo ay u siyaadiso dhaqaalaha ka soo gala dhanka dalxiiska. Dalxiisayaashu waxay booqdaan goobaha leh Baadka dabiiciga ee indhaha u roon iyo goobaha leh xayawaan duurjoog ah oo la xanaaneeyo.

7 **Ilaha alaabta caydhiin ee warshadaha:** noocya kala duwan oo ka mid ah dhirta ayaa waxaa ay yihiin ilaha alaabta caydhiin ee ay warshaduhu isticmaalaan. Tusaale, khudaarta, geedaha laga sameeyo looxaanta, xabagta, caleemaha i.w.m. xaga dawadana sidoo kale waxaa jira warshado soo saara dawooyin badan oo kasoo jeeda dhirta.



## Hawl-galka 3.8

Waxaad isu qeyb saan saddex kooxood kadibna dood wadaag ka yeesha su'aalahan soo socda:

1. Majiraan wax dhir ah oo cuno ahaan looga isticmaalo aaga aad ku nooshihaiin? Haday Jiraan taxa magacyadooda?
2. Majirtaa dhir dawo ahaan loo isticmaalo aaga aad ku nooshiin? Haday jiraan maxaa la yidhaahdaa magacyadooda?
3. Sheeg hadday jiran gooba dalxiis oo ku yaala meelaha leh dhirta dabiiciga ah ee degmadiina?
4. Maka jiraan degmadiina ama agagaarkiina warshado alaab caydhiin ahaan u isticmaala dhirta dabiiciga ah?

## 3.2.2 Waxtarka xayawaanada duurjoogta ah

Xayawaanada duur joogtu waa xayawaanka qeybtiisa aanan aheyn dad lajoog ama dabjoog ee dibad jooga ah. Waa xayawaan aanan u soo dhawaan dadka oo aana ku ag noolaan karin.

Geeska Afrika wuxuu hodan ku yahay xayawaanada kaladuwan sida ugaadha, dugaaga iyo kuwa leh sifooyinka dabeecadaha ugaadha iyo dugaaga. Waxtarka xayawaanada duurjoogta ay leeyihiin kuwa ugu muhiimsan waxaa ka mid ah:

i. Waxaan ka helaa Birootiin: qaar ka mid ah duurjoogta ayeynu ugaadhsanaa kadibna cunaa hilibkooda oo aynu ka helaa birootiin. Tusaale: waxaa jira dad Itobiyaan ah oo ilaa hada ugaarsada ugaadha kala duwan siiba nooca deerada la jaadka ah sida cawsha, goodirka iyo kuwo kale.

ii. Isticmaalida warshadaha: xayawaanada duurjoogta waxaa agaab caydhiin ahaan u isticmaala warshado kala duwan. Dhogorta iyo maqaarka qeyb ka mid ah duurjoogta ayaa alaab caydhiin ahaan u isticmaalaan warshadaha qaarkood. Tusaale ahaan, haraga (maqaarka) Yaxaaska waxaa laga sameeyaa kabo, suuman iyo shandado aad qaali u ah.

iii. Cilmiga Sayniska iyo Waxbarashada: xayawaanka duurjoogta waxaa kale oo loo isticmaalaa cilmi baadhisyo kala duwan. Qaarkood waxaa lagu tijaabiyaa waxayaabaha cusub oo lagu soo biiriyo dhanka caafimaadka (dawooyinka) waxaa kale oo ay qey libaax ka qaataan dhanka waxbarashada.

iv. Isu-dheelitirka dabiiciga: Duur joogtu waa kuwo uu Alle isu-dheelitiray. Qaar waxay ku nool yihiin cawska iyo biyaha, qaarna isla kuwan ayey ku nool yihiin oo waa hilib kunool oo waxay isu dheelitiraan dhirta dabiiciga

ah iyo xayawaanka dhirta quuta (kudul-nool) marka, isku-dul noolaanshaha ka dhaxeeya xayawaanka iyo deegaanka ayaa keenaysa isu-dheelitirnaanta deegaanka dhexdiisa.

v Qiimaha bilicda: xayawaanada duurjoogta waxay leeyihiin soo jiidasho iyo qurux deegaanka waxtar badan u leh. Dad badan ayaa u dalxiis taga iyaga oo ujeedooyin kala duwan ka leh oo ay ka mid tahay nasasho.

vi Ila-dhaqaale: xayawaanka duur joogta waxaa laga helaa dhaqaale badan oo xaga dalxiiska ah, oo dalxiisayaasha ayaa bixiya lacag ay ku daawadaan xayawaanka.



### Hawl-galka 3.9

Intaad isuqaybisaan kooxo-tira yar kadooda ama.

Ka wada hadla faa'iidada ay leeyihiin duurjoogta ku nool deegaankiina.

## 3.3 SAAMEYNTA AY DHAKHSO U KORADHKA TIRADA DADKA KU LEEDAHAY DHIRTA DABIICIGA AH IYO XAYAWAANADA DUUR JOOGTA AH

***Marka uu dhamaado cashirkan kadib, ardaydu waxay a woodi doonaan in ay:***

- Aqoonsadaan saameynta ay dhakhso u koradhka tirada dadku ku ledahay dhirta dabiiciga iyo xayawaanada duurjoogta ee geeska Afrika iyo Itoobiya.



### Hawl-galka 3.10

1 Islafalanqeeya saameynta waxyeelo ee dhakhso u koradhka tirada dadka uu ku leeyahay dhirta dabiiciga ah iyo xayawaanaada duurjoogta ah?

2 Maka jirtaa dhibaatadan dhakhso u koradhka tirada dadka deegaankiina?

Xawli u koradhka tirada dadka waxay keentaa saameyn dhinacya badan taabanaysa. Waxay saameysaa bulshada nolasheeda, dhaqaalaha, siyaasada iyo waliba deegaanka. Saameynta waxyeelo ee uu dhakhsa u koradhka tirada dadku ku leeyahay dhirta dabiiciga ah iyo xayawaanada duurjoogta ah ee geeska Afrika, waxaa ka mid ah:

1 **Xaalufinta dhirta:** Markay tirada dadku aad u koradho waxaa sido kale kordhaya baahida bulshada ee dhinaca dhulbeereedka, dagaanka iyo tamarta. Si ay deetana u daboolaan baahidooda ayey badanaa u xaalufiyaan dhirta, kadibna u isticmaalaan dhulka ay dhirta ka xaalufiyeen waxyaabo kaladuwan. Hadaba xaalufinta dhirtu waxay deegaanka u horseeda in uu noqdo Lamadagaan iyo waliba abaaro ku dhaca (habsada).

2 **Baabi'inta ama nabaad guurka deegaanka:** dhakhsa u koradhka tirada dadka ayaa sababa in duruufo kala duwan awgood loo xaalufiyo dhirta. Kadib carada ayaa u nuglaaneysa daadadka iyo dabeylaha oo ay la tagayaan. Waxaa kale oo iyadana ka dhaca deegaamada uu ka Jiro dhakhso u koradhka dadka haw xumo.

3 **Waxyeelaynta duurjoogta:** Sidaynu horayba u soo sheegnay duurjoogtu waxaa hooy (sabo) u ah oo ay ku tiirsan tahay dhulalka ay dhirtu hadhaysay. Marka dhakhsa u koradhka dadkuna wuxuu xaalufinayaa dhirta, waxaa kale oo uu keeni ugaadhsi sharcidaro ah. Marka qaarkaas iyo kuwo kale ayaa kamid ah waxyeelooyinka uu u gaysto dhakhsa u korka tirada dadka xayawaanada duurjoogta ah.



## Hawl-galka 3.11

1 Maxay tahay dhibaatada ugu weyn ee ka jirta deegaankiina ee dhinaca duurjoogta iyo dhirta dabiiciga ah?

2 Ma jiraan wax duurjoog ah oo laga dabar-gooyey deegaankiina?

# 3.4 DHAWRIDA DHIRTA DABIICIGA AH IYO XAYAWAANADA DUUR JOOGTA AH

***Marka uu dhamaado cashirkan kadib, ardaydu waxay a woodi doonaan in ay:***

- Qeexaan dhawirda.
- aqoonsadaan talaabooyinka ugu macquulsan ee lugu dhawri karo dhirta dabiiciga ah iyo duurjoogta.

Dhawrida kheyraadka marka aan leenahay waxaa laga wadaa si wanaagsan u isticmaalka kheyraadka. Marka ay dadku isticmaalayaan kheyraadka dabiiciga ah waa in ay si wanaagsan u isticmaalaan kana fikiraan jiritaanka mustaqablaka khyraadka, oo ayna dabargoynin iyo sii baaqi ahaanshahooda.

Ilaalinta iyo xanaaneynta dhirta dabiiciga ah iyo xayawaanka duurjoogta ah waxay ka dhigantahay dhawrid la dhawray kheyraadka dabiiciga ee deegaan leeyahay.

Sida ugu wanaagsan ee loo dhawri karo kheyraadka dabiiciga ee dhirta iyo duurjoogta ayaa waxay tahay ku dhaqanka talaabooyinkan hoos ku qoran.

***Joojinta xalufinta dhirta:*** Guritanka iyo goynta geedaha ayaa waxay ka mid tahay dhibaatooyinka lagu hayo kheyraadka Itoobiya kuwa ugu waa weyn mid ka mid ah. Koradhka aad ka u sareeya ee tirada dadka Itoobiya ayaa wuxuu siyaadiyey baahida dadku ay u qabaan dhul ay ka dhigtaan beero iyo dagaan. Waxaa intaas u dheer shidashada geedaha iyo u isticmaalka dhismayaasha ayaa sababa gurida iyo xaalufinta dhirta Itoobiya.

***Joojinta ugaadhsiga sharci darada ah:*** Ugaadasiga sharci darada ah waa mid ka mid ah dhibaatooyinka lacaadaystay ee haysta ama laqu hayo xayawaano badan oo duurjoogta Gobolka Geeska Afrika ah. Ugaadhsiga sharci darada ah ee ay dadku xayawaanada duurjoogta ah ku hayaan waa mid ayna u kala aabayeelaynin oo aynan eegaynin da'da, nooca, ama sinjiga iyo waliba lab iyo dhadig toona. Sidaa daraadeed xayawaano badan ayaa halis gala amaba dabargo'a. hadaba waxaa lagama maarmaan ah in la xakameeyo ugaadhsiga sharci darada ah si loo sugo jiritaanka sinjiyadeed ee xayawaanka oo ayna u noqonin kuwo dabar go'a.

***Wacyigalinta bulshada:*** bulshada oo Loo sheego laguna wacyi galiyo dhibaatooyinka ay leedahay si xun u isticmaalka kheyraadka iyo faa'iidooyinka ay leedahay dhawrida kheyraadka debiiciga ah.

***Dajinta sharciya adag iyo hirgalintooda:*** waa sharciyo lagu ciqaabayo qof kasta oo wax yeelo u geysta kheyraadka dabiiciga ah, una isticmaala si aana waafaqsaneyn sharciga.


***Isticmaalka ilo tamareedyo kale:*** geedaha (Dhirta) oo tamar ahaan looga isticmaalo oo lagu karsado cunooyinka ayaa ka mid ah dhibaatooyinka kheyraadka geeska Afrika lagu hayo. Si taas loo yareeyo waa in ay bulshadu heshaa fursado kale oo ay tamar ahaan u adeegsan karto.

Dhismayaasha oo iyana Loo adeegsado qalabyo ama waxyaabo kale oo badala isticmaalka dhirta dabiiciga ah.

In la sameeyo seeraha qaran ee xayawaanka lagu ilaaliyo. Waxaa jira dalkeena Itoobiya goobo badan oo ay ka jiraan beeraha xayawaanka Lagu ilaaliyo, waxaana kamidah kuwa ku yaala Awaash, Buuraleyda Baale, Mago iyo kuw kale.



Jaantuska 3.10: seeraha qaran ee Mago



Jaantuska 3.9: Qeyb kamid ah xayawaanada seeraha qarana ee Mago

## SOOKOOBID

- Wadamada geeska Afrika waa wadamo hodan ku ah dhirta dabiiciga ah iyo xayawaanada duurjoogta ah.
- Dhirta Lama degaanka iyo Lama degaan xigeenka, dhul cawseedka, keynta iyo Albaynta ayaa kamid ah dhirta dabiiciga ah ee Geeska Afrika. Hadaba dhirtaas ayaa ah mid sabo ama hooy u ah xayawaano kala duwan oo duurjoog ah.
- Dhirta dabiiciga ah ee dalkeena Itoobiya waxaynu u isticmaalaa cuno, dawo dhaqameed, alaabta caydhiin ee warsadaha, iwm.
- Dhakhso u korodhka tirada dadka ayaa ah dhibaato aad u weyn oo waxyeelo ugaysata dhirta dabiiciga ah iyo xayawaanada duurjoogta ah.
- Si loo dhawro xayawaanada duurjoogta ah ee deegaankeena iyo dalkeena Itoobyiyaba waa in:
  - *Wax labaro Lana wacyigaliyo bulshoda*
  - *La sameeyo sharciyo adag oo La hirgaliyo*
  - *La helo ilo tamareedyo kale*
  - *La sameeyo seeraha qaran ee lagu ilaaliyo xayawaanada.*
  - *La xakameeyo xaalufinta dhirta iyo ugaadhsiga sharcidarada ah.*

## LAYLISKA GUUD EE CUTUBKA 3aad

**I** ***Run ama Been ku qor***

1 Nooca dhirta dabiici ee ka baxa meel waxay ka tarjumayaan xaaladaha muuqaaleed iyo cimilo ee ay meeshaas leedahay.

2 Meelaha lama dagaanada iyo lama degaan xigeenada badanaa dhirta ka baxdaa waa dhir abaareed.

3 Geedaha xilli walba cagaaran waa kuwa caanka ku ah qaybaha qalalan ee Itoobiya.

4 Guraasa waa xayawaan geedo-fuul oo ku nool kaymaha.

5 Xaalufinta dhirta dabiiciga ah waxay keentaa dhibaatooyin badan.

## II *Buuxi meelaha Banaan*

1 ____________ waa habsami u isticmaalid la'aanta dhirta kaymaha.

2 ____________ waa habsami u isticmaalka kheyraadka.

3 Dhirta adkaysiga u leh abaarta iyo biya la'aanta waxay ka baxdaa dhulka jooga ____________leh.

4 Dhirta adkaysiga u leh qabawga waxay ka baxdaa dhulka googa ____________leh.

5 Si loo ilaaliyo xayawaanka duurjoogta ah waa in loo sameeyo

____________ qaran oo lagu xanaaneeyo.

## III *Ka bixi jawaabo kooban*

1 Waxaad qortaa afar ka mid ah waxtarada xayawaanda duurjoogta ay u leeyihiin dadka iyo deegaanka.

B ________________________________

T ________________________________

J ________________________________

X ________________________________

2 Tax ama qor afar kamid ah waxtarada dhirta dabiiciga ah.

B ________________________________

T ________________________________

J ________________________________

X ________________________________

3 Dood gaaban ka yeesha sida loo dhawri karo dhirta dabiiciga ah iyo xayawaanada duurjoogta.

# CUTUBKA 4

# ARIMAHA DADWAYNAHA

## Ujeedooyinka Guud ee Cutubka

***Marka uu dhamaado cashirkan kadib, ardaydu waxay a woodi doonaan in ay:***

- sharaxaan muuqaalada Ej-Ay-Fi/Aydhis (HIV/AIDS) iyo qaababkiisa gudbineed.
- sharxaan caadooyinka laqabatimay ee dhibta leh ee keeni kara Ej-Ay-Fi/Aydhis (HIV/AIDS) - ka.
- falanqeeyaan saamaynta Ej-Ay-Fi/Aydhis (HIV/AIDS).
- qaadaa dhigaan (lafaguraan) saamaynta koritaanka dhaqsaha badan ee dadka.
- sharaxaan muuqaalada maamulka suuban
- falanqeeyaan xuuquuqda caruurta
- La xidhiidhiyaan hababka looga samatabaxo (lagaga badbaadi karo) shilalka.

## Tusmooyinka Muhiimka ah

**4.1** ARRIMAHA BULSHADA

**4.2** SAAMEYNTA DHAKHSA U KORADHKA TIRADA DADKA

**4.3** MAAMULKA SUUBAN, XUQUUQDA CARUURTA, SHILALKA IYO BADBAADADOODA

- *Sookobidda cutubka*
- *Su'aalo kakooban cutubka dhamaantii*

# HORDHAC

Cutubkan wuxuu ku saabsan yahay waxyaabaha arrimaha dadwaynaha ugu waa wayn sida: Ej-Ay-Fi/Aydhis (HIV/AIDS), ku dhaqanka caadooyinka xunxun, koriinka dhaqsaha ah ee dadweynaha, maamulka suuban, xuquuqda caruurta, iyo shilalka iyo badbaadadooda.

Cashirka hore ee cutubkan waxaad ku baran doontaan Ej-Ay-Fi/Aydhis (HIV/AIDS) ka iyo ku dhaqanka caadooyinka dhibta leh oo dadka u horseedi kara cudurka halista ah ee Ej-Ay-Fi/Aydhis (HIV/AIDS) iyo saamaynta Bulsho-dhaqaale ee Ej-Ay-Fi/Aydhis (HIV/AIDS) iyo qodoba kale oo aynu ku falanqayn doono casharkan.

Waxaan qaybta labaad ee cutubkan ku baran doonaa saamaynta uu koriinka dhaqsaha ah ee dadweynuhu leeyahay. Waxaa kale oo aad casharkan ku baran doontaan sida koriinka dhaqsaha ah ee dadku uu u sababo yaraanshaha adeegyada bulsho sida waxbarashada, caafimaadka, guriyaynta i.w.m iyo gabaabsiga dhul beereed yada iyo dhul daaqsimeed ka.

Cashirka ugu dambeeya ee cutubkan wuxuu ku saabsan yahay maamulka suuban, xuquuqda caruurta iyo shilalka iyo badbaadadooda. Isla falanqeeyaan ku saabsan macnaha iyo muuqaalka maamulka suuban, xuquuqda aasaasiga ah ee caruurta iyo shilalka kala duwan iyo hababkooda badbaado.

## 4.1 ARRIMAHA BULSHADA

***Marka uu dhamaado cashirkan kadib, ardaydu waxay a woodi doonaan in ay:***

- Qeexaan Ej-Ay-Fi/Aydhis (HIV/AIDS) iyo halista caado dhaqameedyada xunxun.
- Ka wadahadlaan caadooyinka halista ah; ee kajira ama lagaga dhaqma deegaankeena.
- Qaadaa dhigaan cawaaqib xumada halista ah ee ay keenaan caadooyinka xun xun leh.
- Aqoonsadaan, faah faahiyaanna caadooyinka halista badan ee lagu dhaqmo kuwaas oo bulshada u horseeda HIV/AIDS
- Lafa guraan saamaynta caado dhaqameedyada xun xun ee la isugu gudbinayo Ej-Ay-Fi/Aydhis (HIV/AIDS)
- Sharaxaan saamaynta bulsho dhaqaale ee HIV/AIDS leeyahay.

### Erayada Furaha u ah Cashirka

- Aydhis (AIDS)
- Ej-Ay-Fi (HIV)
- Dhaqan
- Ku dhaqanka caadooyinka
- Qanjidh gooyn
- Afduub
- Hilibadalqe qoyn

## 4.1.1 Cudurka dilaaga ah ee Ej-Ay-Fi/Aydhiska (HIV/AIDS) iyo caadooyinka xun xun



### Hawl-galka 4.1

U falalanqeeya kooxo yaryar kadibna warbixin ka soo qora natiijada una soo jeediya fasalka

1 Maxaad ka taqaanaa Ej-Ay-Fi/Aydhis (HIV/AIDS)?
2 Kawada hadla macnaha caadooyinka lagu dhaqmo, kadibna tilmaama caadooyinka waxtarka leh iyo kuwa xunxun ee halista ah ee lagaga dhaqmo dagaankiina.

***Maxaad kataqaana ama ka ogtahay Cudurka Dilaaga ah ee Ej-Ay-Fi/Aydhis (HIV/AIDS)?***

Wakhtigan xaadirka ah, Ej-Ay-Fi/Aydhis ku waa cudurka ugu waxyeelada halisan ee dila malaayiin dad ah oo ku kala nool dunida daafaheeda. Waxayse halista cudurkan iyo waxyeelooyin kiisu ku badantahay Afrikada ka hooseysa saxaraha oo uu dalkeena Itoobiya ka mid yahay.

Itoobiya iyo dalalka kale ee bariga Afrika wuxuu cudur kani ugu faafayaa si aad u xawli badan, waxaana sababa qaar ka mid ah caadooyinka bulshada dhexdeeda ka dhex-jira oo ah kuwo ay isugu gudbiyaan Ej-Ay-Fi/Aydhis. Dad badan ayaa qaaday fayraska Ej-Ay-Fi (HIV), waxaana jira kuwa badan oo khatar wayn uu ku hay maxaa yeelay

Koradhka cudurka Ej-Ay-Fi/Aydhis (HIV/AIDS) ka ayaa ah mid aad ugu dhakhsa badan dalkeena Itoobiya iyo dalalka Bariga Afrika guud ahaan.

Qaar kamid ah caadoo yinka iyo dhaqamada xun xun ee kajira waddamada ayaa sababa isu-gudubka Ej-Ay/Fi/Aydhis (HIV/AIDS) ka.

### Waa Maxay Ej-Ay-Fi/Aydhis (HIV/AIDS)?

Ereyga Aydhis (AIDS) waxaa Loosoogaabsaday “Acquired Immune Deficiency Syndrom” Aydhis (AIDS) - ku waa cudur burburiya habka difaaca jidhka aadamaha. Cudurka Aydhis (AIDS) - ka waxaa dhaliya fayraska loo yaqaano Ej-Ay-Fi (HIV) (Human Immune-deficiency virus).

Ej-Ay-Fi (HIV) - gu waa fayras dila ama waxyeeleeya unugyada difaaca jidhka aadamaha (T-cells). Fayraskan wuxuu si tartiib tatiib ah u burburiyaa awooda difaaceed ee uu Jidhka bini'aadanku iskaga caabiyo xanuuada kale ee dilaaga ah.

Siyaabaha lays kugu gudbiyo Ej-Ay-Fi (HIV)-ga waxaa ka mid ah:

- *Galmo aan amaan laheyn oo lala galo (lala wadaago) qof qaba xanuun ka*
- *Falgalka dhiig shubid ee uu qof la sameeyo qof qaba cudurka*
- *La wadaaga irbadaha, sakiinta, iyo wixii af wax muda ama sard leh oo lala wadaago qof qaba cudurka*
- *Hooyada uurka leh ee qabta cudurka waa ay u gudbin ilmaheeda caloosha ku jira*
- *Naas ama nuujinta caanaha naaska hooyada way u gudbin caruurta la dhaadhsiinayo hadey hooyadaasi qabto cudurka.*

Hadaba maadaama aynan jirin dawo lagaga hortago Ej-Ay-Fi (HIV) - ga, habka ugu wanaagsan ee la isaga ilaalinkaro fayraska waa iyadoo la iska dhawro waxyaabaha keeni kara khatarta cudarkan, sida galmada xaaraanta ah iyo la wadaaga qof kale qalabyada wax lagu gooyo ama lagu mudo iyo caadooyinka xunxun ee ku dirqiya bulshada wada isticmaalka qalabyada wax lagu xiirto ama gooyo, oo ah waxyaabaha u sababay dad badan oo ku nool Itoobiya iyo Geeska Afrika in uu haleelo xanuunka halista ah ee Ej-Ay-Fi/Aydhis (HIV/AIDS).

### *Maxay yihiin caado dhaqameedyada xun xun?*

Bulsho waliba waxay leedahay dhaqan u gaar ah. Dhaqanku waa hab nolaleedka guud ee bulsho ku nool goob, kaasoo ah mid soo jireen ah oo ay iska dhaxlaan; waxaana ka mid ah caadooyinka, dhaqamada, i.w.m ee ay wadaagaan.

Dhaqamada dadku waa ay kala gadisan yihiin. Tusaala ahaan, Itoobiya inkastoo ay jiraan dhaqamo guud ahaan lawadaago hadana qoomiyadaha iyo dadka Itoobiya waxay leeyihiin dhaqamo u kala gaar gaar ah.

Caado dhaqameedyada halista badan ee ka jira dalkeena Itoobiya waxaa ka mid ah:

- *Gudniinka (fircooniga) ah ee gabdhaha*
- *Afduubka*
- *Guurka deg-dega ah*
- *Qanjidh goynta*
- *Daldaloolinta jidhka (tumidda jidhka)*
- *Hilib-dalqe-goynta.*

Dhaqamadan halista badan ayaa waxaa si guud oona loo kala hadhin loo aqoonsaday in ay yihiin xadgudub xuquuqda aadamaha ah. Sidaa daraadeed, caalamku cadaadis ayuu saaray dawladaha si ay uga dabargooyaan bulshada iyo shakhsiyaadka ku dhaqma caadooyinkan halista badan.

Wakhti xaadirkan, dawlada Itoobiya waxay ku jirtaa dadaalo ay uga gol lee dahay sidii ay dhamaan deegaamada dalka uga cidhib tiri laheyd caadooyinkaas. Intaas waxaa dheer, maadama ay dhaqamadan intooda badan meel kaga dhacayaan xuquuqihii haweenka, dastuurka JDFI (qodobkiisa 35[aad]) waxaa ku cad oo uu dhigayaa: In ay dumarku xaq u leeyihiin inay dawladu ka dhowrto caadooyinka iyo dhaqamada halista ah ee dulmiga ku haya haweenka ama sababaya in uu dhawac gaadho jidhkooda ama dareenkooda.

## 4.1.2 Isu-gudbinta Ej-Ay-Fi/Aydhis ka ee la xidhiidha caadooyinka xun xun

Waxaad mid mid u baran doontaan caado dhaqameedyada halista badan ee kor lagu xusay iyo sida ay u sababi karaan Ej-Ay-Fi/Aydhis-ka (HIV/AIDS), bal aynu ku bilowno hawlgalkan soo socda.



### Hawl-galka 4.2

Labo labo isula falanqeeya

Ka shaqee hawlgalada soo socda idinka oo raacaya tilmaamaha lagu siiyay

1. Sameeya kooxo yaryar
2. Koox waliba ha doorato mid kamid ah caadooyinka halista badan ee dagaankiina lagaga dhaqmo samee kuwan soo socda.
   - b Daraasaad ku same ku dhaqanka caadooyinka xun xun iskuna day inaad ka jawaabtid su'aalahan soo socda.
     - *Sidee loogu dhaqmaa?*
     - *Sababta loogu dhaqmo?*
     - *Waa maxay saamaynada ku dhaqamadu?*
   - t Isla falanqeeya in badan hadday ku dhaqanku sababayo isu gudbinta HIV/AIDS ama aanu gudbinayn hadaad saa samay saan faah faahiya sida?
   - j Soo jeediya hababka suuro gal ah ee kaa caawin kara tirtirida dhaqamadan
3. koox kasta waa inay qoraan warbixin kooban oo ay qodobo muhiim ah ku falanqeeyeen.
4. Warbixinta koox kasta waa inay u soo jeediyaan fasalka si loo falanqeeyo.

## 1 Gudniinka Gabdhaha

Gudniinka gabdhaha waa caado aad u halis badan oo lagu jarjaro (googooyo) xubnaha taranka gabdhaha. Gudniinka gabdhaha ayaa ah mid dhamaan xubnaha dareenka ama qeyb ka mid ah laga xaalufiyo.

Caadada xun ee gudniinka gabdhaha waa mid laga isticmaalo (lagaga dhaqmo) inta badan dalalka saxaraha ka hooseeya ee Afrika.

Ku dhaqanka iyo isticmaalka caadadan xun ee gudniinka fircooniga ayaa ah mid aad uga jirta Itoobiya, iyadoo ayna nugu kalifin xaalad caafimaad iyo mid diin toona, oo ay xaaraan ka tahay dhanka diinta.

Dalka Itoobiya intiisa badan dadka ku nool waxay aaminsanyihiin gudniinka gabdhaha (fircooniga) in uu ka ilaalinayo gabdhaha xumaanta iyo sameynta waxyaabo xunxun, balse ma arkaan xanuunka iyo dhibaatada illaa heer mustaqabal aanan ka hadheynin ee jarjaritaanka xubnaheedu keenayaan.

Caadada xun ee gudniinka gabdhaha oo ka jirta guud ahaan dalkeena gaar ahaana deegeenka Soomaalida ayaa ah mid lagaga dhaqmo gudniinka fircooniga ah. Waxaana la adeegsadaa qalabyo mirdhay (daxalaystay), kuwaasoo laf ahaantooda keena xanuuno fara badan oo ay teetanadu ka mid tahay, gudbiyana xanuu na kale oo uu Ej-Ay-Fi/Aydhis (HIV/AIDS) ka mid yahay.

Gudniinka Fircooniga ah wuxuu gabdhaha u horseedaa cudurka dilaaga ah ee Ej-Ay-Fi/Aydhis (HIV/AIDS), Sababto ah:

- *Waxaa lagu goo gooyaa (jarjaraa) xubnaha taranka ee gabdhaha qalabyo aan nadiif aheyn ama aan sifaysnayn oo laga yaabo in ay wataan fayraska Ej-Ay-Fi.*
- *Hal afleey oo kaliya (iskumid ah) ayaa loo isticmaalaa in lagu gudo gabdho kaladuwan. Tanina waxay sababtaa in ay isugudbinaan gabdhuhu fayraska Ej-Ay-Fi.*
- *Waxaa laga yaabaa qofka gudaya gabdhaha laf ahaantiisa in ay qalabku saran ama mudaan. Hadii uu qabay qofkaasi cudurkan gabdhaha uu gudayo ama ay gudayso wey u gudbin.*

## 2 *Afduubka*

Afduubka wuxuu kamid yahay caadooyinka xun xun ee ka jiro dalkeena. Waxaana looga jeedaa af-dunbka xoog iyo qasab ku kaxaysiga gabdhaha si loo guursado.

Qofka wax afduubanaya waxaa weheyliya oo uu kaxeystaa koox rag ah oo ka kooban saaxiibadii iyo ehelkiisa. Waxaana loo arkaa mararka qaarkood in afduubka noocan ah uu yahay waddo gaaban oo guurka loo maro iyadoona cidna lagala tashanin lana ogeysiinin.



### Hawl-galka 4.3

#### Labo labo isula falanqeyn

1. Daraasada tusaha soo socda waa mid la helay 2005 Tirada dadka iyo baarista guud ee caafimaadka Itoobiya.
2. Baaritaanka laba ku dhaqan caadooyin oo kala duwan ee gobalado dalka.
   - *Aqoonso ama tilmaan gobolad ay aad halista u yihiin labadan ku dhaqan caado.*
   - *Aqoonso ama tilmaan gobolada aan sidaas halis ugu ahayn labadan ku dhaqan caado.*
   - *Maxaad ka odhan kartaa gobolkina adoo u tixgelinaya labadan ku dhaqan caado.*
3. Qor soo koobid/warbixin ku saabsan qodobka la soo taxay ee su'aasha 2$^{aad}$.

Shaxdan waxey tilmaamayse heerarka caadooyinka xunxun ee gudniinka gadhaha iyo Afduubka ee deegaamada Itoobiya

| Deegaamada | % gudniinka gabdhaha | % dumarka Lagu guursaday Afduubka |
|---|---|---|
| Tigreega | 29 | 1.5 |
| Canfarta | 91.5 | 5.6 |
| Amxaarada | 68.5 | 2.5 |
| Oromada | 87 | 11 |
| Soomaalida | 97 | 4.5 |
| Beenishaangul gumus | 67.5 | 3.5 |
| Qoomiyadaha shucuubta koofureed | 71 | 13 |
| Gaambeela | 27 | 9 |
| Hararida | 85 | 7 |
| Addiis Ababa | 65.5 | 4.5 |
| Dir dhaba | 92 | 6.5 |

*isha: DHS Itoobiya ( 2005)*

## 3 Tumidda ama daldaloolinta jidhka

Waxaa iyana caadooyinka xun xun ka mid ah astaynta jidhka ee uu qofku jidhkiisa daldalooliyo si uu ugu sameysto midab ama calaamad muuqata oo uu doonayo. Waxaa intabadan calaamadahan ama midabadan lagu qortaa wajiga, gacmaha iyo qaybo kale oo jidhka dushiisa ah.

Ujeedooyinka laga leeyahay daldaloolinta (midabeynta) jidhka waxaa ka mid ah:

- *isqurxin*
- *calaamad ay qabiilkiinu isku aqoonsadaan*
- *ka hortaga cudurrada qaarkood*

## 4 Qanjidhada iyo hilib daqle goynta

Qanjidhka iyo hilib dalqaha ayaa dadku caadaystay in ay iskaga gooyaan goobo aanan aheyn goob caafimaad oo laga isticmaalo qalab aana caafimaad ahaan fiicneyn halisna u ah in uu ku faafiyo bulshada cuduro uu Ej-Ay-Fi/Aydhis ku ka mid yahay.

## 5 Galmada Xaaraanta ah

Galmada xaaraanta ah waxay ka mid tahay caadooyinka xun xun ee ka qeyb qaata faafidda iyo isu gudbinta cudurka dilaaga ah ee Ej-Ay-Fi/Aydhis. Sida ay diinteena Islaamka inoo sheegtay oo ah in ay inaga xaraam yeeshay galmada aan xalaasha ahayn oo laqaato ayaa lagaga badbaadi karaa cudurkan in ta kuusoo mari lahaa galmada xaaraanta ah.

Guud ahaan, dhamaan cawaaqib xumada ay sababto ku dhaqanka caadooyinka xun xun waa kuwo aynu soo falanqaynay. Waa in aynu ka wacyigalinaa bulshada dalkeena ah ee wali ku dhaqanta caadooyin kan xunxun gaar ahaan bulshada deegaankeena. Si kasta ha noqotee, wakhti ayay qaadanaysaa waxaana sidoo kale loo baahan yahay iskaashi iyo dadaalo joogto ah oo ay sameeyaan dawlada, bulsho-waynta iyo muwaadininta shaqsiyaadka ah ee reer itoobiya oo dhan.



### Hawl-galka 4.4

Si shakhsi shakhsi ah uga soo jawaaba

1. Waydiiya waalidiintiin ama dadka kale sababta ay caadadan xun ee gudniinka fircooniga ah ee gabdhaha ay aadka ugu sii fidayso deegaankeena soomaalida.
2. Warbixin kooban ka soo qor.
3. Warbixintaada fasalka kasoo jeedi.

## 4.1.3 Saameynta ama waxyeelada Cudurka Ej-Ay-Fi/Aydhis ka

Cudurka Ej-Ay-Fi/Aydhis (HIV/AIDS) ka ayaa dhibaato halis ah ku ah caafimaadka iyo horumarka dunida, gaar ahaan Afrika. Waana midka sababa dhimashada ugu badan ee Afrika. In ku dhaw 70% dadka qaba cudurka Ej-Ay-Fi/Aydhis (HIV/AIDS) ka ayaa waxay ku noolyihiin Afrikada ka hoosaysa saxaraha.

Da'da uu cudurkan Ej-Ay-Fi/Aydhis-ka (HIV/AIDS) uu ku dhaco waxay u badanyihiin inta udhaxeysa 15 – 49 jirka oo ah da'da wax soo saarka iyo taranka.

Laba iyo toban dal oo Afrikaan ah oo lagu qiyaasay 10 kii qofba in uu mid kamid ah qabo cudurka Ej-Ay-Fi/Aydhis (HIV/AIDS) ka ayuu Itoobiya kamid yahay.

Dhibaatooyinka ugu daran ee uu cudurka Ej-Ay-Fi/Aydhis (HIV/AIDS)-ku ku hayo Itoobiya waxaa ka mid ah tirada caruurta agoomaha ah ee uu waalidkood u dhintay.

Natiijadii tirakoobtii iyo daraasaadkii caafimaadka Itoobiya ee sanadkii 2005tii waxay caddaynaysaa in 1.4% oo dadka Itoobiyaanka ah ee hana qaaday ee da'doodu u dhaxayso 15 – 49 jir ay yihiin kuwo uu hayo oo uu haleelay fayraska Ej-Ay-Fi (HIV). Wuxuuna cudur kan faafidiisa iyo asiibidiisuba ku badantahay dumarka. Waana ku dhawaad 2% of dumarka da'doodu u dhexayso 15 – 49 ee uu haleelay cudurkan, halka ay raga ay da'doodu 15 ilaa iyo 49 ka tahay ee u haleelay ay ka noqonayaan 1%.



### Hawl-galka 4.5

#### Koox kox isula falanqeeya

Ka shaqeeya hawlgalada soo socda idinka oo ku salaynaya hab-raaca lagu siiyay:

1 Sameeya kooxo yaryar
2 Koox kasta haka doorato hal qodobadan soo socda ee Ej-Ay-Fi/Aydhiska (HIV/AIDS) ka iyo saamayntiisa.
   - *Qoys*
   - *Shaqo siin*
   - *Caruur*
   - *Saboolnimo*
   - *Haween*
   - *Waxbarasho*
3 Koox kasta ha isla falanqayso saameynta Ej-Ay-Fi/Aydhiska (HIV/AIDS) ku leeyahay qodobka ay doorteen, kadibna ha ka diyaariyaan warbixin kooban.
4 Koox kasta ha u soo jeediso warbixinteeda fasalka si loola falanqeeyo.

Bal aynu hadda si kooban u eegno saameynta Ej-Ay-Fi/Aydhis (HIV/AIDS)-ka uu ku leeyahay qoysaska iyo caruurta wadamada ay aadka u saameysay masiibadiisu.

***Saameynta uu Ej-Ay-Fi/Aydhis*** (HIV/AIDS) – ***ku ku Leeyahay Qoysaska***. Cudurka dilaaga ah ee AIDS-Ka wuxuu badanaa haleelaa Xubnaha waxsoo, saarka leh ee qoyska, wuxuuna baaba' iyo dhibaato ku ridaa dhamaan xubnaha qoyskoo idil. Xanuunka ama dhimashada da'da hanaqaaday, gaar ahaan waalidka ee uu AIDS-ku sababay, waxay dhaxal siisaa qoyska saboolnimo qoto dheer.



## Hawl-galka 4.6

Idinka oo lammaaneyaal ah isla falanqeeya su'aalahan soo socda:

1. Sidee ayuu Ej-Ay-Fi/Aydhis-ku oogu horseedaa qoysaska fakhrinimada (saboolnimada)?
2. Maxay yihiin cawaaqibka saboolnimada qoyska ee uu Ej-Ay-Fi/Aydhis-ku u sababay?

Dhimashada ama xanuunka da'da wax soo saarka leh (hanaqaaday), gaar ahaan waalidiinta ee u sababo Aydhis-ku, waxay ku keentaa qoysaska dhibaatooyinkan soo socda:

- *Dakhliga qoyska soo gali jiray oo aad hoos ugu dhaca oo ay qoyskii waayaanba quutul maalmeedkoodii.*
- *Ej-Ay-Fi/Aydhis-ku wuxuu xaalufiyaa khayraadyada iyo kaydka qoysaska isagoo ku kordhinaya kharashka kaga baxaya dawooyinka iyo aaska xabaasha.*
- *Xubnaha qayska waxaaba la arkaa iyaga oo shaqadii ama dugsigiiba ka tagaya si ay u ilaalyaan xanuunka*
- *Geerida waalidka oo badanaa sababta kala taga ama bur burka qoyska. Tani waxay caruurtii (ubadkii) ka dhigtaa agoomo.*

Sifiican oo taxadar leh darasaadan soo socota ee ku saabsan caruurta uu agoomaha ka dhigay Ej-Ay-Fi/Aydhis-ku u eega, kadibna isku day inaad ka shaqaysaan hawlgalka la socda ee ku xiga daraasadan.

## Sheeko Gaaban

### Nolasha Caruurta uu agoomeeyey cudurka Ej-Ay-Fi/Aydhis-ka

Itoobiya dhibaatooyinka ugu daran ee uu sababay cudurka Ej-Ay-Fi/Aydhis-ka waxaa kamid ah tirada sii kordhaysa ee caruurta agoomaha ah. Waxaa Itoobiya

ku nool caruur badan oo agoon ah, kuwaas oo cudurka Ej-Ay-Fi/Aydhis-ka uu ka dilay waalidiintoodii.

Ibraahim wuxuu kamid yahay agoonta waalidkood uu dilay cudurka Ej-Ay-Fi/ Aydhis-ka ee ku nool Itoobia. Wuxuuna ku dhashay magaalada jigJiga waxay dhinteen waalidkii 5 sano ka hor isagoo 7 Jir ah. Kadib wuu waayey cid xanaaneysa oo aan ka ahayn walaashii Faadumo oo kaweyn. Faadumo waxay ahayd gabadh da'yar 10 Jir ah oo aanan awood ay walaalkeed iyo Nafteedaba ku xanaaneyso Laheyn.

Muddo gaaban ayaa waxaa cuno iyo waxyaabaha yaryar ee ay ubaahan yihiin ku caawinayey dariska. Muddo yar kadib waxaa haleelay gaajo iyo rafaad badan oo silic iyo dhibaato ayey dhameysteen. Xataa dugsigii waa ay wadan kari waayeen oo way ka baxeen si ay nolol maalmeedkooda u soo xoogsadaan.

Markay sanad dhibaatoodeen kadib, ayey ayeydood Hooyo usii qaaday Dirdhaba. Ayeydood waxay ahayd waayeel caydh ah oo aan waxba haysanin oo iyada lafahaanteeda way ku adkeyd korintooda, aradbaxooda iyo Iskuul geyntoodaba.

Markay 3 sano joogeen Dirdhaba ayeydood ayaa xanuunsatay kadibna geeriyootay. Geeridaa ayeydood ayaa naxdin iyo calool xumo kale ku noqotay Ibrahhin iyo Faadumo.

Hadda, Ibraahim waa 12 jir wuxuuna ku nool yahay nolol aad u liidato iyo xaalad adag oo gidaarada magaalada Dirdhaba ayaa hoy u ah. Mana yaqaano meesha iyo xaalka ay walaashiis Faadumo ku nooshahay.

Iskusoo duuduub, waxyeelada uu Ej-Ay-Fi/Aydhis-ku u gaadhsiiyay Ibraahim iyo Faadumo ma aha oo keliya waayida waalidkood balse wuxuu sidoo kale baabi'iyey noloshoodii gebi ahaanba.



## Hawl-galka 4.7

### Hawlgal shakhsi-shakhsi ah

1. maxaa kaaga kordhay sheekadaa kore?
2. sidee buu cudurka Ej-Ay-Fi/Aydhis-ku caruurta ugu horseedaa khatarta dibjirnimada?
3. Isla falanqeeya soona qaata tusaale ku saabsan qoysas uu sidaas oo kale nolashoda u baabi'iyey Ej-Ay-Fi/Aydhis-ku ee aad taqaanaan haday jiraan, oo ay caruurtoodii darbi jiifnimo u damban say.

Bal aynu hadda si kooban u dulmarno saameynta Ej-Ay-Fi/Aydhis-ka uu ku leyahay caruurta. Wadamada Afrika ee ka hooseeya saxaraha, ee ay Itoobiya ka mid ka tahay, ayaa ah wadamada ay caruurtu yihiin qaybta ugu nugul ee ay asiibto halista iyo dhibaatada ugu daran ee cudurkan dilaaga ah.

- *Xaddi badan oo ah tirada caruurta ee la dhalatay Ej-Ay-Fi (HIV) oo ay u soo gudbiyeen hooyooyinkood uurka lahaayeen markay umushii ama naas-nuujintii. Caruurtani aad iyo aad bay ajadooda nololeed mugdi ugu jirtaa oo intooda badani waxau dhintaan 2 ama 3 jirkooda kahor.*
- *Dhibaatooyinka uu cudurkan Ej-Ay-Fi/Aydhiska uu ku hayo caruurta kuma eko waayida ay waalidkood waayayaan oo kaliya ee wuxuu xattaa u sababaa dhibaatooyin ay ka mid yihiin darbi jiifnimo iyo in laga dhigto shaqaale oo lagu xad-gudbo xuquuqdooda.*
- *Aad bay ugu adkaatay Ej-Ay-Fi (HIV) ga dartii inay caruurtii agoonta ahayd helaan wax u diyaara, sida nafaqo ku filan, daryeelka caafimaad ee aasaasiga ah, waxbarasho, dhar iyo hoyba. In badan oo uu agoomo ka dhigay Ej-Ay-Fi/Aydhis (HIV/AIDS) ku oo loo diray si ay ula noolaadaan Awoow ama Ayeeydood ama qaraabada kale ee xigtada u ahayd.*
- *In kale oo badani waxayku nool yihiin oo ka mid ah agoonta agagaarka waddooyinka iyaga oo bilaa miciin ah.*
- *Waxay qaarkood u horseedaa in ay jidhkooda kaganacsadaan.*

# 4.2 SAAMEYNTA DHAKHSA U KORADHKA TIRADA DADKA

***Marka uu dhamaado cashirkan kadib, ardaydu waxay a woodi doonaan in ay:***

- cadeeyaan saameynta dhakhso u koradhka dadweynaha ay ku leedahay adeega bulshada, sida waxbarashada, caafimaadka iwn.
- aqoonsadaan saameynta ay dhakhsa u korodhka dadka ku leedahay dhanka dhulbeereedka, dhul cawseedka, iwm.
- gaadhaan go'aamo ka caawin kara xalinta dhakhsa u korodhka dadka dhibaatooyinka ay u horseedaan dalkeena.

## Erayada Furaha u ah Cashirka

- Dadweynaha
- Dhalmada
- Dhimashada
- Koradhka tirada dadka-guryeynto
- Adeega bulsheda
- Xad-dhaaf dadweyne
- Dhul beereed
- Dhul cowseed
- Waxbarashada
- Daryeel caafimaad



## Hawl-galka 4.8

### Dood kooxeed

Koox koox uga dooda su'aalahan soosocda

1 Maxay kulatahay in uu sababo dhakhso u korodhka tirada dadka?

2 Dhakhsa u korodhka tirada dadka miyey tahay dhibaato ka jirta deegaankeena soomaalida ee Itoobiya? Haday jawaabtu haa tahay? Sabab? Sidee?

Wadamada soo koraya ee Afrika intooda badan, ee ay Itoobiya ka midka tahay waxaa ka jira oo ay dabeeco u leeyihiin dhaksa u koradhka tirade dadka. Sababta ugu weyn ee arintan waa saamiga dhalasho oo ah mid aad u sareeya iyo saamiga dhimasho oo sii yaraanaya (hoos u sii dhacaya).

Dhakhsa u koradhka tirada dadka ayaa xad ka bax ka dhigay dadweynaha wadamo badan oo Afrikaan ah. Marka uu koradh ka dadweynahu noqdo ka badan waddan ama deegaan inta karaan kiisa ah ee uu qaadi karo ama uu awoodi karo, xaalkaas waxaa loo yaqaanaa xad ka baxa ama xad dhaaf dadweyne.

Saamaynta ka dhalata dhakhsa (xawli) u koradhka tirada dadka:

- *Baaba'a khayraadka dabiiciga*
- *Ka sii darida (sii xumaanta) heerka nolasha*
- *Ka sii darida adeega bulshada*

Itoobiya waa wadanka $3^{aad}$ ee ugu tirada dadka badan Afrika ee soo raaca Nayjeeriya iyo Masar. Dhakhsa u korodhka dadka waa qodob ka nid ah qodobada keenaa dhibaatooyin ka dhaqaale, bulsho iyo deegaan ee wadanka.

## 4.2.1 Saameynta Adeega Bulshada

Adeega bulshadu waa adeegyada ay dawladi siiso ama u fidiso Muwaadiniinteeda. Adeegyadan waxaa kamid ah: waxbarashada, daryeelka caafimaad, guriyaynta, gaadiidka, biyaha, laydhka i.w.m Marka uu dadku u kordho si xawli ah, waxaa aad ugu adkaata dawlada gaarsiinta, adeegyada ay u baahanyihiin muwaadinii nteeda in ay ufidiso.

Koradhka dhakhsaha ah ee tirada dadka:

- *wuxuu sababa in ay dawladu dabooli weydo baahida dadkeeda.*
- *wuxuu nusqaamiyaa tayada adeega bulshada.*
- *wuxuu cidhidhi galiyaa ama ka dhigaa adeegyada bulshada sida caafimaadka, waxbarashada, gaadiidka i.w.m kuwo bilaa tayo ah.*

Bal aynu fiirino sida korodhaka dhaqsaha leh ee dadku u saameeyo qaar kamid ah adeegyada bulsho sida waxbarashada iyo daryeelka caafiimaadka.

### Waxbarashada



**Hawl-galka 4.9**

#### Koox koox uga dooda

Raac hab-racan lagu siiyay ee hloos ku xusan

1 Sameeya kooxo yaryar
2 Koox kastaa ha qaadato jaantusyada tirada guud ee ardada dugsigiina ee 10 -kii sano ee ugu dambaysay.
3 Koox kastaa ah isbarbar dhigaan tirada ardayda ee fasalkiiba ee wakhti xaadirkan, 5 sanno kahor iyo 10 sanno ka hor.
4 Koox-waliba ha isla falanqayso sida ay tirada ardaydu u korodhay dugsigooda hana ka qoraan warbixin.

Marka ay dhalashadu aad ugu siyaado goob, tirade dadka ee goobtaas aad ayey si xawli ah ugu kordhi, waxaa kale oo aad u kordhaya tirade caruurta da'da iskoolka gaadhay ee goobtaas. Markaas, arintan waxay keeni in ay daruuri noqoto in ladhiso dugsiyo dheeraad ah, la tababaro macalimiin dheeraad ah iyo in la diyaariyo buugaag arday oo badan. Si kastaba ha ahaatee, waxaa arintan la suuragalin karaa hadii uu horumaka dhaqaale uu yahay mid suuragalinaya oo dabooli kara baahida sii kordhaysa ee waxbarasho. Isku soo aruuri oo, waxaa halkaas ka cad in dhakhsa u korodhka tirada dadka uu cadaadis ku beero hababka

dugsiga iyo fidintooda waxbarasho (tacliineed) goobaha uu dhaqaalahoodu sida gaabsiga ah u korayo.

Tusaale ahaan, dalkeena Itoobiya, dhakhsa u koradhka tirade dadka wuxuu sababay in ay korodho baahida waxbarasho. Waayahan dambe, inkasto iskuulo cusub oo badan ladhisay, hadana tirada guu ee ardayda waxay u korodhay si aad u badan.

Dhakhsa u korodhka tirada caruurta gaadhay da'da iskuulka wuxuu sababay:

- *In caruur tiradoodu badantahay ayna helin fursad ay ku aadaan ama dhigtaan dugsiga.*
- *In fasalada iskuulada ee meela badan ay ahaadaan tandhaaf.*
- *In ardaydu ayna helin qalabgo waxbarasho oo kufilan, sida buuga ardayga, maktabada wax lagu akhristo i.w.m.*
- *Saamiga macalinka iyo ardayda oo aad u sareeya, taasoo keenta in uu barihii si wanaagsan ugudan waayo shaqadiisii.*
- *Tayada waxbarashaduna oo uu guud ahaan hoos u dhac ku yimaado.*

## Daryeelka caafimaadka



### Hawl-galka 4.10

#### Dood kooxeed

1 Maxay yihiin dhibaatooyinka dhanka fidinta adeega daryeelka caafimaad ee ka jira degmada aad ku nooshihiin?

2 Ma u malaynaysaa dhibaatooyinkaasi in ay la xidhiidhaan dhakhsa u korka tirada dadka ee degmada aad ku nooshihiin? Sabab?

Dhakhsa u koradhka tirada dadka wuxuu keenaa ku filaansho La'aanta adeega caafimaadeed. Waxaana arintan sababaya, marka tirada dadku ay koradhaba waxaa buux dhaafaya xarumihii caafimaad. Waxuu sidoo kale culays fuulayaa xirfadlayaasha caafimaad, haddii kale xarumo waa wayn oo la dhiso iyo xirfadleyaal loo soo tababaro si loo daboolo baahida dadka ee sii kordhayga ay aa lagamamaarmaan noqon.

Dalkeena Itoobiya, dadka intiisa badan mahelaan adeeg caafimaad oo casri ah. Si kastaba ha ahaate, dhibaatadan way ku sii kala darantahay miyiga iyo magaalada, oo xaalada magaalooyinka ayaa dhaanta midda miyiga.

## 4.1.2 Saameynta dhul-beeredyada iyo cuno helida



### Hawl-galka 4.11

Idinko koox koox ah ka dooda

Su'aalahan soosocda.

1. Wax dhibaata ah oo dhulbeereed iyo dhul-daaqsin yaraan ah ma ka jirtaa aaga aad ku nooshihiin ama degmadiina?
2. Side baad u aragtaan in uu dhakhsa u koradhka tirada dadka keeno ku fillaan la'aan dhulbeereed iyo dhul-cowseedba iyo waliba hoos u dhac ku yimaada waxsoo saarka?

Itoobiya iyo wadamada kale ee Afrika, ayey dadka intiisa badan yihiin kuwo ku hawlan beeraha (qodashada beeraha iyo dhaqashada xoolaha). Iyada oo uu xaalku sidaa yahay ayaa hadana ay wadamadan ka jirtaa dhul-beered iyo dhul-daaqsin yaraan uu sababay dhakhsa u koradhka tirade dadka ee ka jira wadamadan. Hadaba, xaaladan waxay si adag u saameynaysaa waxsoosaarka dadka.

Dhakhsa u korodhka tirada dadka waxay keentaa:

- *Inay korodho baahida looqabo xarumo caafimaad sida isbitaalada, kilinigyada (xarum aha la isku baadho) iyo xarumo caafimaad oo badan*
- *Inay siyaado baahida qalabyada caafimaad sida dawada, shaybaadhyada, sariiraha iyo qalabyada kale..*
- *Dadka oo cadaadis saara isuguna taga xarumaha caafimaad oo aan aheyn kuwo kufilan ama ay dhacdo in ay ku filaan waayaan dhakhaatiirta, kalkaaliyayaasha i.w.m. Tan dhaafka ama xad ka baxa dadka isugu imanaya goobaha caafimaad waxay hoos u dhac ku keentaa tayada adeega caafimaad ee loo fidinayo.*

Hadii uu koradhka dadka ee deegaan ama waddan uu yahay mid si aad ah u kordhaya, waxaa sidoo kale la kordhaya tirada dadka u baahan in la quudiyo. Hadii xaalkan, aana lagu kabin ama uu san ku lamaanaya wax soosaar cuno oo aan si dhakhsa ah ama dagdag ah u sii kordhaynin, waxay inoo hagi oo uu dhakhsa u koradh ka dadku inugu hogaamin cuno yaraan aad u ba'an. Xaaladani waxay si dhab ah uga jirtaa wadamada Afrika ee koradhka dadweynuhu ka dhakhsaha badan yahay waxsoo saarka beeraha. Waana arrintaan darteed sababta ay, waddamo badan oo Afrikaan ah ay aalaa uga baahan yihiin caawimada (gargaarka) cuno wadamada reer Galbeedka.

Tusaale ahaan, waaxda fidinta beeraha ee Itoobiya kontankii sannoo ee ugu dambeeyay waxay ahaayeen kuwo aad u liita ma aana awoodi Karin inay taageero u fidiyaan tirada dad ee aadka u koraysa. Sannad walba malaayiin qofayaa kaalmo cunnoo u baahanayay. Sidaa darteed, dawlada waxaa la soo darsayay sidii ay u xalin lahayd dalagyada cunno ee ay la soo dagayso ama kaal nada cunno ee uga imanaysay waddamada horey u maray.



### Hawl-galka 4.12

Daraasaad gooni gooni ah.

1 waydii waalidkaa waxayaabaha sababa dhibaatooyinka adeega bulshada ka jira deegaankiina iyo aaga aad ku nooshihiin?

2 Ka soo diyaari warbixin waxaad waalidka ka soo koradhsatay.


3 u soo jeedi ardayda kale.

## 4.3 MAAMULKA SUUBAN, XUQUUQDA CARUURTA SHILALKA IYO BADBAADADOODA

***Marka uu dhamaado cashirkan kadib, ardaydu waxay a woodi doonaan in ay:***

- Sheegaan astaamaha dawlada suuban
- aqoonsadaan ujeedada shuruucda iyo xeerarka iskoolkooda.
- Qeexaan macnaha la xisaabtanka, masuuliyada iyo cadcadaanta.
- qeexaan musuqa, oo ay sharxaan faa'iidoooyinka musuq La'aantu Leedahay.
- Sharxaan xuquuqdooda, sida ku xusan heshiiski UNESCO ee xuquuqda caruurta caalamiga aheyd.
- gartaan sida uu yahay herka halista iyo shilalka aaga ay daganyihiin.
- gartaan habaka looga badbaa di karo shilalka.
- Kula taliyaan caruurta kale sidii ay iyaga laftigoodu isaga ilaalin lahaa yeen shilalka kala duwan

### Erayada Furaha u ah Cashirka



- Maamulka suuban
- Sharciga
- Masuuliyad
- Cadcadaan
- Xuquuq
- Dawlado
- Waajibaad
- La xisaabtan
- Dimuqraadiyada
- Shilka
- Badbaadada
- Nabad-gelyada
- Musuqa
- Dadaalka

## 4.3.1 Maamulka Suuban



### Hawl-galka 4.13

Koox koox uga dooda

1 Isu qaybiya koox koox tira yar ka kooban.

2 Koox kastaa ha kadoodo arimaha hoos ku qoran.

- b ka dooda iskana dhaadhiciya xeerarka iyo shuruucda dugsigiina.
- t Waajibaadka iyo xuquuqda ardeyda ee dugsigiina.
- j Maxaad samayn lahayd hadii uu xuquuqdaada meel uga dhaco macalin kaaga ama maamulaha dugsiga ama qof kale?
- x Isla falanqeeya Ahmiyada xeerarka iyo shuruucda dugsigiina?
- kh Faaiidada adeecida xeerka iyo sharciga schoolka.

3 koox walba wrbixinteeda ha u soojeediso fasalka silo wada falan qeeyo.

Maamulka suuban waa maamulka ku dhisan cadaalad iyo qawaaniin macquul ah, shuruuc iyo waliba xeerar. Waa hab maamuleed ku salaysan:

- *Ilaalinta xuquuqda iyo xornimada muwaadin kasta.*
- *Isticmaalka awooda si loo ilaaliyo shuruucda, xeerarka iyo hirgalintooda.*
- *U gudashada xilka iyo masuul iyada shaqo sidii loogu tala galay*
- *xushmayta shuruucda jirta*
- *la xisaabtan iyo si cadcadaani ku dheehan tahay loola xisaabtamo madaxda dawlada.*
- *In ay usinaadaan dhamaan dadka*
- *Leh go aamo cadli ah oo Laqaadan karo*
- *Ilaaliya waajibaadkoode iyo masuuliyadooda*

## Sheeko Gaaban

### Horjoogaha

Meygaag waa arday dhigta fasalka 5aad. Waana horjoogaha ama kaabagalaaska fasalka. wuxuu marwalba isticmaalaa xoog ama awood si uu u ilaaliyo anshaxa iyo edabta ardayda fasalka uma gudbiyo magacda ardayda edab darada sameysa macalimiinta balse, markasta wuu af-lagaadeeyaa oo ciqaabaa ardayda.

Meygaag gabdhaha iyo wiilasha si isku mid ah ulama dhaqmo. Wuxuu mar walba si xushmad La'aan ah u caayaa gabdhaha. Kumana ekaado ardada fasalkiisa ee xataa wuxuu caayaa oo uu garaacaa ardeyda fasalada kale.

Ardeyda ayaa mar walba u dacwoota macalimiinta oo u sheegta cadaalad darada iyo naxariis La'aanta u Meygaag kula dhaqmo. Waxayna doonayaan ardada oo dhani in Meygaag Laga badalo oo arday kale looga dhigo horjooge.

## Hawl-galka 4.14



Howlgalkan wuxuu ku saabsanyahay daraasaadka aan kor ku sooqaadannay.

1 Dabeecadaha maamulka suuban ee hoos ku qoran kuwee ayuu meygaag ku xad gudbay oo u san ku dhaqmin?

- *Sinaanta*
- *ilaalinta xaquuqaha*
- *ilaalint shuruucda iyo dhaqankooda*
- *isticmaalk aawood ka baxsan sharciga*
- *istcmaalka qaabab cadli ah.*

2 Hadii Laguu doorto kaabagalaas (horjooge), sidee ayaad u maareyn Lahayd ardada fasalka?

Bal aynu hada si xogwaran leh isla falan qayno qaar kamid ah muuqaalada maamulka suubban.

### 1 *La xisaabtan (Xilkasnimada masuuliyada)*

***Laxisaabtanku*** waa mid ka ah dabeecooyinka maamulka suuban, taaso ah in maamulku noqdo La weydiinkaro masuulna ka ah dhamaan talabooyinka ay qaadaan iyo ficiladoodaba. Waa hab ay dadku awood u yeelanayaan in ay kala xisaabtamaan masuulkata ficilada iyo talaaboyinka uu qaado.

Waxayna dadku awoodaan in ay wixii sharci daro ah ee uu masuuli kagalo cida uu masuulka ka yahay in ay Latiigsadaan sharciga. Laxisaabtanku wuxuu dadka u xaqiijiyaa inuuna in madax ama sarkaalkasta uu sharcigu ka sareeyo lana waydiin karo oo loo qabsan karo falalka xun xun ee uu ku kaco go aana uu sharcigu ka qaadan doono. Jiritaanka la xisaabtanku wuxuu madax kasta masuul uga dhigayaa inla waydiin karo go'aamada sharci darada iyo fal dhaqameedyada uu ama ay fuliyay/fulisay.

## Sheeko Gaaban

### Sargaal boolis ah

Xasan waa boolis ka shaqeeya JigJiga. Waxaa la dhashay walaal la yidhaahdo Cabdiraxmaan, kaasoo ah arday dhigta dugsiga sare. Maalin ayey Cabdiraxmaan isku dheceen macalinkiisii Ingriiska, edabdaro uu sameeyey darteed. Cabdiraxmaan wuxuu af-lagaadeeyay macalinkii oo uu waliba u gacan qaaday.

Wuxuu ku dhuftay feedh macalinkiisii ardeyda hortooda. Anshax xumadaa darteed ayaa Cabdiraxmaan looga eryey dugsigii, waxaana ka eryey maamulihii dugsiga.

Maalintii dambe, markuu Xasankii booliska ahaa maqlay eriska walaalkii, ayaa wuxuu soo aaday dugsigii. Kadibna wuxuu xidhay oo uu kaxeeyey macalinkii u dhigayay Ingiriisiga saldhiga booliska. Inta uu usii waday xerada booliska ayuu Xasan si x un u-jidha dilay macalinkii gaadhsiiyeyna dhaawacyo xun xun. Waxaa la soo daayey macalinkii sadex cisho ka bacdi.

Kadib, macalinkii ayaa ka dacweeyey Xasan maxkamad. Deetana Xasan laf ahaantiisii ayaa la xidhay, lana geeyey maxkamad. Kadib markii la dhageystay labadoodaba, ayey maxkamadii cadeysay Xasan in uu yahay dambiile, kuna xukuntay lix bilood oo xadhig ah.

## Hawl-galka 4.15



### Hawl-galkan wuxuu laxidhiidha sheekada aan kor soo aragnay

Laba-laba u falanqeeya

1 Xasan miyuu mutaystay xabsiga? Sabab?
2 Sidee ayaa loogala xisaabtamay xasan ficiladiisii ama talaabooyinkiisii?
3 Macalinku miyuu muteystay xadhiga iyo Jidhdilka?
4 Maxaad sameyn laheyd hadaad meesha xasan ku jirto?
5 Miyuu macalinku ku saxsanaa dacwada uu xasan kasoo dacweeyey maxkamada?
6 Maxaad samayn lahayd hadaad macalinka tahay?

## 2 *Cadcaddaan*

***Cadcadaanta:*** waxaa loo tixraacaa xaalada ay hawl wadeenada dawladu ay ku samaynayaan macluumaad ku saabsan waxqabad yadooda iyaga oo

usoo bandhigaya warbixin tooda sida ugu fudud, ee rasmi ah ee qancin kara muwaadiniinta dalka oo ay markasta heli karaan.

Cadcadaantu waa mid ka mid ah waxyaabaha ka tirsan maamulka suuban taasi oo ka kooban inay muwaadiniinta xaqu leeyihiin inay sida ugu fudud ee ay ku heli karaan warbixino ku saabsan xilka, masuuliyadaha, shuruucda xeerarka, siyaasadaha, go’aamada, ficlada iyo waxqabadyada kale ee dawlada saraakiisheeda iy xildhibaannada rayadka ah. Aragtida ugu muhiim san ee cadcadaantu waa in guudahaan deegaanka dawlada ama xukumaddu iyo waxqabadyadeeduba ay noqdan kuwo cadcad oo daaha laga qaday oo ay dadku wada yaqaanaan haddii aynu si kale u dhignana: wax-qabadyada iyo hawlaha xukuumadu u qorshaysan waa in ay shacabkeeda u soo ban dhigto oo uusan ka qarsoonaanin.



## Hawl-galka 4.16

Koox u falanqayn

1 Miyay kula tahay inaad xuquuq leedahay si aad u ogaatid kuwan soo socda ee dugsigaaga faahfaahi sababta?
- *Xilka iyo masuuliyadaha saaran ardayda, macalimiinta, maamulaha I.W. M*
- *Xeerarka iyo shuruucda dugsigiina.*
- *Go’aamada iyo xeerarko maclmiinta iyo maamulka dugsiga.*

2 Waa maxay waxtarka ay cadcadaantu u leedahay meelaha sida dugsiyada I.W.M.

Faa’iidooyinka badan ee ay dadka u leedahay cadcadaantu waxaa ka mid ah in ay:

- *Ogaadaan wax ku saabsan dawladooda iyo hawlaheeda*
- *Ku qiimeeyaan oo ku dabagalaan hawl wadeenadeeda.*
- *U samaysaa saraakiil dawladeed oo lagu xisaabtamo ficiladooda iyo raasmi ahaantooda.*
- *U samayso saraakiil lagu xisaabt amaiyo go’aamadooda*
- *Kaga fogaadaan xadgudubyada awoodeed sida musuqa ay ku kacaan saraakiisha dawladu.*
- *Soojiidasho leh xukuumada iyo saraakiisheeduba iyaga oo cadaadis kasta saaraya wax kasta oo ay shaqada ku hagaajinayaan.*
- *Kala qayb qaadashada sidii loo fulin lahaa xeerarka, sharciyada iyo siyaasadaha dawlada.*

## 3 *U-hogaansanaanta sharciga*

***U-hogaansanaanta sharciga*** waa arin cid walba u taala, oo majirto cid sharciga ka sareysa.

U hogaansanaanta sharciga waxaa ka mid ah ku sugnaanshaha waxyaabahan soosocd:

- *Usinaanta sharciga ee qofna qofka kale ka xigin*
- *Qof walba wuxuu xaq uleeyahay inuu bad baado helo*
- *Qofna kama sareeyo sharciga, xata masuuliyiinta ugu sareysa*
- *Sharcigu wuxuu xadidaa awooda cid walba xataa maamulka ugu sareeya.*
- *Dhamaan ficilada iyo go'aamada ay dawladu qabanyso kuwo sharciga u hogaansan weeyaan.*



### Hawl-galka 4.17

Laba laba isula-falanqeeya.

Hadii uu masuul sare oo dawlada ka tirsan lunsado lacag ay dawladu ugu talagashay in bulshada wax loogu qabto maxay aragtidaadu tahay oo aad ka ga jawaabi su'aalahan soo socda.

1. Ma sharci baa in uu boolisku baadhitaan ku sameeyo masuulkaas ka dibna maxkamad la saaro?
2. Muxuu yahay doorka ay maxkamadu ku leedahay ee laga doonayo in ay qabato?

Jiritaanka u hogaansanaanta sharciga waxay astaan u tahay dowlad wanaaga, taasoo horumarisa sinaanta, cadaaladda, ammaanka iyo xasiloonida. Intaa waxa dheer, in jiritaanka u hogaansanaanta sharciga wuxuu gacan ka geystaa siddii looga baaqansan lahaa sharci darrada, nidaam darrada, qalalaasaha dagaal, musuqmaasuq, iyo wixii la mid ah.

## 4 *Musuqmaasuq la'aanta*

Musuqmaasuqa waxa lagu qeexaa inuu yahay ku xad gudubka xilka oo danno gaar ah lagu fusho iyaddoo danaha dadka kale lagu waxyeeleeyo. Waa fal loo adeegsado xilka dadka loo hayo si sharci darro ah oo khalad ah iyadoo hal qof ama dadka qaar ku daneeystaan, taasoo ka dhan ah waajibaadka iyo xuquuqda dadka kale.

Musuqmaasuqu waa dhibaato weyn oo caalamka oo idil ka tabanayo. Waa dhibaato wiiqda dadaalada shaqsiyaadka, mujtamaca, iyo dawladaha gebi ahaan.



## Hawl-galka 4.18

Su'aalahan soo socda si koox ahaan u wada falanqeeya.

1 Maxay kula tahay musuqmaasuqa inuu ka dhasho?

2 Maxay kula tahay dhibaatooyinka ka dhasha musuqmaasuqa?

3 Weligaa ma maqashay xaalado musuqmaasuq ah deegaankaaga ama meelo kale? Jawaabtu haddii ay haa tahay, isla falanqeeya.

Musuqmaasuqu waa fal lid ku ah dawlad wanaaga, waxayna waxyeelo ku leedahay dhaqaalaha mujtamaca, horumarka siyaasada iyo sidoo kale xuquuqda aadanaha. Natiijooyinka xun xun ee musuqmaasuqa ka dhasha waxaaka mid ah:

1 **Dhibaatada horumarka dhaqaale**

- *Wuxuu yareeyaa maal gashiga waddanka gudahiisa*
- *Wuxuu kordhiyaa qiimaha ganacasatada*
- *Wuxuu yareeyaa awooda waddanka inuu soo jiito maalgashi dibadda kaga yimaada*
- *Wuxuu sababaa deganaan la'aan xagga dhaqaalaha*
- *Wuxuu yareeyaa habsami u socodka gargaarka dibadda iyo deeymaha.*

2 **Dhibaatada horumarka maamul iyo kan siyaasadeed**

- *Wuxuu dhaliyaa dowlad aan lala xisaabtami karin*
- *Wuxuu wiiqaa qaab anshaxeedka maamulk dawlad.*
- *Wuxuu xanibaa inay dhalato maamul si wanaagsan wax u qabta*
- *Wuxuu baabi'iyaa kalsoonida bulshada dowladda ku qabto*
- *Wuxuu halis geliyaa ammaanka qoomiyadeed iyo nidaamka*

3 **Dhibaatada ku timaada xuquuqda aadanaha**

- *Wuxuu dhaliyaa cadaalad darro iyo sinaan la'aan*
- *Dadka masaakiinta ayuu qadiyaa*
- *Wuxuu buriyaa fursadaha muwaadiniinta in ay helaan sinaan*
- *Wuxuu yareeyaa heerka helista hawlaha dawladdu dadka u qabato*



## Hawl-galka 4.19

1 Qor sheeko gaaban oo ku saabsan xiriirka ka dhaxeeya la xisaabtanka iyo cadcadaanta.
2 Qor sheeko gaaban ku saabsan doorka shaqsiyaadka iyo hayadaha ee la dagaalanka musuqmaasuqa.

## 4.3.2 Xuquuqda Caruurta



## Hawl-galka 4.20

1 Waa maxay macnaha xuquuq?
2 Maxaa faa'iido ay leedahay barashada xuquuqdaada?

Barashada xuquuqdaada waxay ka caawineysaa inaad cayinto kuna dhaqanto. Markaad garaneysid xuquuqdaada waxaad sheegan kartaa xaqa aad u leedahay badbaado dhan ka ah nooc walba oo xadgudub iyo meel ka dha cah. Sidaa darteed waa inaad Ahmiyad weyn siisaa sidaad ku ogaan lahayd oo aad u ilaashan lahayd.

Badbaadinta iyo sare u qaadista xuquuqda waxay ka mid tahay ujeeddooyinka Ummadaha Midoobay. Sababtan darteed ayuu ururka Q.M. uu soo saaray bayaanka xuquuqda caruurta sanadkii 1989. Heshiiskaa waxaa saxeexay waddamo badan oo Itoobiya ay ka mid tahay. Waddamo kala duwan ayaa wax ka qaatay waxyaabaha uu ka kooban yahay heshiiskaa iyaddoo dastuurka Dawlada Federaalka Itoobiya ee 1995tii lagu daray.

Sidda uu qabo Ururka Qaramada Midoobay iyo Dastuurka Dawlada Federaalka Itoobiya, caruurtu waxay xaq u leeyihiin inay.

- *Nolol helaan*
- *Yeeshaan magac iyo dhalasho*
- *Waxbarasho helaan*
- *Gartaan waalidkood*
- *Ka helaan daryeelka lagama maarmaanka ah waalidkood ama cidii gacanta ku haysa*
- *Ka badbaadaan shaqada lagu qasbo ee aaney gaarin da'ahaan.*
- *Ka xoroobaan waxyaabaha wax yeelayn kara naftooda.*
- *Ka badbaadaan xad gudubka loo gaysto jidhkooda (jidh-dilka) iyo kuwa maskax ahaaneedba.*

- *Ka badbaadaan dhaqanka xun iyo caadooyinka sababa waxyeelo jidh ahaaneed iyo mid maskaxeed.*

## Hawl-galka 4.21



Maxaad qaban doontaa haddii xuquuqdaada ay meel kaga dhacaan dad guriga kugu la nool ama meelo kale sida dugsiga?

## 4.3.3 Shilalka iyo Bad baadadooda (samatabaxa)

Maxaa ka mid ah sababa ha ugu waawayn ee ay shilalku uga dhacaan deegaanka kugu xeeran? Goorma ayaad u malaynaysaa in uu shil kugu dhaco? Waxaa laga yaabaa inuu kugu dhaco marka aad ka soo dhacdo jooga meeshay dooni ha noqotee.

Waxaa kale oo ka mid ah:

- *Marka aad qaadatid daawo aan laguu qorin*
- *Shil baabuur oo ah markii aad ka gudbaysid waddo.*

***Shil:*** *waa dhacdo qorshaysan oo kedis ah natiijadeeduna tahay dhaawac, jab ama qaar kamid ah noocyada murugo ee calool xumadal eh ku soo gaadhsiiyo.*

Sababaha aasaasiga ah ee shillalka noocaan ah waa kuwa guud ee xaaladaha aan la badbaadin Karin ee mishiinada qalabka ama waxyaalaha inagu hareeraysan ee falalka halista ah ee ay shaqsiyaad u sababaan jaahilnimo, isyeelyeelka xeerarka samatabaxa (amniga).

### Sheeko Gaaban

***Ilmo (canug) curyaamay:*** kumuunnga waa ilmo ka soo jeeda Angoola. Markii dagaalada sokeeye ay dhaceen wuxu ahaa 10 jir maalin uu ku ciyaarayay walax ka samaysan bir ayaa ku qaraxday wuuna ku dhaawacmay natiijadiina waxay noqotay inuu ku waayo hal il ah iyo lug. Wuxu ku boodaa loox ama qori hadda kumuunga waa canug (ilmo) curyaan ah.



## Hawl-galka 4.22

Akhri sheekada gaaban oo falanqee sababaha shilka dhaliyay iyo cidii ku lug lahayd

shilalka ka dhaca meelo badan waxaa ka mid ah shil baabuur, shilalka xayawaanada halista ah, daadadka, xariga korontada I.W.M.

U yeelo fiiro kuwan:

- *Sii mudnaanta meesha loogu tala galay dadka inay ka gudbaan waddada.*
- *Dhig dawada meel caruurtu aanay gaadhi karin.*
- *Ka fogee naftaada xariga korontada halista ah.*

## Xeerarka Badbaado

Kuwaani waa hababka lagu xaqiijiyo u samafalida caruurta:

- *Qof kasta waxaa ka saaran masuuliyad; si loo xaqiijiyo badbaadada caruurta.*
- *In loo diyaariyo xirafadaha tababarada, ilaalina waxbarashada iyo taageerida bulsho.*
- *Bayaanka xuquuqda caruurta ee qaramada midoobay.*
- *Meelaha shilka leh waa in loo muujiyo ama la aqoonsiiyo si taxadar lehna warqad ama calaamad lagu dhejiyo oo digniin ah.*
- *Badbaadada caruurtu waa mid lagu xoojiyay shuruucda wadanka.*
- *Badbaadada caruurtu waa mid mar labaad lagu xusay dastuurka jamhuuriyada Dimoqraadiga Federaalka Itoobiya Qodobka 35/2.*

Qaar ka mid ah calaamadaha loo aqoonsaday khatarta ayaa hoos ku xussan.




1 2 3 4

# SOOKOOBIDA CUTUBKA

Cutubkani, waxaad ku soo baratay arimaha muhiimka ah ee soo socda.

- Aidsku waxaa sababa HIV, kaas oo ah feyras burburiya unugyada dhiiga cad ee difaaca jirka aadamaha.
- Inta ka hooseysa saxaraha Afrka waa gobolka caalamka uu ugu badan yahay cudurka HIV/AIDS.
- Caado Dhaqmeedyada Xun xun inay yihiin kuwo caafimaadka u daran oo dadka halis u geliya cudurka HIV/AIDS. Waxaa ugu wacan waxay ku yimaadaan qaab aan nadiifsaneyn, ammaanka aan sugneyn iyo xaalad aan difaac lahayn.
- Ej-Ay-Fi/Aydhis (HIV/AIDS) wuxuu dhibaato daran ku hayaa dhaqan dhaqaalaha shaqsiyaadka, Qoysaska, iyo wadamadda guud ahaan.
- Itoobiya waxa jira hal milyan in ka badan caruur ah oo cudurka HIV/AIDS uu agoon ka dhigay.
- Dhalashada caruurta oo badataa ayaa ah sababta ugu weyn ee koriinka dadka xawliga ah ee Itoobiya iyo waddamo kale oo Afrikaan ah.
- Koriinka bulshada xawliga ah wuxuu dhibaato ku hayaa tirrada iyo tayada howlaha dowlada dadka u qabato sidda waxbarashada iyo daryeelka caafimaadka.
- Kala goo-gooyn iyo tacabka xad dhaafka ah ee dhulbeeereedka Itoobiya ee waddamo kale ee Afrikaan ka ah ayaa waxaa ugu wacan dadka tirrada xad dhaafka leh ee ku nool dhulkaas.
- La xisaabtan, cadcaddaan, u hogaansanaata sharciga, iyo musuq la'aan ayaa ah Qodobada ka midka ah dwlad wanaaga.
- Caruurta waxay leeyihiin xuquuq sida ku qoran Bayaanka Ururka Ummadaha Midoobay heshiiska, Xuquuqda caruurta iyo dastuurka Dowladda Federaalka Itoobiya (JDFI).

# LAYLISKA GUUD EE CUTUBKA 4aad

## I *Tii run ah "Run" ku qor tii beenahna "Been" ku qor*

1. Cudurka HIV/AIDS ma'laha dawo ka hortag ah.
2. Caado dhaqmeedka foosha xun wuxuu ku booriyaa dadka inay wadaagaan waxyaabaha wax lagu jaro ee jeermiska qaba.
3. Gudniinka gabdhaha waxa lagu tiriyaa meel ka dhac xuquuqda aadanaha

## II *Isku toosi waxyaabaha lagu siiyey ee Joog-u-taxa 'B' kuwa ku qoran Joog-u-taxa "T"*

| | B | | T |
|---|---|---|---|
| 1 | Wuxuu sababaa kala goo goosi dhul beeraad | B | Musuqmaasuq |
| 2 | Waxay ka yeeshaa howlaha mid nadiif ah oo dadku og yihiin | T | Xad dhaafka tirada dadka |
| 3 | Xad gudub xil arimo shaqsiyadeed | J | La xisaabtan |
| 4 | Qof ka sareeya sharciga ma jiro | X | Xuquuqda caruurta |
| 5 | Waxbarasho helid | KH | Cadcaddaan |
| | | D | u hogaansanaanta sharciga |
| | | R | HIV/AIDS. |

## III *Buuxi meelaha banaan*

1. ___________ waa caado dhaqmeed fool xun oo gabdhaha xoog iyo qasab lagu kaxeysto.
2. Itoobiya dadku uu assiibay cudurka HIV/AIDS badankood waa dad da'dooda u dhaxeysa ___________.
3. Sababta ugu weyn ee xad dhaafka tirada dadka Itoobiya waa ___________.
4. ___________ waa nidaam dawlad ah oo ku salaysan la xisaabtan, cadcaddaan
5. ___________ waa feyras dila unugyada difaaca jirka aadanaha oo lagu magacaabo ___________.

## IV *Ka bixi jawaabo gaaban*

1 Sheeg saddex tusaale oo ah caado dhaqmeedka xun xun ee dadka halis u geliya cudurka. HIV/AIDS.

b ______________________________

t ______________________________

j ______________________________

2 Qor laba dhibaato oo kaga timaada koriinka xawliga ee dadka dhanka adeega waxbarasho.

b ______________________________

t ______________________________

j ______________________________

3 Sheeg saddex ka mid ah xuquuqda caruurta lagu soo bandhigay heshiiska Ururka Ummadaha Midoobay iyo Dawladda jamhuuriyada dimuqraadiga Federaalka Itoobiya.

b ______________________________

t ______________________________

j ______________________________

4 Qor saddex ka mid ah dhibaatooyinka musuqmaasuq uu leeyahay.

b ______________________________

t ______________________________

j ______________________________

5 Sharax aad ka bixi sida dadku kaga baaqsan karaan shilalka?

# CILMIGA BULSHADA

## BUUGGA ARDAYGA

### Fasalka 5aad

ISBN 978-99944-2-114-5

JUMHURIYADA DIMOQRAADIGA FADARAALKA EE ITOOBIYA
WASAARADDA WAXBARASHADA

Birr 68.00